



Ku soo Dhowow AMEERIKA

**Buugga Tilmaanta
Qaxootiga**
Somali Version

CAL

OR Cultural Orientation
Resource Center

Ku soo Dhowow AMEERIKA

Buugga Tilmaanta Qaxootiga

Soosaaridda Afraad

2013

**Waxa diyaarisay Xaruunta Ilaha Hanuuninta Dhaqanka
(Cultural Orientation Resource Center)**

**Xaruunta Afafka Hirgashan
(Center for Applied Linguistics)**

Washington, DC

Buuggan macluumaadka ku jira waxa lagu diyaariyay maalgalin ka timi Xafiiska Tirokoobka, Qaxootiga iyo Muhaajirka ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda Maraykanka (Bureau of Population, Refugee, and Migration, United States Department of State), hase yeeshe qasab maaha in macluumaadka buuggu waafaqsanyahay bolosiga hay'addan iyo inay isticmaalayaashu u qaataan in dawladda federaalku ayidsantahay afkaaraha ku jira.



Waxyaabuhu xambaarsanyahay soosaariddan Ku Soo Dhowow Ameerika: Buugga Tilmaanta Qaxootiga wuxuu ku salaysanyahay macluumaad ay u soo tabiyeen Xaruunta Afafka Hirgashan (Center for Applied Linguists) wakaalado ka tirsan ururradan:

Church World Service

Department of Health and Human Services, Administration for Children and Families, Office of Refugee Resettlement

Department of State, Bureau of Population, Refugees, and Migration

Episcopal Migration Ministries

Ethiopian Community Development Council

Hebrew Immigrant Aid Society

International Catholic Migration Commission

International Organization for Migration

International Rescue Committee

Lutheran Immigration and Refugee Service

U.S. Committee for Refugees and Immigrants

United States Conference of Catholic Bishops

World Relief

Ammaan-siin iyo mahadnaq:

Center for Applied Linguistics

Jibril Mohamed Hirsi

Lutheran Social Services of Fargo, North Dakota

Mike Stanley, Mike Stanley Productions

Resettlement Support Center Africa (Church World Service)

Resettlement Support Center East Asia (International Rescue Committee)

Resettlement Support Center South Asia (International Organization for Migration)

Resettlement Support Center Turkey and the Middle East (International Catholic Migration Commission)

Sichan Siv

Tri-Cities World Relief Office, Richland, WA

Youth Co-Op, Inc.

Zohra Daoud

Waxaan u mahadnaqaynaa dhammaan intii wax ku darsatay buuggan. Gaar ahaan waxaan u mahadnaqaynaa Xarumaha Taakulaynta Dib'udejinta (Resettlement Support Centers) iyo xubnaha Guddi-Hawleedka Hanuuninta Dhaqanka (Cultural Orientation Working Group).

Maamulaha Mashruuca: Michal Panner

Tafaftire: Donald A. Ranard

Farshaxanka Jaldiga: sawirka waxa sameeyay Ahmad AlKarkhi

Jaldiga iyo naqshadda gudaha & soosaarka: SW Creatives, LLC

ISBN: 978-0-87281-068-6

Magacyada ku jira qaybaha layliga ee buuggan waa magacyo-beenaad. Hadday dad nool kuwooda noqdaan, looma kasin.

KU SOO DHOWOW HANUUNINTA DHAQANKA!

Buggan tilmaanta ah ee Ku Soo Dhowow Ameerika wuxuu kaa caawin doonaa isu diyaarinta dhowrka bilood ee kuugu horreeya Maraykanka. Wuxu ku tilmaamayaa waxaad filan doontid markaad raadinaysid meel aad ku noolaato, shaqo raadinaysid, la kulantid dadka Maraykanka, iyo la qabsiga dhaqanka iyo bulshada Maraykanka.

Tusmo

CUTUBKA KOWAAD: Geeddisocodka Dib’udejinta	6
CUTUBKA LABAAD: Ameerika iyo Dhaqanka Maraykanka	14
CUTUBKA SADDEXAAD: U Socdaalka Ameerika	26
CUTUBKA AFRAAD: Hay’adda Dib’udejinta	44
CUTUBKA SHANAAD: Guryeynta	56
CUTUBKA LIXAAD: Adeegyada Bulshada	68
CUTUBKA TODDOBAAD: Gaadiidka	80
CUTUBKA SIDDEEDAAD: Daryeelka Caafimaadka	90
CUTUBKA SAGAALAAD: Maareynta Lacagta	108
CUTUBKA TOBNAAD: La Qabsiga Dhaqanka iyo Isbeddelka Doorarka	126
CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD: Xuquuqda iyo Waajibaadka Sharciga araykanku Dhigayo	144
CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD: Shaqaaleyn	160
CUTUBKA SADDEX IYO TOBNAAD: Barashada Af-Ingiriisiga	184
CUTUBKA AFAR IYO TOBNAAD: Waxbarasho	198
CUTUBKA SHAN IYO TOBNAAD: Geeddiga Dheer	214
LIFAAQYO:	222
A. FURAHA JAWAABAHA	222
B. GLOSSARY-GA WEEDHAHA DIB’UDEJINTA LOO ISTICMAALO	225
C. WAJIYADA DAREENKA	229



Cutubka Kowaad GEEDDISOCODKA DIB'UDEJINTA

Sida qaxooti kale oo badan, waxaad go'aansatay inaad dib'udegtid oo aad nolol cusub ka bilowdid dalka Maraykanka. Dib'udegiddu waa tallaabada ugu horreeysa noqoshada deggane rasmi ah iyo, badanaaba, mustaqbalka muwaaddininimada Maraykanka. Dib'udegiddu waa hannaan dheer oo beddeli doona noloshada, kuuna keeni kara loollan iyo rajooyin badan. Qof walba si gaar ah ayay ammuurahani u taabtaan. Waa caadi inaad dareentid niyadkac iyo walbahaar labadaba markaad isu diyaarineysid socdaalkaaga.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Doorarka shaqaalaha dib'udejintu ku leeyihiin inay gadhwadeenka ugu horreeya kuu noqdaan
- » Iskukalsoonidu inay fure u tahay guushaada

Dib'udejintu waa geddisocod dheer oo leh dhibaatooyin iyo fursadaba inta lagu guda jiro. Dhowrka bilood ee kuugu horreeya Maraykanka waxa gadhwade koowaad kuu noqon doona shaqaalaha dib'udejinta.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan hoose ee Af-Ingiriisiga ah waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Kaddib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeyaa tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>geesinnimo</i>	courage	<i>Geesinnimo waa dhiirranaan iyo kahortegid cabsi ama khataraha.</i>
	determination	
	goals	
	independent	
	journey	
	resettlement	
	self-reliance	

Shaqaalaha dib'udajinta ayaa noqon doona hoggamiyahaaga muhiimka ah, sidaa darteed, su'aalahaaga iyo tabashooyinkaaga la wadaag.



RABITAAN IYO WERWER

Murabaca hoose ku sawir ama ku qor waxyaabaha ad mustaqbalka rabtid iyo waxyaabaha ad ka werwersantahay.

RABITAAN

WERWER

RABITAAN

WERWER



Maxaad war ka haysaa nolosha Maraykanka? Hoos ku Sawir ama qor waxyaabahaad maqashay. Markaad dhammayso buuggan, ku soo noqo boggan. Goobaabi wixii weli run ah, wixii aan weli run ahaynna iskutallaab saar.

Nolsosha Maraykanku ma dhib yaraan doonto, gaar ahaan muddada ugu horreysa, laakiin waxa jira dad kaa caawin doona bilowga nolosha. Dhowrka bilood ee Maraykanka kuugu horreeya, shaqaalaha dib'udejinta ayaa gadhwade kowaad kuu noqon doona. Waxay kaala shaqayn doonaan sidii ay kuugu xiri lahaayeen adeegyada, sida adeegyada shaqada iyo fasallada Af-Ingiriisiga. Waxay aqoon iyo khibrad u leeyihiin inay ku caawiyaan, markaa waa inaad la wadaagta su'aalaha iyo werwerkaad qabtid.



Noloshu mararka qaar way adkaan doontaa, laakiin iskuday inaad niyadsamaatid oo xasuusnoow inay wax walba hagaagi doonaan!

Door weyn ayaad ka ciyaari doontaa dib'udejintaada. Qaxooti saddex milyan ka badan oo kaa horreeyay ayaa noloshooda dhistey oo bulshada Maraykanka wax ku kordhiyay, markaa adiguna waad yeeli doontaa! Waa kuwan tusaalooyin kooban oo tilmaamaya qaar ka mid ah dad Maraykan ah oo guulaystay oo noloshooda Maraykanka qaxootinimo ku bilaabay.



Madeleine Albright: Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Maraykanka, ka timid Jamhuuriyadda Jek (Jekoslafaakiyadii hore)



Sohra Daoud: Asaase urur caawiya haweenka Afgaanistaan ee ku nool Maraykanka, ka timid Afgaanistaan



Albert Einstein: Helay abaalmarinta Noobel, ka yimid Jarmalka



Gloria Estefan: Heesaa caan ah, ka timid Kuuba



Jibriil Maxamed Xirsi: Agaasimaha Maamul ee urur samofal ah oo caawiya dadka Maraykanka ee cusub, ka yimid Soomaaliya



Wyclef Jean: Farshaxan caan ah iyo heesaa, ka yimid Haytii



Sichan Siv: Ambaasadoor Maraykan ah, ka yimid Kaamboodiya

Kumar wuxu talo weydiistay maamulaha kiiskiisa iyo khabiirka shaqada ee hay'addiisa dib'udejinta, waxaanu ka bartay siduu shaqo iskii ugu raadsan lahaa. Krishna guriga ama xafiiska hay'adda dib'udejinta ayuu iska fadhiistay oo u ka sugay shaqaaluhu inay shaqo u helaan. Midkee baad u malaynaysaa inay u suurtoogashay inuu shaqo ugu hor helo? Ayaad u malaynaysaa inuu guul gaadhay guud ahaan?

Qasab maaha inaad qof caan ah tahay si ad u guulaysatid. Qaxootiga intooda badani maalin walba way guulaystaan iyagoo si hawl karnimo leh u shaqeeya si ay u gaaraan higsigooda gaarka ah, sida dhowrida ammaanka iyo caafimaadka qoyskooda, shaqo helidda si ay iskugu filnaadaan, barashada Af-Ingiriisiga, taakulaynta carruurtooda iyo degaankooda. Adiguna waxaad ku guulaysan kartaa xirfaddaada, aqoontaada, geesinnimadaada, iyo go'aan adeygaaga.



Markay Naw Baw timid Ameerika iyadoo wadata saddexdeeda carruur ah, shaqadeedii ugu horreysaa waxay ahayd nadiifinta xafisyada, in kastoo ay waddankeeda xoghaye ku ahayd. Shaqadeeda may jeclaysan, hase yeeshe waxay u yeeshay si ay qoyskeeda u caawiso. Inkastoo ay waxoogaa Af-Ingiriisi ah garanaysay, sii fiican uguma hadli karin. Maanta, 6 sannadood ka dib, waxay soo dhoweeye ka tahay xafiiskay nadiifin jirtay muddo badan. Waxay higsanaysaa inay maalin uun noqon doonto maamulaha xafiiska. Naw Baw maxay samaysay si ay u guulaysato?



YOOLKAAGA

Hadda ayay ku habboontahay inaad ka fikirtid yoolkaaga. Ka fikir meeshaad joogtey iyo meeshaad u sii socoto. Meelaha bannaan ee hoose sawir ahaan ku sharax geedisocodkaaga.

Yaad tahay?	Markaad yareyd ee ad joogtey dalkaaga hooyo maxaad samayn jirtey?	Markaad qaangaarka aheyd ee ad joogtey dalkaaga hooyo maxaad qaban jirtey?	Maxaad qaban jirtey markaad joogtey waddankaaga magangelyo?
Maxaad higsanaysaa ood rabtaa inaad gaadhid bisha kuugu horreysa dib'udegidda?	Maxaad higsanaysaa sannadka kuugu horreeya ee dib'udegidda?	Maxaad higsanaysaa 5 sannadood dib'udegiddaada kaddib?	Maxaad higsanaysaa 10 sannadood dib'udegiddaada kaddib?



GABAGGABO*

*Run ama been? Maxaad ka taqaannaa dib'udenjinta qaxootiga ee Maraykanka? Ku tijaabi aqoontaada weedhaha hoos ku qoran. Akhri weedhahan oo goobaabi erayga **Run** haddii ad u malaynaysid weedhu inay sax tahay, goobaabi **Been** haddii ad u malaynaysid weedhu inay khalad tahay.*

- | | | |
|------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|------------|-------------|
| 1. Door muhiim ah ayaad ka ciyaari doontaa guusha dib'udejintaada. | Run | Been |
| 2. Dad ka kala yimid daafaha dunida ayaa Ameerika ku nool. | Run | Been |
| 3. Bulshooyinka Maraykanku wa isku wada mid. | Run | Been |
| 4. Waa lagama marmaan inaad la shaqaysid hay'addaada dib'udejinta si laqbsigaaga Maraykanku u dhib yaraado. | Run | Been |
| 5. Waxa jiri doona adeegyo bulsho iyo gargaar dawladeed oo lagugu siin doono dagaankaaga. | Run | Been |
| 6. Waxaad u bahan doontaa inaad baabuur gadatid isla maalintaad cagta soo dhigtid Ameerika, si ad degaankaaga cusub u dhex martid. | Run | Been |
| 7. Badanaa ragga iyo dumarku waa inay labo shaqo ka shaqeeyaan Maraykanka gudihisa. | Run | Been |
| 8. Af-Ingiriisi inaad baratid uma baahnid. | Run | Been |
| 9. Iskuullada bulshadu waa lacag la'aan oo sharcigaa dhigaya in carruurta da'doodu u dhexayso 6 ilaa 16 sano dugsi aadaan. | Run | Been |
| 10. Dhakhaatiirtu arrimaha caafimaadkaaga cid kale kalama hadli karaan adiga oo aan u oggolaan. | Run | Been |

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

11. Dadka Maraykanka oo dhan, oo ay ku jiraan qaxootigu, waxay leeyihiin xuquuqda aadamaha ee aasaaska ah. **Run** **Been**
12. Waa inaad tuurtaa dhaqankaaga qaarkiis iyo waxaad aaminsantahay oo aad qaadataa dhaqanka Maraykanka iyo waxay aaminsanyihiin. **Run** **Been**

Waa caadi haddaanad garanayn jawaabaha saxda ah oo dhan. Buuggani wuxuu dulmari doonaa xaqiiqooyinka muhiimka u ah dib'udejinta, oo wuxuu kaa caawin doonaa inaad isu diyaarisid waxaad ka filanaysid ku noolaanshaha Maraykanka.

2




Cutubka Labaad AMEERIKA IYO DHAQANKA MARAYKANKA

Dalka Maraykanku wuxuu adduunka kaga jiraa kaalinta saddexaad marka loo eego baaxadda dhulka iyo tirada dadka ku nool. Waa dhul leh riijanno iyo cimilooyin kala duwan, dadkiisuna kasoo kala jeedaan qowmiyado, jinsiyado, diimo, iyo luqado kala duduwan. Haddana waa qaran mid ah: qaran ka dhexeeya dadka Maraykanka. Inkastoo ay dadka Maraykanku ka kala yimaaddeen adduunkoo dhan, waxa ka dhexeeya waxyaabo asaasi ah oo ay aaminsanyihiin iyo hababka wax loo qabto. Waxyaabahan ay aaminsanyihiin iyo dabecadahani waxay ka duwanaan karaan kuwii aad u baratay.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Kala duwanaanshaha bulshooyinka
- » Dhaqanka Maraykanka iyo waxay aaminsanyihiin





ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>dhaqan</i>	culture	<i>Qoyska Yahya waxay ku faanaan dhaqankooda Daarfuur waxaanay u hanqal taagayaan inay bartaan dhaqanka Maraykanka.</i>
	community	
	customs	
	diversity	
	identification	
	language	
	newcomers	
	population	
	tradition	

Bulsho kasta oo Maraykan deggani waa nooc gooni ah. Waxa suurta gal ah inaanay run aheyn waxaad dad kale ka maqashay oo ku saabsan Maraykanka.




KALA DUWANAANSHAHA BULSHOYINKA

Bulshooyinka Maraykanku waxay ku kala duwanyihiin siyaabo badan. Waxa ka mid ah isku dhafka qoomiyadaha iyo jinsiyadaha kala duwan. Sharciyada maxaliga ahina waxay ku kala duwanyihiin kolba degaanka ay ka dheqangalayaan. Iyadoo dagaan kastaaba uu leeyahay hab ay ula dhaqmaan dadka ku cusub degaanka. Sidaa darteed, waxa dhici karta inaanay adiga kuu rumoobin warraad ka haysatid Maraykanka, xataa kuwaad ka maqashay eheladaada iyo saaxibbadaada ku sugan Maraykanka. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta sidaad u baran lahayd macluumaad ku saabsan dagaankaaga cusub iyo inaad fahamtid waxaad filan kartid.

Markii Dina inaadeerkiis iyo qoyskiisu degeen Maraykanka saddex sannadood ka hor, waxay ku noolaayeen guri weyn. Dina kumay farxin markii la siiyay qol ka tirsan abbaarman saddex qol ah oo ay la deggan yihiin labo dumar oo kale oo iyada la da' ah. Waxay u malaynaysay inay guriga inaadeerkeed oo kale ku noolaan doonto. Guriga Dina muxuu uga duwanyahay ka inaadeerkeed? Maxay u baahnayd inay fahamto?

MAABKA AMERIKA



Ka fikir dhaqankaaga ama waayo aragnimadaada.

- Afafkee ayaad ku hadashaa?
- Cuntooyinkeed cuntaa?
- Guryihiinnu siday u egyihiin?
- Caadooyinka iyo hiddihiinna ugu muhiimsan waa kuwee?



Meeshan hoose, sawir ama qoraal ku muuji dhaqankaaga ama waayo aragnimadaada, sida caadooyinka, hiddaha, ama cuntada.

Ameerikaanku waxay qaddariyaan isku kalsooni iyo hawl karnimo, waxaanay xushmeeyaan dadka su'aalaha dhiibta.

Ameerikaanku way dhoollacadeeyaan markay salaamayaan saxiibbaddood iyo dadka aanay aqoon isku lahayn.



Waxa dhici karta in dadka qaar ee ad kula kulantid Maraykanku xiiseeyaan inay macluumaad dheeraad ah ka helaan dhaqankaagaa iyo waayo aragnimadaada. Carbis (baraatiko) la samee qof kale oo u sheeg waxaad boggi hore ku sawirtay ama ku qortay.

DADKA MARAYKANKA IYO DHAQANKA MARAYKANKA

Dhaqan Maraykan oo khaas ihi ma jiro. Maraykanku waa qaran dadkiisu ay ka kala yimaaddeen waddamo kale, oo la yimid dhaqammo iyo caadooyin farabadan. Haseyeeshe, waxa jira dabeecado ay dadka Maraykanka badankoodu aqbaleen oo ay fishaan. Dabeecadahani way ka duwanaan karaan kuwa dhaqankaaga iyo dalkaaga. Guushaad ku gaadhaysid Maraykanka way sii kordhi haddaad u fiirsatid waxa ka socda hareerahaaga oo ad qalbi furan ku soo dhoweysid habab cusub oo wax loo qabto, iyo haddaad raalli ka tahay inaad wax ka warsatid markaad aragtid dabeecado kaa yaabiya.

Hoos waxa ku dhigan waxyaabo loo baahanyahay in laga ogaado Maraykanku waxay aaminsanyihiin, hab dhaqankooda, iyo dabeecaddooda:

ISKUKALSOONI. Dadka Maraykanka badankoodu waxay qiimeeyaan iskukalsoonida iyo hawl karnimada. Waxay dadka waddanka ku cusub ka filayaan inay si degdeg ah shaqo u helaan si ay naftooda iyo qoysaskoodaba u daryeelaan. Waxa kaloo ay dadka cusub ee aan Af-Ingiriisiga aqoon ka filayaan inay si degdeg ah oo surtagal ah u bartaan Af-Ingiriisiga.



SU'AALO WEYDIIN. Dadka Maraykanku way xushmeeyaan dadka su'aalo weydiya. Waxay aaminsanyihiin in su'aalo weydiintu ay tusayso inaad isku dayaysid inaad wax baratid oo ad wax fahamtid. Markaad garan weydid sida wax la yeelo, ha ka biqin inaad su'aal ka dhiibatid. Dadka Maraykanka badankoodu qalbi furan bay kugu caawin.



Bikash wuxuu tabarruce ka ahaa guriga hiddaha iyo dhaqanka, halkaas oo uu kula kulmay tabarruce kale oo ahayd haweenay Ameerikaan ah oo waayeel ah. Qof aad u fiican ayay ahayd oo waxay rabtay inay barato wax kastoo ku saabsan Bikash iyo dhaqankiisa. Hase yeeshe su'aalaha ay haweeneydu weydiinaysay waxay Bikash ula ekaadeen qaar aad shaqsi u ah. Dareenka Bikash siduu ahaa ayaad u malaynaysaa?



Adiga iyo qof kale carbis ka dhigta inaad suaalo idin khuseeya isweydiisaan. Su'aalahaan ayaad ka mid ah kuwaad isweydiisaan:

- Xaggebaad ka timid?
- Intee in leeg ayaad ku nooleyd halkan?
- Yaad la nooshahay?
- Carruur ma leedahay?

Maxaa kale oo ad rabtaa inaad qofka kale ka ogaatid? Su'aalahaad weydiin lahayd soo diyaarso!

Waa kuwan qaar kale oo ka mid ah caadooyinka, dabeecadaha iyo waxay aaminsanyihiin oo ka dhexeeya dadka Maraykanka:

DABACSANAAN. Dadka Maraykanku inta badan way ka dabacsanyihiin dadka waddamada kale. Bulshada dhexdeeda caadiyan waxay isticmaalaan magaca kowaad. Meelaha shaqada, intaan si rasmiya la isku baran, waxa la isticmaala magaca ugu dambeeya iyo darajada (mudane, marwo, ama Dr.), laakiin horjoogayaal badan iyo shaqaalaha badankoodu waxay ka doorbidaan inay isticmaalaan magaca kowaad.



In waqtiga la dhowro muhiim ayay u tahay Ameerikaanka, shaqadaada ayaad waayi kartaa haddaad mar walba soo daahdid.

Markaad gurigaaga ka baxaysid, mar kasta qaado nooc aqoonsi oo lagugu garto. Haddii aanad ku hadlin Af-Ingiriisiga, sido lambarka tilifonkaaga iyo cinwaankaaga.

Maung Thein markii uu waddankiisa joogay wuxuu beeshiisa ka aha hoggaamiye. Degaankiisan cusub ee Maraykanka gudhiisa, maamulaha kiiskiisa oo ah qof dumar ah oo sannado badan ka da'yar Maung Thein ayaa magaciisa kowaad ugu yeerta, oo toos indhihiisa u eegta. Si kale haddii loo dhigo, waxay ula dhaqantaa sidii ay simanyihiin oo kale. Haddaad ahaan lahayd Maung Thein, maxaad dareemi lahayd? Maxaad samayn lahayd?

SALAANTA. Dadka Maraykanku way dhoollacaddeyn badanyihiin, oo way dhoollacadeeyaan markay salaamayaan saaxiibbadooda iyo qariibkaba. Isla markaana, ragga iyo dumarkuba way is gacan qaadaan markay isbaranayaan ama marka dad kale la barayo.



OOFIN WAQTIGA BALLANTA.

Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin in ballan waqtiigeeda lagu aadaa ay muhiim tahay. Dadka Maraykanku waxay isku dayaan inay waqtiga



loo qabtay ku yimaadaan, waxay dadka kalena ka filayaan inay waqtiga sidaas oo kale u dhowraan. Ballan dhigasho iyo in ballanta la oofiyaa waa lagama maarmaan. Haddii aanad ballan dhigan ka hor intaanad qof xafiis ugu tagin, waxa dhici karta inaanu qofkaasi kula kulmi karin. Haddii aanad ballantaada oofin karin ama haddaad u malaynaysid inaad 15 daqiiqo in ka badan ad ka daahaysid, waa inaad wacdaa oo ad sheegtaa inaad soo daahaysid, raalligalinna ka bixisaa. Isla markaana, maalin walba shaqadaada inaad waqtiigeeda ku tagtaa waa muhiim, waxaana dhici karta in shaqada lagaa eryo haddaad mar walba soo daahdid.

ILAAALINTA AMUURAHA SHAQSIGA U GAARKA AH. Dadka Maraykanku waxay qadarin weyn siiyaan ilaalinta amuuraha shaqsiga u gaarka ah. Dadku badanaa ma booqdaan guryaha dadka kale iyagoon horta wicin ama iyagoon la casuumin. Arrimaha dhaqaalaha waxa loo arkaa inay yihiin wax u gaar ah shaqsiga, markaa dadka Maraykanku waxay u arkaan inay anshax xumo tahay in qof la weydiiyo mushaharka u qaato, ama xataa in la weydiiyo qiimaha ay baabuur ama guri ku soo gadatay ama uu ku soo gatay. Dadka Maraykanku waxa kalooy anshax xumo u arkaan qof hadda ay is barten inay weydiyaan su'aalo ku saabsan lacag, da', ama noloshooda gaarka u ah.



Anna way ku faraxsanayd inay saaxiib la noqoto dariskeeda. Maalin maalmaha ka mid ah, fiidkii iyadoo shaqada ka soo baxday oo gurigeeda u sii socota ayay gambaleelka albaabkooda graacday iyadoo islahayd booqo. Amakaag iyo caloolxumo ayay ka qaadday markay u sheegeen hadda inaanay ahayn waqti ku habboon booqasho, maadaama ay cashaynayeen. Anna dariskeedu ma rabaan miyaa inay si wadaan saaxibtinimada? Haddaad Anna ahaan lahayd, sideed yeeli lahayd?

BAKHSHIISH-BIXIN. Dadka Maraykanku inta badan waxay siiyaan qofka ugu adeega maqaayad, tagsiilaha, ama timajaraaha bakhshiish u dhigma 15% illaa 20% oo biilka ah. Haddii u qof kaa caawiyo qaadidda boorsooyinkaaga, wuxu qofkaasi kaa filanayaa boorsadiiba \$1. Ma bannaana inaad bakhshiish siisid booliiska ama sarkaal dawladeed, waayo waxa loo arki karaa laaluush ama hawl-fududayn.



KHAMRI IYO SIGAAR CABBIDDA. Sharciyo badan oo ku saabsan isticmaalka iyo gadidda khamriga ayaa ka jira Maraykanka. Go'aanka cabbidda khamrigu waa mid shaqsi ah, anshax xumona kuma aha Maraykanka inaad diiddid khamri lagu siiyay. Waa sharci darro inaad baabuur kaxaysid adigoo khamri cabsan. Sigaar kuma cabbi kartid saraha gudahooda iyo meelaha ka dhexeeya bulshada (sida maqaayadaha), magaalooyinka iyo tuulooyinka qaarna sigaar kuma cabbi kartid meel u dhow dhisme. Maraykan badani sigaar ma cabbaan, guryahoodana waxay ka filanayaan dadka kale inaanay ku cabbin sigaarka. (Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sharciyada Maraykanka ka eeg Cutubka 11.)



Moe Aung 19 jir buu ahaa. Waxa lagu martiqaaday casho guriga qoyska Smith. Intuu joogay gurigaa, waxa Moe Aung cashada loo raaciyay koob khamri ah. Moe Aung wuxu sameeyo ayuu garanwaayay. Haddii u aqbalo khamriga ma sharci buu jebinayaa? Moe Aung inuu aqbalo khamriga miyaa?

NABADGELID. Meel kastood ku nooshahay, waa inaad qaaddaa tallaabooyin asaasi ah si aad u nabadgashid, sida inaad qufushid gurigaaga iyo baabuurkaaga, inaanad sidan lacag kaash ah oo farabadan, iyo inaad ogaatid degaankaaga meelaha xun xun ee habeenkii aan la tegin.



SIDASHADA AQOONSI SHAQSI. Dadka Maraykanku waxay istimaalaan nadaam aqoonsi oo iswata markay la macaamilayaan dawladda iyo meheradaha. Waa inaad mar kasta sidataa nuqul kaarkaaga I-94 iyo kaarka oggoolaansha shaqada ee loo yaqaan EAD, isla markaana haysataa magaca, cinwaanka iyo tilifoonka hay'addaada dib'udejinta. Haddii aanad Af-Ingiriisi ku hadlin, sido lambarka tilifoonkaaga iyo cinwaankaaga, ama cinwaanka iyo tilifoonka qofkaad booqanaysid. Ha sidan kaarka sooshal sakuuritigaaga orijinaalka ah. Ku xafid meel gurigaaga ka tirsan.



RAAC XEERARKA. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin inay muhiim tahay in loo haggansamo xeerarka. Waxaana ka mid ah kiyuuga iyo inaad isku taagto calaamadda istaagga markaad baabuur waddid.



Goobaabi waxa la qiimeeyo, qaababka, ama dabecadaha ku taxan bogagga 18, 19, 20, 21 iyo 22 kuwa ka duwan kuwii hore kuu soo maray.



Ka fikir waxyaabaha la qiimeeyo ee lagu qeexay bogagga 18 illaa 22 oo loollan dheeri ah kugu noqon doona si aad ula qabsatid. Shaxda ku taal bogga xiga dhammaystir. Tusaale ayaa lagu siiyay.

Maxaa ka mid ah waxyaabaha la qiimeeyo, caadooyinka, iyo dabecadaha kugu adkaan doona inaad la qabsatid intaad Maraykanka joogtid?

Waxa la iga filayaa inaan gacan qaado rag iyo dumarba markaan la kulmo.

Sidee baad isu caawin kartaa si aad ula qabsatid isbeddelladaan?

Waxaan dadka ku salaami dhoollacaddayn, waxaanan u sheegi magacayga iyo meeshaan ka imid.

Maryam waxay isku dayaysay in ay la qabsato caadooyinka cusub iyo waxay qiimeeyaan dadka Maraykanku. Waxay isku dayday inay noqoto qof madaxbannaan, inay waqtigii loogu talagalay ku tagto meelaha ama ay ka hor marto, iyo inay xaqdhowrto amuuraha dariskeeda u gaarka ah. Hase yeeshe maalin walba waxay dareemaysay murugo, iyadoo si weyn u xisaysay waddankeedii. Maxaad u malaynaysaa oo ay Maryam la murugaysantahay? Haddaad Maryam ahaan lahayd, sideed yeeli lahayd?



Kala sheekayso qof kale siyaabahaad iskaga ilaalin lahayd dareen ah inay culays badani ku saaranyahay Maraykanka intaad joogtid.



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiine
- b. Af-Ingiriisi
- c. Af-Jarmal

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi.

1. Bulshooyinka Maraykanku ma isku wada midbaa?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
2. Kuwee baa tilmaamaya sida ay Maraykanku inta badan u salaamaan qariibka?
 - a. Habsiin kalgacaltooyo.
 - b. Dhoola-caddayn.
 - c. Gacan-qaad.
 - d. Dhaban ka dhunkasho.
 - e. b iyo c.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

3. Kuwee ayay Maraykanku aad u qiimeeyaan?
 - a. Iskukalsoonaan.
 - b. Su'aalo weydiin.
 - c. Cood dheer ku hadlid.
 - d. Oofinta wakhtiga ballanta.
 - e. a, b, iyo d.
4. Tusaalayaasha hoos ku taxan, qofkee ayaan ahayn mid iskukalsoon?
 - a. Qofka isla markiiba bilaaba inuu Af-Ingiriisiga barto.
 - b. Qofka weydiiya asxaabtiisa iyo eheladiisa inay ogyihiin shaqooyin ka bannaan meelaha.
 - c. Qofka an dan ka lahayn inuu shaqo raadsado oo aaminsan inay hay'adda dib'udejentu wax walba siinayso.
 - d. Qofka isku daya inuu barto nolosha Maraykanka isagoo u kuurgalaya, sua'alana weydinaya.
5. Kaba soo qaad haddii deriskaaga Maraykanka ihi ay gurigooda kugu casuumaan oo ay khamri ku siiyaan. Arrintani adiga dhib ayay kugu tahay, waayo khamri ma cabtid. Maraykanka gudhiisa, anshax xumo miyaa haddii ad diiddo khamriga.
 - a. Haa.
 - b. Maya

3



Cutubka Saddexaad U SOCDAALKA AMEERIKA

Ka dib marka laguu oggolaado inaad Maraykanka gashid, waxa jira dhowr tallaabo oo kale intaanad u safrin Ameerika. Tallaabooyinkaa waxa ka mid ah baaritaanka caafimaadka iyo amniga. Waqtigan sugidda ka faa'iidayso oo baro Af-Ingiriisiga haddii ay suurtagal tahay.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Baaritaanka caafimaadka iyo amniga
- » Hay'adda Dib'udejinta ee lagugu meeleeay
- » Isku dubarridka safarka
- » Faafaahin ku saabsan safarkaad ku tagaysid Ameerika

Ka hor intaanad u safrin Maraykanka, waxaad u baahantahay baadhitaan caafimaad iyo mid amni.






ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>boorsooyin</i>	bags	
	departure	
	identification	
	luggage	
	medical	
	occupation	
	passport	
	travel	

Baadhitaanka caafimaad wuxu siinayaa hay'addaada dib'udejinta macluumaad khuseeya xaalad caafimaad oo u baahan in lagu daryeelo Maraykanka.

Ka hor intaanad imaan Maraykanka, hay'addaada dib'udejintu waxay xogogaal u tahay magacaaga, da'daada, qabiilkaaga, iyo afkaad ku hadashid.

Hay'adda dib'udejintu waxay isticmaali doonta macluumaadkan adiga ku khuseeya, si ay u xusho meeshi lagu dejin lahaa.

BAARITAANKA CAAFIMAAD

Xubnaha qoyskaaga oo dhan waxa laga doonayaa baaritaan caafimaad. Baaritaanku waa lacag la'aan, ballamahana waxa kuu samayn doona shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta. Macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga waxa lala wadaagayaa keliya shaqsiyaadka kaa caawinaya nidaamka dib'udejinta.



Saddex asbaabood ayaa caafimaadka loo baaraa:

- In la ogaado adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsani qabto caafimaad darro u baahan in la daaweeyo.
- In la hubiyo inaanay xubin qoyskaaga ka tirsani qabin cudurrada la kala qaado, oo adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan ka hor istaagi kara gelitaanka Maraykanka.
- In hay'addaada dib'udejinta la siiyo macluumaad ku saabsan xaalad caafimaad oo u baahan in lagu daryeelo Maraykanka.

HANUUNINTA DHAQANKA (CULTURAL ORIENTATION [CO])

Qaxootiga badankoodu, intaanay iman Maraykanka, waxay ka qaybgalaan Hanuuninta Dhaqanka ee ay bixiyaan shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejintu.



Hanuuninta Dhaqanka waxa lagu bixiyaa macluumaad ku saabsan nolosha Maraykanka, hanuunintaasi oo salka ku haysa macluumaadka ku jira buuggan. Ujeeddada Hanuuninta Dhaqanku waa in lagaa caawiyo sidaad u kobcin lahayd aragti dhab ah oo ku aaddan waxaad ka filan kartid nolosha Maraykanka iyo inaad fahamtid waxaad la kulmi doontid bilaha kuugu horreeya Maraykanka.


HUBINTA AMNIGA

Qaxootiga oo dhan waa la baaraa oo la hubsadaa inay yihiin dad aamin ah intaanay u safrin Maraykanaka, baaritaankaas oo sameeyaan mas'uuliyiin dawladda Maraykanka ka tirsani. Caadiyan, baaritaanka amniga waxa la sameeya ka hor wareysiga Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security). Marmar waxa loo baahanyahay baaritaan kale oo amni, bixitaanka ka hor.

HAY'ADDA DIB'UDEJINTA LOO XILSAARAY

Qaxooti kasta oo loo oggolaaday inuu galo Maraykanka waxa loo xilsaaraa hay'ad dib'udejineed intaanu dhoofin. Xarunta Taakulaynta Dib'udejintu waxay hay'adda dib'udejinta u diri doontaa macluumaadkan adiga ku khuseeya:

- Magacaaga, da'daada, waxbarashadaada, iyo xirfaddaada shaqo.
- Magacyada, da'dooda, waxbarashadooda, iyo xirfadaha shaqo ee xubnaha qoyskaaga ku raaci doona.
- Jinsiyiddaada, waddankaad ka soo jeeddo, afkaad ku hadashid, iyo diintaada.
- Xaalado caafimaad oo u baahan in la fiiriyo markaad Maraykanka soo gaartid.
- Magacyada, cinwaannada, iyo lambarrada tilifoonka eheladaada ama asxaabtaada hore u deggenayd Maraykanka.



XULISTA MEESHA AD DIB'UDEGI LAHAYD

Hay'adda qaranka ee dib'udejintu waxay isticmaali doontaa macluumaadkaaga si ay kuugu xusho meesha ad degi lahayd. Haddii ehel soke (ninkaaga, naagtaada, ilmahaaga, waalidkaaga, walaalka ama walaashaa) u degganyahay Maraykanka, oo ad Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta siisay lambarka tilifoonkiisa ama tilifoonkeeda iyo/ama cinwaankiisa/cinwaankeeda, hay'addu waxay isku dayi inay ku dejiso isla magaaladay degganyihiin. Haddii ad codsatid in lagu dejiyo meel u dhow saaxiibkaa ama ehel aan ahayn mid soke, hay'adda dib'udejintu waxay ka fiirsan doontaa in meesha ad codsatay leedahay adeegyadaad u baahantahay iyo inaad shaqo ka heli kartid halkaasi. Haddii dib'udejintaada Maraykanka loo tixgalinayo ehel aan ahayn mid soke, waad codsan kartaa in isku meel lagula dejiyo ehelkaaga, laakiin lama dammaanad qaadi karo inay taasi suurtoowdo.



Waa muhiim inaad bixisid macluumaad cusub oo ku saabsan eheladaada iyo asxaabtaada joogta Maraykanka, haddii ad rabtid inaad agtooda degtid.

Hubi inaad u sheegtid IOM ama shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta wixii isbeddel ah ee ku yimaadda qoyskaaga intaad sugaysid safarkaaga. Haddii ad yeeli weydo, waxa dhici karta inaanad ambabbixin waqtigii loogu talagalay.

Dokumentiyada ku jira bacdaada IOM waa muhiim. Bacdaada gacantaada ku xafido mar kasta intaad safarka ku jirtid.

Haddii hay'adda dib'udejintu aanay haysan macluumaadkii ugu dambeeyay oo ku saabsan eheladaada iyo asxaabtaada Maraykanka deggan, waxa dhici karta in magaalo iyaga ka fog lagu dejiyo. Shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta waa inaad siisaa wax alla wixii macluumaad ah ee ad haysid si ay ugu suurtagasho hay'adda dib'udejintu inay kuu xusho meel kugu habboon. Macluumaadkan inaad bixisaa wax saamayn ah kuma yeelanayso sharcigaaga immigrayshanka ama waqtigaad bixi lahayd. Waxa keliya ee ay saamayn ku yeelan kartaa waa meeshaad ka degi lahayd Maraykanka. Inaad macluumaadkan bixisaa adiga ayay faa'iido kuu tahay.

Isla marka hay'adda dib'udejintu kuu xusho magaaladaad ku noolaan lahayd, waxa qabanqaabada safarka kaa caawin doonta Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta. Intaanad bixin ka hor, waxa lagu sheegi doonaa meeshaad Maraykanka kaga noolaan doontid.



Markaad ogaatid ka dib, foomkan hoose buuxi. Waxa dhici karta inaanad helin macluumaadkan illaa ad ka gaadhid Maraykanka.

Magaaladayda cusub: _____

Gobolkayga cusub: _____

Hay'addayda Dib'udejinta: _____

Macluumaadka xiriirka ee hay'addayda dib'udejinta: _____

QABANQAABADA SAFARKA

Ururka Caalamiga ee Muhaajirka (International Organization for Migration [IOM]) ayaa qabanqaabin doona safarkaad ku tegaysid Marykanka. Intaad sugaysid bixitaankaaga, haddii ay wax iska beddelaan qoyskaaga, sida guur, geeri ama ilma dhashay, waa inaad la socodsiiisa IOM ama shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta. Haddaad sidaa yeeli weydo, waxa dhici karta inaanad waqtigii loogu talagalay bixin. Bixitaankaagu wuu daahi karaa.

DEYNTA SAFARKA

Qoyskaagu wuxu qaadan karaa deyn ad iskaga bixisaan kharashka safarka Maraykanka. Xubnaha qoyska ee da'doodu ka weyntahay 18 jir mid kastaa wuxu heli doonaa deyn u gaar ah. Mar uunbaad saxeexi doontaa waraaqda loo yaqaan qoraalka ballanqaadka (promissory note). Qaraalkani waa mid ad ku ballan qaadaysid inaad gudi doontid deynta safarka muddo 3 sannadood gudahood markaad Maraykan soo gashid ka bacdi.




Dhowr bilood ka bacdi, qoyska Booja waxa boosta ugu soo dhacay biil ku saabsan ballanqaadkoodii IOM-ka. Booja way xasuusatay inay wax saxeexday, laakiin wuxuu ku saabsanaa way xasuusan kari weyday. Sideed Booja ugu sharxi lahayd biilkan? Maxaad uga sheegi lahayd muhiimadda ay leedahay deyntan gudiddeedu? Haddii ay Booja su'aalo dheeraad ah qabto, ayay weydiin kartaa?

Dhowr bilood markaad Maraykan joogtid, hay'addaada dib'udejintu waxay bil walba kuu soo diri doontaa biil qayb ka ah lacagta lagugu leeyahay. Lacagta ad gudaysid waxay ku dhacdaa sanduuq dhaqaale oo lagu caawiyo qaxootiga kale ee u safri doona Maraykanka. Markaad bixisid deyntaas, waxaad bilaabaysaa dhisidda taariikh deymeed fican. (Eeg Cutubka 9 si ad u kororsatid aqoon dheeraad ah oo ku saabsan taariikhda deynta.) Haddaad gaftid bixinta biilka deynta, taasi waxay kuu horseedi kartaa taariikh deymeed xun. Haddii ad bixin kari weydo, sababtu waxay doonto ha ahaate, si dhaqsi ah ula hadal hay'addaada dib'udejinta.

BACDA IOM IYO BAAKEJKA SOOGALIDDA

Intaanad bixin ka hor, shaqaalaha IOM waxay ku siin doonaan bacda IOM, baqshad u ku jiro baakejka safarku iyo dhowr baqshadood oo yar yar. Baqshadahan waxa ku jira I-94-kaaga, foomamka kastamka ee caddaynta wixii la sito, foomamka baaritaanka caafimaadka, raajooyin ama CD-iy, dukumentiyada dib'udegidda oo orijinaal ah, warqadda diyaaradda lagu fuulo, iyo tikidhadaada. Waxyaabahan waad u baahantay si ad u gashid Maraykanka oo ad u tagtid meesha safarkaagu ku egyahay. Aad uga taxadir bacdaada IOM iyo dukumentiyada. Gacantaada yay marnaba ka bixin. Ha furin baqshadaha, bacda IOM ama waxa ku jira ha ku ridin boorsadaada ama bagaashka la miisaamo. Markaad gaadhid Eerboorka ugu horreeya ee dalka Maraykanka, xubin ka mid ah shaqaalaha IOM ayaa kaa hor iman oo kaa caawin doona/doonta hannaanka maridda immigrayshanka. Fadlan xasuusnoow in xubin ka mid ah shaqaalaha IOM ama sarkaal ka tirsan immigrayshanka Maraykanka keliyihi furi karaan dukumentiyadaada.



Waxa jira waxyaabo ka mamnuuc ah inaad dalka la soo gashid. Ka fajignoow waxyaabahaas intaanad shandadahaaga xirxiran.



Meeshan hoose waxa ku yaalla saanballo dukumentiyada ad jeclaysan kartid inaad sii qaadatid. Goobaabi dukumentiyada qoyskaagu sii qaadan doono, ka sokow dukumentiyada ku jira bacda IOM.



Daawooyin dhakhtar qoray



Diiwaannada qoraal waxbarasho



Shahaadooyin waxbarasho



Diiwaannada tallaalka



Waraqaha dhalashada



Waraqaha guurka



Wixii dukumentu muhiim ah tarjumaaddooda Af-Ingiriisiga



Diiwaannada caafimaadka



Sawir ama qor hadday jiraan dukumentiyada kale oo muhiim ah oo ad u baahnaan doontid.

Xasuusnoow inaad dokumentiyada muhiimka ah gashatid boorsada ad diyaaradda la fuulaysid!

BAGAASHKA

Shirkadaha diyaaraduhu way xaddidaan cabbirka, misaanka iyo inta boorso ee qofku qaadan karo. Xaddidaaddu waxay ku kala duwanaa karaan hadba meeshaad u dhoofaysid iyo shirkadda ad ku duulaysid. Waa lagu sheegi tirada boorsooyinka ad qaadan kartid ka hor intaanad dhoofin. Inta badan waxa la oggolyahay hal boorso inaad gacanta ku qaadatid. Boorsada gacanta lagu qaataa waa ta ad diyaaradda la fuuleysid. Boorsada la miisaamaa wa ta la gelinayo qaybta xammuulka ee diyaaradda. Hubi inay boorsooyinkaagu si fican u xiranyihiin si aanay waxba kaaga lumin intaad safarka ku jirtid.



Bray Meh si taxaddar leh ayay boorsooyinkeeda u xirxiratay, laakiin waxay samaysay garanweyday markay saddexdeeda ciyaal ay dhaxan ka cawdeen diyaaradda gudaheeda. Bray Meh maxay u baahnayd inay geliso boorsooyinkay diyaaradda la fuushay, si aanay carruurteedu diyaaradda guhaheeda ugu dhaxmoon?

WAXYAABAHA AANAD MARAYKANKA KEENI KARIN

Sharciyada Maraykanku waxyaabaha qaar in Maraykanka la soo geliyo ma oggola. Hub inaad keentid lama oggola. Boorsadaad gacanta ku qaadanaysid kuma sidan kartid aaladaha afeysan, sida mindiyaha ama maqasyada, laakiin waad ku ridi kartaa boorsooyinka la miisaamo. Waxyaabaha kale oo aanad keeni karin Maraykanka wax ka mid ah dhirta, miraha, khudaarta, hilib ceyriin ah, iyo daroogada. Waad keeni kartaa daawo dhakhtar kuu qoray, laakin waa inay ku jirtaa weel suntan. Waa inaad sidataa dhakhtarku waraaqduu kuugu dalbay dawo kasta oo dhakhtar kuu qoray.

Farax waxay soo gashatay boorsaday diyaaradda la kori lahayd irbado yar yar oo dharka lagu tolo. Aad ayay u xanaaqday markii saraakiisha eerboorku u sheegeen inaanay irbado diyaaraad la fuuli karin. Farax maxay u baahnayd inay samayso oo ka geddisan waxay samaysay?

Haddii ad su'aal ka qabtid waxaad Maraykanka u qaadan kartid, weydii shaqaalaha IOM.



*Boggan iyo kan ku xigaa waxay tusayaan waxyaabo saddex kooxood loo kala soocay sawirradooda. Waxaad lambarka 1 ku qortaa waxyaabaha lagu rido bagaashka la miisaamo ee xamuul ahaan diyaaraddu u qaaddo. Ku qor lambarka 2 waxyaabaha lagu rido boorsada gacanta lagu qaaddo ee dayuuradda lala fuulo. Ku qor lambarka 3 waxyaabaha aan lagu oggolayn inaad qaaddid.**

1. Waxyaabahan waa inaad ku riddaa bagaashkaaga xammuul ahaan u qaaddo diyaaraddu.
2. Waxyaabahan waa inaad ku riddaa boorsooyinkaad diyaaradda la fuulayso.
3. Waxyaabahan ma qaadan kartid.

A.

		
Cunto, masaasado iyo dheebbarka (xafaayadda) ilmaha	Buugga Tilmaanta Soo dhoweynta	Alaabta carruurta ku ciyaarto oo aan dhawaaq lahayn
		
Shahaado waxbarasho, dukumentiyoo caafimaadka khuseeya iyo kuwo kale oo muhiim ah	Dhar dhaxameed	In yar oo tubaako ah
		
Dareere aan badnayn oo bac laga dhex arki karo ku jira	Lacag	Daawooyin dhakhtar qoray iyo qoraalkooda
		
Cunto fudud	Dallad	Saacad
		
		Dahab

*Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 222aad.

B.



Hub ama wax kasta oo loo isticmaali karo hub ahaan



Dhir iyo xayawaan



barnaamijyo kambuutar, muusik, aflaam, iwm, oo xatooyo ah



Midho la cuno iyo khudaar



Darogo



laaytarrada sigaarka lugu shito/tarraq



Kaniinnada aan la garanayn



Biyo/cabitaan



Midho-abuur iyo xawaashyo

C.



Qalabka muusikada



Ugu badnaan labo dhaloo khamri ah oo lingaxan oo calaamadaysan



Sawirro/xasuus u yaal



Buugaag



Dhar



Alaab musquleed



Aalad afeysan



Raadiyoow



Koorka dhaxanta

Sigaar kuma cabbi kartid diyaaradda gudaheeda.

Xasuusnoow inaad wax cuntid waxna cabtid marka cuntanda la qaybiyo, si ad u ilaalisid tamartaada iyo caafimaadkaaga intaad diyaaradda ku jirtid.



Ka fikir waxaad boorsooyinkaaga ku ridan lahayd markaad u guuraysid Maraykanka. Su'aalaha shaxda hoos ku qoran kaga jawaab sawir ahaan, qoraal ahaan, ama labadaba.

Maxaa ka mid ah waxyaabahaad qaadan lahayd?	Maxaa ka mid ah waxyaabahaad ka tegi lahayd?

GEEDDI SOCODKAAGA

SAFARKA DIYAARADDA

Waxa dhici karta inay tahay markii kuugu horreysay ee ad diyaarad raacdid.



Ka fikir waxyaabaha adiga ama xubnaha kale ee qoyskaaga ka werwersantihin safarka. Werwerkan waa inaad shaacisaa markaad ka qayb galaysid fasallada hanuuninta dhaqanka, intaanad diyaaradda fuulin.

Waa kuwan waxyaabo muhiim ah oo u baahan in la xasuusto:

SUUNKA KURSIGA. Waa inaad xirataa suunka-kursiga marka diyaaraddu kacayso, markay soo degeyso, iyo inta ay calaamadda suunka-kursigu daarrantahay. Waa arrin wanaagsan inaad markastaba xirnaatid suunka-kursiga.



SIGAAR CABBID. Lama oggola in sigaar lagu cabbo duullimaad kasta.



KALKAALIYEYAASHA DUULLIMAADKA. Kalkaaliyeyaasha duullimaadku waxay hubiyaan in rakaabku nabadqab iyo istareex haystaan. Dhageyso amarrada ay kalkaaliyeyaashu bixiyaan. Haddii ad wax u baahatid, sida biyo ama buste, weydii kalkaaliye.



Win Tun muu cunin cuntada bilaashka ah ee lagu siiyay diyaaraddii Ameerika keeneysay, waayo waxay ahayd cunto aanu aqoon. Isagoo gaajaysan ayuu Ameerika soo gaadhay. Sideed uga badbaadi kartaa xaalad tan la mid ah? Haddii ad ku gaajootid ama harraadid adigoo ku guda jira duullimaadka, ayaad wax weydiisan lahayd?

CUNTADA. Cuntadu waa lacag la'aan duullimaadyada caalamiga ah. Dhowr jeer ayaa cunto lagu siin doona markuu duullimaadku dheeryahay. Hubi inaad cuntid cuntada lagu siiyo si ad u dhowrtid tamartaada iyo caafimaadkaaga intaad ku jirtid safarka dheer.



BIYO. Hawada diyaaradda gudaheedu waa qalleyl, markaa waa muhiim inaad biyo cabtid. Haddaad yeeli weydo, waxaad dareemi kartaa caafimaad darro ama daal dheeraad ah.



KHAMRI. Badanaa duullimaadyada waa lagu gadan karaa khamri, laakiin ra'yi fiican maaha in diyaaradda gudaheeda khamri lagu cabbo, waayo biyo badan ayaa jirkaaga ka bixi kara oo qalleyl keeni kara.



JIMICSI. Madaama ad saacado badan meel fadhaysid, way ficantahay in la istaago, la jimicsado, oo diyaaradda gudaheeda dhowr jeer lagu socdo inta lagu jiro duullimaadka.



ISBEDDELKA CADAADISKA HAWADA. Waxaad dareemi kartaa sidii inay dhagahaagu ku dillaacayaan oo kale. Si aad cadaadiskaa u yaraysid xanjo cun, hamaanso, ama biyo cab.



BEDDELAADDA KURAASTA. Qof kasta oo diyaaradda saaran waxa lagu qoray kursi, oo waa inuu kursigaa fariistaa inta lagu jiro duullimaadka. Kursiga waad ka beddelan kartaa qof qoyskaaga ka tirsan ama asxaabtaada haddii ay raalli ka yihiin.



Waxa suurtagal ah in wakiillada IOM ay galbiyaan qaxootiga aad u xanuunsan iyo kuwa u baahan in laga caawiyo socodka.

Markaad gaadho eerboorka kuugu dambeeya, waxa kaa hor iman doona ehel, saaxiib, ama shaqaale ka tirsan hay'adda dib'udejinta.

ILMAHA YARYAR. Ilmaha da'doodu ka yartahay 2 jir waxay diyaaradda ku raaci karaan qiimo aad u jaban, haddii dhabta lagu hayo gebi ahaan muddada duullimaadka. Xasuuso inaad safarka u soo qaadatid cuntada ilmaha iyo dheebbarro (xafaayado) farabadan.



MUSQULAHA. Diyaaraddu musqulo ayay leedahay. Keliya ku rid godka musqusha waraaqaha musqulaha loogu talagalay. Biyaha qasabadda waxa loo isticmaalaa gacmo dhaqashada, oo looguma talagalin in la cabbo.



DAWAKHAADDA U KEENO SOCODKA DIYAARADDU. Haddii ad ku labba-labbootid diyaaradda gudaheeda oo u matag ku qabto, kursiga kaa horreeya gadaashiisa waxa jeebkiisa ku jira baco.



GOOBAHA TARAANSITKA

Waxa dhici karta in qaxootiga qaar ay si maraan hal meel ama ka badan goobo taraansit ah ka hor intaanay gaarin Maraykanka. Goobta taraansitku waa meel lagu hakado, intabadanna loogu talagalay in diyaaradda lagu beddesho. Markaad gaadhid goob taraansit, waxa dhici karta inaad martid kantarool immigrayshan. Wakiil ka socda IOM ama shirkadda diyaaradaha ayaa kaa caawin doona sidaad u raaci lahayd duullimaadka kuugu xiga. Maraykanka gudhiisa, markaad soo gaadhid Goobta Soogalidda waxa kaa hor iman doona wakiillo ka socda IOM, kaana caawin doona hannaanka soogalidda. Waxay kaa caawin doonaan meshaad habeenkaa seexan lahayd, haddii ad u baahatid, ama waxay kaa caawin doonaan sidaad u gaari lahay meeshaad degi lahayd. Haddii ay caafimaad darro ku hayso, IOM waxay hubin doonaan inaad haysatid qof ku caawiya intaad safarka ku jirtid.

HANNAANKA IMMIGRAYSHANKA

Saraakiisha immigrayshanka ee Maraykanku waxay furi doonaan baajejkaaga soogalidda, waxaanay koormeeri doonaan dukumentiyada. Marmar dhif ah, Goobta Soogalidda ayuu khalad ku saabsan dukumentiyadu ka dhacaa, sida magacaaga oo si khaldan loo qoray. Haddaad aragtid khalad ku jira dukumentiyada, waxa fiican inaad hay'adda dib'udejinta meesha safarkaagu ku eegyahay u sheegtid khaladka si qof ka tirsan hay'addaasi u saxo.



I-94 iyo Kaarka EAD

Kaarkaaga I-94 wax la saari doona shaabbad, waana lagu soo celin. Waxa lagaa qaadi sawir iyo faraha si ad u heshid kaarka Dukumentiga Oggolaanshaha Shaqada ee loo yaaqaan EAD (Employment Authorization Document [EAD]). Kaararka I-94 iyo EAD aad ayay muhiim u yihiin, waayo waxay ka marag kacayaan inaad sharci qaxootinnimo ku joogtid Maraykanka iyo inaad ka shaqaysan kartid.

KASTAMKA

Markaad hawlaha immigrayshanka dhammaysatid, waxaad soo qaadan doontaa bagaashkaaga oo waxaad u gudbi kastamka. Saraakiisha kastamku waxay fiirin doonaan foomkaaga caddaynta waxaad sidatid, waanay baari doonaan boorsooyinkaaga. Markay alaabtaad boorsooyinka ku sidatay soo dhaafaan kastamka waxaad diyaar u tahay safarkaaga kama dambeysta ah.

HAKAD HABEENDHAX

Waxa dhici karta inaad ku dhaxdid Goobta Soogalidda (Port of Entry) haddii aanay suurtagal ahayn inaad ka gaadhid duullimaadkaaga xiga. Haddii ay taasi dhacdo, IOM ayaa kuu diyaarin (kharashkana bixin) huteel iyo cunto illaa laga gaadhayo maalinta xigta waqtiga duullimaadkaaga kama dambeysta ah.

MEESHA UGU DAMBEYSA SAFARKA

Markaad joogtid Goobta Soogalidda, waxaad heli doontaa kaarka IOM oo ay ku qoranyihiin macluumaad ku saabsan adiga iyo lambar tilifoon oo ad wici kartid haddaad cawimaad u baahatid. Kaarka waxa ku xiran dun si ad qoorta u sudhatid. Markaad gaadho eerboorka ugu dambeeya safarkaaga, waxa kaa hor iman doona oo kugu sugi doona meesha bagaashka laga qaato ehel, saaxiib, ama wakiil ka socda hay'addaada dib'udejinta. Sikastaba ha u dhacdee, haddii aanu qofna kaa hor iman, fadlan si dhaqsi ah ula xiriiir mas'uul kamid ah mas'uuliyiinta eerboorka.




Qoyska Rai waxay ka soo degeen eerboorka magaaladooda cusub, iyagoo daallan laakin niyad-kacsan. Hase yeeshe cid eerboorka kaga hortimid ma jirin. Qoyska Rai maxay samayn karaan?

Haddii aanu jirin qof eerboorka kaaga hor yimid, ha werwerin! Isdaji oo booliska eerboorka caawimo weydiiso.



Ka fikir sidaad dareemi kartid markaad gadhid meeshaad u socotay. Aad Lifaafa C: Wajiyada Dareenka ee ku yaal bogga 229, kana fikir wajiyada tilmaami kara dareemmadaasi. Sawir ahaan ku muuji goobaabaha hoose.



- Ma daali doontaa? Gaajo ama harraad?
- Ma faraxsanaan doontaa? Walaac?
- Ma niyadkici doontaa? Werwer?
- Intee in leeg ayaad u malaynaysaa inay ku qaadan doonto jirkaagu inuu la qabsado deegaankaaga cusub?

Waxa dhici karta inaad safarka dheer ku soo daashay, hase yeeshe maalin ama labo maalmood ka dib waad roonaan doontaa!



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiine
- b. Af-Ingiriisi
- c. Af-Jarmal

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi.

1. Saaxiibkaa wuxuu dhamaystiray baaritaanka caafimaad iyo ka amniga, diyaarna wuxuu u yahay inuu u safro Maraykanka. Markaasay xaaskiisu ummushay. Wuxu ka werwesanyahay siduu wax yeeli lahaa. Ma u baahanyahay inuu la socodsiiyo IOM ama shaqaalaha Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta ilmaha cusub ee ku soo biiray qoyska?
 - a. Haa, waayo, haddii u ogeysiin waayo waxa dhici karta inuu dib uga dhaco bixitaankiisa.
 - b. Maya, waayo haddii u ogeysiiyo, waxa dhici karta inuu dib uga dhaco bixitaankiisa.
2. Bacdaada IOM ma inaad ku riddaabaa boorsooyinka diyaaraddu xamuul ahaan u qaaddo?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
 - c. Micno ma laha oo meshaad doontid ayaad ku ridi kartaa.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

3. Markaad boorsooyinkaaga xirxiranaysid, waxyaabahee ayaanad ku ridayn madaama aan la oggolayn in Maraykanka loo qaado?
 - a. Dhirta.
 - b. Tarraqa.
 - c. Daroogada.
 - d. Daawooyin dhakhtar dalbay oo u dalabkii la socdo.
 - e. a, b, iyo c.
4. Duullimaadyada caalamiga ah cuntada rakaabka la siiyaa ma lacag baa?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
5. Markaad gaadhid eerboorka kuugu dambeeya, yaad arki doontaa oo kugu sugaya si u kuu soo dhoweeyo?
 - a. Saaxiib.
 - b. Ehel.
 - c. Shaqaalaha hay'adda dib'udejinta.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan ama mid ka mid ah.
6. Markaad saxeexaysid qoraalka ballanqaadka, meeqa sannadood gudahood ka bacdi markaad Maraykan soo gashid ayaad oggolaanysaa inaad deynta socdaalkaaga ku bixisid?
 - a. Sannad
 - b. 3 sano
 - c. 5 sano
 - d. 10 sano



Cutubka Afraad HAY'ADDA DIB'UDEJINTA

Shaqaalaha hay'adda dib'udejintu waxay kuu yihiin gadhwade kowaad dagaankaaga cusub. Sii fican u dhagayso waxay kuu sheegayaan, oo sii wax alla wixii macaluumaad ah ee suurtagal ah oo khuseeya adiga iyo qoyskaaga. Waxay khibrad u leeyihiin inay qaxootiga hagaan dhowrka asbuuc iyo dhowrka bilood ee ugu horreeya Maraykanka, waxaanay ku siin karaan macluumaad sax ah oo ku saabsan nolosha dagaankaaga cusub.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Doorka hay'addaada dib'udejinta
- » Adeegyada hay'addaada dib'udejintu ku siin doonto ama hubin doonto inaad heshid
- » Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga markaad hawsha la waddid hay'addaada dib'udejinta

Si fican u dhagayso waxay kuu sheegaan shaqaalaha hay'adda dib'udejintu. Waxay ku siin karaan macluumaad xaqiiq ah oo ku saabsan nolosha Maraykanka.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>hay'ad</i>	agency	<i>Hay'adi waa shirkad ama urur gargaara shirkado kale ama dad.</i>
	assistance	
	case manager/ caseworker	
	help	
	responsibilities	
	rights	
	services	
	staff	

Dawladdu waxay la shaqaysaa hay'adaha dib'ujinta si dib loogu dejiyo qaxootiga.

Hay'addaada dib'udejintu waxay kaa caawin doontaa kharashka daruuriga ah iyo waxyaabahaad u baahantahay 30ka maalmood ee kugu horreeya Maraykanka.



Maxaa ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee adiga iyo qoyskaaga khuseeya eed u baahantahay inaad la wadaagtid hay'addaada dib'udejinta? Matalan, magacaaga, da'daada, IWM.

DOORKA HAY'ADDA DIB'UDEJINTA

Dawladda Maraykanku waxay la shaqaysaa hay'adaha dib'udejinta si ay qaxootiga dib'udejiso. Dawladdu waxay dhigtaa xeerka, waxaayna bixisaa dhaqaalaha ku baxa adeegyada

asaasiga ah ee ay qaxootigu heelaan. Hay'adaha dib'udejinta iyo ururrada kale waxay bixiyaan adeegyada, waxaanay bixin karaan caawimaado kale. Hay'adda dib'udejintu waxay ku siin doontaa waxyaabaha asaasiga ah iyo adeegyadaad u baahantahay maalmaha iyo bilaha ugu horreeya ee noloshaada Maraykanka. Hay'adda dib'udejintu waxa kalooy kugu xiriirin doontaa adeegyo kale oo ad uga baahantahay bilowga noloshaada cusub.



Janet oo ah haweeney da' yar waxay Maraykan joogtaa bil iyo dheeraad. Muddadan, shaqaalaha hay'adda dib'udejintu waxay siiyeen adeegyada ay qaxootiga oo dhan siiyaan. Maalin maalmaha ka mid ah, Janet waxay wacday maamulaha kiiskeeda, waxanay ka codsatay inuu geeyo dukaanka cuntada lagu gado. Maamulaha kiisku wuxu u sheegay inaanu iman karin oo u ku mashquulsanyahay qoys qaxootiyuu u wado kiliniga. Wuxu xassuusiya Janet inuu hadda ka hor dhowr jeer u raacay dukaanka cuntada, oo ay garanayso siday u isticmaali lahayd fuudistaamka sida cunno loogu gadato. Waxa kale oo u sheegay inuu dukaanku u dhowyahay oo ay u lugayn karto. Wuxuu Janet u sheegay inay hadda isku daydo inay keligeed wax qabsato, oo walaalkeed oo u dhowna ay caawimo weydiisan karto. Janet way xanaaqday, waxaanay dareemaysaa inaanu shaqaalaha kiiskeedu dan ka lahayn. Janet maxay u rabtaa in shaqaalaha kiiskeedu kexeeyo? Shaqaalaha kiiskeedu muxuu Janet u gayn kari waayay dukaanka cuntada? Maxaad u sheegi lahayd Janet haddii ay shaqaalaha kiiskeeda kaaga cabato?

SODDONKA MAALMOOD EE UGU HORREEYA

Hay'adaha dib'udejintu waxay kaa caawin doonaan kharashka daruuriga ah ee nolosha 30ka maalmood ee kuugu horreeysa Maraykanka. Hay'adaha qaar si toos ah ayay kharashkan u siin doonaan ciddii adeegga ku siisa. Qaarkood adiga ayay lacagta ku siin doonaan, adigaana iska dhiibi wixii lagugu leeyahay.

ILLAA LAGA GAARAYO 90 MAALMOOD

Muddada soddonka maalmood waxa loo kordhin karaa 90 maalmood markaad soo gashid ka dib, haddii adeegyadaad u baahnayd lagu dhammaystri kari waayo 30 maalmood. Haseyeeshe xasuusnoow: dadka Maraykanku waxay qiimeeyaan isku-kalsooni, markaa waxaa lagaa filayaa inaad shaqaysatid oo ad si dhaqsi ah noloshaada mas'uul ka noqotid.



Goobaabi sawirrada ku tusaya 5 shey oo ugu muhiimsan ood aad u rabtid inaad nolosha Maraykanka wax ka baratid.



Xuquuqda iyo waajibaadka



Gaadiidka



Fasallada Af-Ingiriisiga



Guryenta



Maareynta lacagta



Doorka hay'adda dib'udejinta



Adeegyada bulshada



Shaqaaaleynta



Waxbarasho



Caafimaadka



Laqabsiga dhaqanka Maraykanka gudahiisa

Waxaad arki doontaa shaqaalaha dib'udejinta oo la shaqaynaya tabarrucayaal, ehelo, iyo xubno kale oo ka tirsan bulshada si ay kuugu adeegaan.



Qof kale la jil adigoo iska dhigaya inaad maamulaha kiiskaaga kala hadlaysid waxyaabahaad rabtid inaad macluumaad dheeraad ah ka heshid. Dhammaystir weedhahan.

- Macluumaad dheeraad ah ma iga siin kartaa ...
- Waan ku wareersanahay ...
- Ma iga caawin kartaa ...
- Waxaan rabaa inaan aqoon dheeraad ah ka helo ...
- Ma garanayo _____ micnaheeda.

Ka dib doorka jilidda beddela!

Intaanay iman Maraykanka, Furba iyo Sita Maya waxay liis ka qorteen mowduucyaday rabaan inay wax ka ogaadaan: Guryeynta, waxbarashada carruurtooda, fasalada Af-Ingiriisiga, iyo shaqo raadinta. Markay in muddo ah ku noolaayeen Maraykanka, Furba iyo Sita Maya waxay ogaadeen in isbeddal ku yimid rabitaankoodii. Hadda waxay rabaan inay wax badan ka ogaadaan sida loogu dalaco shaqada, maamulka lacagta, adeegyada bulshada, iyo siday u maarayn lahaayeen dhaqan ka-yaabka. Maxaad u malaynaysaa sababaha beddelay wixii ay rabeen? Ma u malaynaysaa inuu liiskaaguna isbeddeli doono aakhirka? Haddii ay isbeddelaan waxyaabahaad rabtay inaad baratid, taasi dhib miyay kugu tahay?

ADEEGYADA QASABKA AH

Boggan iyo kan xigaa waxay tusayaan sawirro tilmaamaya adeegyada hay'adaha dib'udejinta qasab ku ah inay bixiyaan, ama hubiyaan inuu qof kale siiyay qaxootiga oo dhan 30ka maalmood ee ugu horreysa Maraykanka. Waxad arki kartaa shaqaalaha dib'udejinta oo la shaqaynaya tabarrucayaal, ehelo, iyo xubno kale oo ka tirsan bulshada si ay ku siiyaan adeegyadan:



Inay eerboorka kaaga horyimaadaan oo ay ku geeyaan gurigaaga.



Inay ku siiyaan dharka dhaxanta ee laga ma maarmaanka ah. Qasab maaha inuu dharku cusub yahay, laakiin waa inuu nadiif ahaada oo aanu ahayn dhar dhamaaday.



Inay ku siiyaan guri amman ah, caadi ah, oo nadiif ah.



Inay adiga iyo xubin kasta oo qaan gaar ah oo qoyskaaga ka tirsan siyaan lacag u gaar ah oo ay kharashkooda shakhsi iskaga bixiyaan.



Inay ku siiyaan alaab iyo agab guri oo asaasi ah. Ma aha qasab inay alaabtani cusub tahay, laakiin waa inay nadiif ahaadaan oo aanay ahayn alaab dhammaatay



Inay ku siiyaan cunto ama gunno cunto oo ku salaysan tirada xubnaha qoyska illaa intaad ka helaysid fuudistaamb ama adigu is dabbaraysid.



Inay kaa caawiyaan inaad arji u qoratid helidda lacagta cad iyo caawimada caafimaadka.



Inay kaa caawiyaan inaad dalbatid kaarka Sooshal Sakuuritiga.

Isla markaad Ameerika soo gashid, waxaad u baahantahay inaad shaqo raadsatid si aad iskaga bixisid kharashaadkaaga.



Inay kaa caawiyaan isku qoridda fasallada Af-Ingiriisiga, hadday habboontahay.



Inay ku geeyaan meelaha wareysiyada shaqo-doonka lagaaga qaadayo iyo tababarrada shaqo



Inay kaa caawiyaan isku qoridda adeegyada shaqaaleynta, hadday habboontahay.



Inay marka loo baahdo gaadiid iyo tarjumaad kuu siiyaan adeegyada qasabka ah oo dhan.



Inay kaa caawiyaan inaad heshid baaritaanno caafimaad iyo adeeg kasta oo caafimaad eed u baahantahay.



Inay kaa caawiyaan inaad iska diiwaangelisid Adeegga Cidanka ee loo yaqaan Sellektif Seer-fis, haddii ad tahay nin da'diisu u dhaxayso 18 illaa 25 jir.



Inay carruurtaada iskuul ku qoraan



Inay kaa siyaan hanuunin degaankaaga cusub iyo nolasha Maraykanka.

Shada iyo qoyskeedu markay yimaaddeen guirigooda cusub, way niyadjabeen markay arkeen in guriga la dhigay alaab hore loo isticmaalay. Shada waxa kale oo ay ka yaabtay markay ogaatay inaanay hay'adda dib'udenjintu shaqo u sii diyaarin. Waa inay la tashataa khabiir xagga shaqada ah si ay shaqo u hesho. Sababta ay Shada u yaabtay waa maxay? Haddaad Shada ahaan lahayd, maxaad u baahnayd inaad xasuusatid?

Adeeyadan waxa loogu talagalay inay kuu bilaabaan dhabbaha nololshaada cusub. Waa inaad si fican uga faa'idaysataa adeegyadan ay hay'adda dib'udejintu ku siinayso, waayo inta badan 30 maalmood oo laga soo bilaabo maalintaad soo gashay ayay ku egyihiin. Adeegyadani way sii socon karaan illaa 90 maalmood, keliya haddii lagu dhammaystiri waayo 30ka maalmood ee ugu horreeya.

Markaad Maraykanka soo gashid, waxaad mas'uul ka noqonaysaa qoyskaaga iyo naftaada. Waa inaad si dhaqsi ah shaqo u raadsataa. Hay'adda dib'udejinta loogama baahna inay shaqo kuu raadiso. Waxa kaloo hay'adda dib'udejinta looga baahnayn inay ku siiso tilifoonka moobaylka, telefiskan, baabuur, ama kambiyuutar, ama inay kaa bixiso deynta safarka iyo biilal kale. Waa inaad shaqaysataa si ad u heshid lacag ad waxyaabahan ku gadatid oo ad iskaga bixisid kharashkaaga.

XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA INTAAD HAWSHA LA WADDID HAY'ADDAADA DIB'UDEJINTA

Waxaad leedahay xuquuq iyo waajibaad markaad hawshaada la waddid hay'addaada dib'udejinta. Waa kuwan xuquuqdaad leedahay:

- Inaad heshid adeegyada qasabka ah 30ka maalmood ee kuugu horreeya Maraykanka.
- Inay shaqaalaha dib'udejintu kuula dhaqmaan si mudan ixtiraam iyo sinnaan.
- Inaad warbixin buuxda ka haysatid kiiskaaga.
- In maclumaadka la xiriira kiiskaaga loo hayo si gaar ah. Shaqaalaha Dib'udejintu cid kale ma lawadaagi karaan macluumaadka gaarka ah ee quseeya adiga iyo qoyskaaga adigooon u fasixin, haddii macluumaadka aan looga baahnayn in adiga ama qof kale lagu badbaadiyo.



Markaad la kulmaysid shaqaalaha hay'adda dib'udejinta, waqtiga ballamaha dhowr, una sheeg su'aalahaaga iyo tabashooyinkaad qabto.

Waxase adigana hay'adda dib'udejinta hawshaada wadda kaa saaran waajibaad. Waajibaakan waxa ka mid ah:

- Inaad waqtiga ballamaha lagu qabtay ku timaadid.
- Inaad samir yeelatid markaad codsanaysid waxyaabo aan degdeg ahayn.
- Inaad shaqaalaha dib'udejinta si ixtiraam mudan ula dhaqantid.
- Inaad ogeysiisid shaqaalaha dib'udejinta wixii isbeddel ah ee ku dhaca arrintaada (matalan, shaqo cusub ama jirro halis ah), ama inaad su'aalo weydiisid oo ad la wadaagtid werwerkaaga.



Inkastoo hay'adaha dib'udejinta qaarkood ay diin ku salaysanyihiin, looma oggola inay kugu dhiirri geliyaan inaad ku birtid koox diimeed.




Goobaabi xuquuqda iyo waajibaadka ku taxan bogga 51 iyo bogga 52 ee adiga kugu cusub markaad qaxooti ahaan ku joogto Maraykanka.

Qof kale u sheeg xuquuqda iyo waajibaadka adiga iyo hay'addaada dib'udejintu isku leedihiin.



Xuquuqdaada iyo waajibaadkaagu waxay abuuraan xiriir adiga iyo hay'addaada dib'udejinta indinka dhexeeya oo miisaaman oo caafimaad qaba. Miisaanka hoos ku yaal, ku sawir ama ku qor xuquuqda iyo waajibaadka ad ku lahaan doontid hay'addaada dib'udejinta Maraykanka joogta.



NOOCYADA HAY'ADAHA DIB'UDEJINTA

Hay'adda dib'udejintu waxay noqon kartaa urur diin ku salaysan, urur madax bannaan, ama urur jinsiyadeed. Inkastoo ay hay'adaha dib'udejinta qaar yihiin kuwo ku salaysan diin, lagaagama baahna inaad dhaqdhaqaaqooda diimeed ka qayb gashid. Hay'adaha dib'udejinta looma oggola inay qaxootiga ku dhiirri galiyaan inay ku biiraan koox diimeed.



Hoos waxa ku sawiran Hay'ad Dib'udejineed. Maxaad arkaysaa? Maxay ishaadu qabatay?



Asbaabo badan oo wanwanaagsan ayaa kallifaya inaad degganaatid bulshada lagugu dejiyay.

Haddaad damacdid inaad u guurto dagaan kale, waa inaad la socodsiisaa hay'addaada dib'udejinta.

U GUURIDAA DAGAAN KALE

Sababo badan oo fiican ayaa jira inaad degganaatid ugu yaraan 6 bilood illaa hal sano dagaankaaga lagu dejiyay. Adiga iyo qoyskaagu waxaad heli doontaan adeeyada loo baahanyahay oo



dhan, waxaanad caawimo iyo tilmaan ka helaysaa hay'addaada dib'udejinta. Tani waxay fursad kuu siinaysaa inaad waqti u heshid inaad wax ka baratid nololsha Maraykanka. Haseyeeshe, haddii ad ku talajirtid inaad u guurto dagaan kale, hay'addaada dib'udejintu mas'uul kama aha guuritaankaaga, hay'adda dib'udejinta meeshaad u guuraysidna qasab kuma aha inay ku caawiso. Ogeysii hay'addaada dib'udejinta haddaad ku talajirtid inaad guurto. Haddii ad go'aansatid inaad guurto, adigaa mas'uul ka ah guuritaankaaga iyo wixii adeegyo taakuulayn ah ee ad uga baahnaan kartid dagaankaaga cusub. Waa inaad dawladda Maraykanka ogeysiisaa cinwaakaaga cusub 10 maalmood gudahooda, markaad guurtid ka bacdi.

Aung Chit shaqo wuu heli waayay isagoo joogay Maraykanka hal bil. Saaxiibkii Tun Kyaw wuxu ku noolaa gobol kale, waxaanu yiri waxa dhici karta inuu Aung Chit shaqo ka helo meeshuu Tun Kyaw ka shaqeeyo. Waxa kale oo u Tun Kyaw yiri, Aung Chit iyo qoyskiisu waxay soo degi karaan abbaarmankiisa. Aung Chit iyo qoyskiisu intay shandadihii xirxirteen ayay la degeen Tun Kyaw. Abaarmankii yaraa ee Tun Kyaw waxa ka batay dadkii, hay'adda dib'udejinta ee maxalliga ihi way caawin kari weyday Aung Chit, mana jirin shaqo isla markiiba diyaar ugu ah Aung Chit meeshuu ka shaqaynayay Tun Kyaw. Ma u malaynaysaa inuu Aung Chit go'aan fiican gaadhay? Haddaad Aung Chit ahaan lahayd, maxaad yeeli lahayd?



Ka fikir taakulaynta ay kuu siin doonto hay'addaada dib'udejintu.

- Hay'addaada dib'udejintu sideey kuu caawin doontaa?
- Maxay caqabad u tahay inaad u guurtid dagaan kale adigoo caawimaad ka helin hay'addaada dib'udejinta?



GABAGGABO*

*Run ama been? Ku tijaabi aqoontaada weedhaha hoos ku qoran oo goobaabi erayga **run** haddii ad u malaynaysid weedhu inay sax tahay, goobaabi **been** haddii ad u malaynaysid weedhu inay khalad tahay.*

- | | | |
|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|------------|-------------|
| 1. Hay'adaha dib'udejinta waxa laga rabaa inay 30ka maalmood ee ugu horreeya kaa caawiyaan kharashka lagama maarmaanka ah iyo baahida nolosha ee daruuriga ah. | Run | Been |
| 2. Hay'adda dib'udejintu waa inay ku siisaa alaab guri oo cusub. | Run | Been |
| 3. Hay'adda dib'udejintu waa inay shaqo kuu heshaa. | Run | Been |
| 4. Waxaad xaq u leeday inaad warbixin buuxda ka haysatid kiiskaaga. | Run | Been |
| 5. Shaqaalaha hay'adda dib'udejintu waxay kuu yihiin gadhwadeenka degaankaaga cusub oo waa inaad ku kalsoonaataa weydiinta su'aal kasta oo ad qabtid. | Run | Been |
| 6. Haddaad go'aansato inaad u guurto dagaan cusub, hay'addaada dib'udejinta waxa laga rabaa inay kaa caawiso guuritaanka iyo inay kula xiriiriso adeegyada dagaanka cusub. | Run | Been |

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

5



Cutubka Shanaad GURYEYNTA

Guryeyntu badanaa Maraykanka waa ku qaali, helitaanka meel nolosha ku habboonna way adagtahay. Bilowga, waxaad leedahay dhakhli kooban, markaa hooygaaga kuugu horreeyaa wax dhici karta inaanu ahayn kaad rabtay. Hay'addaada dib'udejintu waxay hubin doontaa inaad hooy leedahay bisha kuugu horreysa Maraykanka. Hay'addaadu waxay kuu raadin doontaa guri nadiif ah, mid ad awoodi kartid, oo ku yaalla xaafad ammaan ah.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Heshiiska Kirada
- » Badbaadada iyo dayactirka guriga

Hay'adda dib'udejintu waxay hubin doontaa inaad hoy haysatid bisha kuugu horreysa Maraykanka.





ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>abbaarman</i>	apartment	
	bathroom	
	cost	
	furniture	
	home	
	house	
	landlord	
	lease	
	rent	
	room	
	safety	
	utilities	

Marka ugu horreysa ee ad soo gashid Maraykanka, waxa dhici karta inaad la degtid eheladaada horey u degay Maraykanka. Ama waxa lagu geyn abbaarman, huteel, ama xarun soodhoweyn hay'adeed. Haddii aanad xaas/nin lahayn, waxa dhici karta in lagula dejiyo qaxootiga kale ee aan goyska lahayn.



Amal waxay isu diyaarinaysaa inay aaddo Ameerika. Labo qof ayay halkaa ka taqaannaa. Mid waa inaadeerkeed, midka kalena waa saaxiib. Inaadeerkeed wuxuu u sheegay Amal inay guri weyn degi doonto isla markay Ameerika soo gaarto, hase yeeshee saaxiibaddeed waxay u sheegtay inay abbaarman yar degi doonto. Sababta ay Amal macluumaad aad u kala duwan uga helaysaa labo qof oo deggan Maraykanka waa maxay?



Ka fikir gurigaagii ama guryahaagii kuugu dambeeyay.

- Gurigaagu siduu u ekaa?
- Maxaa gurigaaga kaaga dhigay shay muhiim ah?
- Maxaad ugu yeertay hooy/guri?



Sawir waxa gurigaaga (ama guryahaaga) kaaga dhigay muhiim.



Qof kale uga sheeke waxaad sawirtay. Tani waxay leyli fiican kuugu noqonaysaa Maraykanka dadkaad kula kulantid markaad uga sheekeynaysid gurigaaga ama guryahaagii hore.

NOOCYADA GURYAHA

Bulshooyinka Maraykanka badankoodu waxay leeyihiin dhowr nooc oo guryo ah.



*Nooca guriga iyo sawirka iswaafaji.**

1. Abbaarman

a.



2. Guri qoys keli ah

b.



3. Guri tareylar ah

c.



4. Qol guri ama abbaarman ku dhex yaal

d.



* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 222aad.

Hay'addaada dib'udejinta ayaa mas'uul ka ah inay ku siiso alaabta iyo agabka guriga ee daruuriga ah.

Ijaarka gurigu wuxuu ku xidhanyahay xaafadduu ku dhexyaallo.

Markaad ijaaranaysid guri, waa inaad saxeexo heshiiska kirada.

Markaad saxeexaysid heshiiska kirada, waxaad oggolaanaysaa inaad ijaaranaysid guriga bilo cayiman iyo inaad kirada wakhtigeeda ku dhiibaysid.

Waa caadi Maraykanka gudahiisa in ay dadku ijaartaan guri ama abbaarman. Gurigu ama abbaarmanku wuxuu inta badan leeyahay jiko leh meel wax lagu kariyo, mashiin weelka lagu dhaqo, iyo tallaagad; fadhi iyo qado; hal qol ama ka badan oo hurdo ah; musqul; iyo qolal yaryar (armaajooyin) oo dharka la gashado.

ALaab GURI

Hay'addaada dib'udejintu waxay mas'uul ka tahay inay abbaarmanka ama guriga ay adiga iyo qoyskaaga u xuleen ay dhigto alaab iyo agab guri oo asaasi ah. Waxyaabahaas waxa ka mid ah kuraasta, miisaska, sariiraha, go'yaasha, baahida jikada, iyo waxyaabaha loo isticmaalo daryeelka shaqsigu. Hay'adda loogama baahna inay ku siiso waxyaabo cusub. Waa inay ahaadan kuwo fiican, laakiin qasab maaha inay cusub yihiin.



Hadeel iyo qoyskeedu markay yimaaddeen Maraykan waxay la yaabeen alaabta gurigooda cusub la dhigay inaanay islahayn. Way garteen inaanay alaabtu cusbayn, laakiin maxay u ahaan waayeen wax isla socda?

KHARASHKA GURYEYNTA

Kharashaadka guryeyntu gobol ka gobol, magaalo ka magaalo, iyo xataa xaafad ka xaafad ayay ku kala duduwanyihiin. Hase yeeshee, meelkastood ku nooshahay, kharashka guryeyntu waa qaybta ugu weyn kharashkaaga bil walba.



Ka fikir kharashka guryeynta dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Hadda ka hor lacag ma kaaga baxday guryeyn?
- Meeqa ayaad guryeynta ku bixisay?
- Miyaad bixin jirtay adeegyada loo yaqaan yutilitiga, sida biyaha, guryo-kululeynta, ama korontada?
- Kharashyadaada kale ee la xiriira guryentu maxay ahaayeen?

HESHIISKA KIRADA (LIIS)

Maraykanka gudahiisa markaad kiraysanaysid abbaarman ama guri, waa inaad saxeexdaa warqad loo yaqaan liis (lease) ama heshiiska kirada. Heshiiskani waa dukumenti sharciya oo sharaxaaya xuquuda iyo mas'uuliyadda kireystaha (adiga) iyo kireeyaha (mulkiilaha dhismaha).

Heshiiska kiradu wuxuu dhigayaa abbaarmanka ama guriga bishiiba kiradiisu intay leegtahay. Kirada waxa ku jiri kara kharashka yutilitiga (gaaska, saliidda loo isticmaalo diirinta guriga, korontada, biyaha iyo qaadista qashinka), ama adeegyadani kharash gooni ah ayay noqon karaan. Intaanad saxeexin heshiiska kirada, waa muhiim inaad kireeyaha weydiisid inuu yutilitigu ku jiro ijaarka.



MAS'UULIYADDA KIREYSTAHA

Markaad saxeexaysid heshiiska kirada, waxaad oggolaanaysaa waxyaabahan:

- Inta qof ee ku noolaan doonta abbaarmanka ama guriga.
- Inta ay dhantahay kiradu bishiiba.
- Bisha gudaheeda maalinta lagaa rabo kirada.
- Xaaladda abbaarmanka (waa in nadaafadda la dhowraa oo aanay waxa dhaawac ihi gaarin).
- Inta bilood ee ad degganaanaysid (inta badan 12 bilood).
- Shuruudaha ku xiran jebinta heshiiska kirada.

Durga wuxuu dhowr maalmood gudahood u ambabixi doonaa Ameerika, waxbuu se ka walbahaarsanyahay. Wuxuu ogyahay inuu heshiis saxeexi doono markuu ijaarto abbaarman, waxaanu fasalladii hanuunintii dhaqanka ka xasuustaa in markasta oo u saxeexayo xaashi fahmo macluumaadka ku qoran warqadda. Laakin macluumaad tiro badan ayaa ku qoran heshiishka ijaarka. Siduu u fahmi karaa wax kasta? Maxaad Durga uga sheegi kartaa heshiiska ijaarka? Iyo halkee ayuu ka heli karaa cid ka caawisa fahamka heeshiiska kirada?

Guriga ha ka saarin aaladaha digniinta dabka. Waxa meesha loogu rakibay inay adiga iyo dadka kalee guriga kugula nool ka dhowraan dabka.

GURI-KA-SAARID

Haddii ad jebisid heshiiska kirada, waa lagaa saari karaa (qasab ayaad kaga baxaysaa abbaarmankaaga). Matalan, haddii ad bixin weydo ijaarka ama dhaawac weyn ad u geysatid hantida, waa lagaa saari karaa.



MUS'UULIYADDA KIREEYAHA

Sharciyada guryeyntu way saameeyaan kireystaha iyo kireeyaha labadaba. Mulkiilayaashu waa inay hubiyaan in guryaha ay ijaarayaan yihiin kuwo buuxinaya shuruudaha bedqabka dhisme iyo nadaafadda. Kireeyuhu waa inuu hubiya in korontada, qasabadaha biyaha iyo musqulaha, iyo siistamka kululeeya guryuhu ay fiicanyihiin. Waa inay geliyaan guryaha aaladaha sheega qiiqa, oo waa inay dabargooyaan jirka iyo cayayaanka. Sharciyada guryeyntu waxa kalooy dhigayaan inaanay kireeyeyaashu cidna u diidi karin kireynta iyagoo ugu aanaynayaa jinsiyaddooda, diintooda, ama dalkay ka soo jeedaan.

Dhowr bilood markuu ku jiray abbaarmankiisa, Kyaw wuxu arkay inay baranbaro ku nooshahay jikada meesha weelka lagu dhaqo iyo agagaarkeeda. Abbaarmankiisu waxa kale oo u noqoday wasakh. Yaa ka mas'uul ah nadaafadda abbaarmanka? Yaa ka mas'uul ah ka takhalluska baranbarada? Muxuu Kyaw u baahanyahay inuu weydiisto kireeyaha abbaarmanka inuu ka caawiyo?



Ka fikir sida xuquuqda iyo mus'uuliyadda kireeyeyaashu iyo kireystayaashu ay ku leeyihiin Maraykanka ula mid yihiin ama kaga duwanyihiin kuwii hore kuu soo maray.

- Weligaa guri ma ijaaratay?
- Muxuu kireeyuhu mas'uul ka ahaa?
- Adiguse, kireyste ahaan, maxaad mas'uul ka ahayd?
- Kireyste ahaan maxay ahayd xuquuqdaadu?

NABAD-QABKA GURYAHA

Waa muhiim inaad hooygaaga ka dhigtid mid bedqaba.



*Iswaafaji tasmada nabadgelyo ee hoos ku qoran iyo sawirka saxda ah.**



1. Irridaha iyo dariishadaha



2. Dad aanad garanayn



3. Aaladda qiiqa



4. Dab damiye



5. Foonada

- a. Ha saarin ama ha damin aaladaha sheega qiiqa ee gurigaaga ku jira. Markuu qiiq jiro ayay dhawaaqaan si ay kuu wargeliyaan in wax gurigaaga ku jiraa gubanayo.
- b. Maryaha iyo wixi kale ee dab qabsan karo ka fogee foonada. Ha ka tegin girgiraha ama foonada markaad wax karineysid.
- c. Dad aanad garanayn ha u oggolaan inay gurigaaga soo galaan. Dad aanad garanayn haddii ay irriddaada kuugu yimaaddaan, weydii waxay yihiin iyo waxay rabaan intaanad u oggolaan inay guriga soo galaan. Haddii ad afgaranweydo oo ay kugu abuuraan dareen dhibsasho, ha u oggolaan inay soo galaan.
- d. Markasta quful irridaada, xataa markaad guriga joogtid. Markaad ka baxaysid gurigaaga, quful irridaha iyo dariishadaha.
- e. Dababka yaryar ee ka kici kara gurigaaga u isticmaal dab damiye (matalan, markaad wax karinaysid). Weligaa biyo ha ku bakhtiin dab saliid ka kacay. Dababka waaweyn, si degdeg ah uga bax dhismaha, oo wac adeegga gurmada degdegga ah adigoo graacayaa 9-1-1. (Eeg Cutubka 6 si aad aqoon dheerad ah uga kororsatid wicidda 9-1-1.)

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaqa A, bogga 222aad.

Cuntada dabool, kuna kaydi tallaagadda. Haddaad cunto bannaanka ku dhaaftid, waxa dhici karta inay soo jiidato cayayaanka iyo jiidka.



Goobaabi tallaaboyinka nabadgelyo ee ku xusan bogga 63 ee ad adigu weligaa dhaqangelisay. Qof kale uga sheeke sidaad tallaabooyinkan isugu diyaarisay (tababartay). Ka dib tilmaan kuwa kugu cusub.

DAYACTIRKA GURYAHA

Waa muhiim in gurigaagu ahaado nadiif oo u ku jiro xaalad fiican.

- ❑ Cuntada dabool oo ku rid tallaagadda. Cunto aan la daboolin ama lagaga tago miiska waxay soo jiidan kartaa cayayaan iyo jiidka



- ❑ Qashinka oo dhan ku rid weelka qashinka loogu talagalay oo bac ku dhexjirto. Haddii ay suurtagal tahay, qashinkaaga maalin walba ku wareeji weelka qashinka ee dibadda yaal ama konteenarka weyn ee qashinka xaafadda lagu ururiyo. Qashinka gurigaaga yaallaa wuxu soo jiidan karaa cayayaan, baranbaro, ama jiid.



- ❑ Saxanka (siinkiga) jikada ha ku ridin qolofa ukunta, lafo, ama diirka miraha iyo khudaarta. Saxanka musqulaha, ama qasabadda biyaha ka saarta meesha lagu qubeysto, ama godka musqulaha ha ku ridin timo iyo wixii la mid ah. Waxyaabahan ku rid weelka qashinka.



- ❑ Godka musqusha ha ku ridin wax kale (sida suufka iyo dheebbarka) aan ka ahayn warqadda musqusha loo isticmaalo. Carruurtaada bar inaanay biyo ku furin wax ku jira godka musqusha oo aan ka ahayn warqadda musqusha loo isticmaalo.



- ❑ Irridaha meesha lagu qubeysto si buxda u xir, daahyada gudaha saxanka qubeyska soo geli, oo markaad qubeystid ka bacdi isticmaal jaan-dhowr taal sagxadda ka baxsan meesha qubeyska.



- ❑ Markay aaladda sheegta qiiqu bilowdo inay dhawaaqdo iyadoo aanay wax qiiqihi jirin, taa micnaheedu waa waxay u baahantahay in beetariga laga beddelo. Isla markaaba ka beddel beetariga. Xasusnow inaad hubisid inay aaladda sheegta qiiqu mar walba daarantahay oo ay shaqaynayso.



Markay Taw Meh shaqada kas soo noqotay oo ay guriga timi, ur ayaa ka soo baxaysay jikada. Maxaa ka mid ah waxyaabaha ay u baahantahay inay hubiso si ay u ogaato meesha urtu ka imanayso. Maxaa ka mid ah waxyaabaha ay Taw Meh samayn karto si aanay jikadeedu u soo urin mustaqbalka?



Sideebuu hooygaaga cusub ee Maraykanku ula mid yahay ama uga duwanaan karaa hoygaagii hore? Meesha hoose ku qor ama sawir waxay iskaga mid yihiin iyo waxay ku kala duwanyihiin – matalan, tirada iyo noocyada qolalka, noocyada qalabka musqulaha, biyo-qasabadeed oo socda ama biyo kulul, iyo hababka wax loo nadiifiyo.

WAXAY ISKAGA MID YIHIIN

WAXAY KU KALA DUWANYIHIIN

Ma u malaynaysaa waxyaabahan ay iskaga mid yihiin iyo/ama ku kala duwnyihiin inay kuu sahlayaan la qabsigaaga noloshan ama kugu adkeynayaan la qabsiga.



Qof kale la jil adigoo iska dhigaya kireyste la hadlaya kireeye si ad u ogaatid waxaad u baahantahay inaad ka ogaatid hoygaaga cusub. Waxaad weydiin kartaa:

- Waa meeqa ijaarku?
- Goormaa la iga rabaa ijaarka?
- Yutilitigu ma ku jraa?
- Haddii ay dhibaato dhacdo, yaan wacaa?
- Muddada kiradu waa intee?

Su'aalahaaga la imoow!



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Tallaabooyinkee ayaa guriga u soo jiidi kara cayayaanka ama jiidka?
 - a. Cunto aan daboolnayn oo lagu dhaafo miiska.
 - b. Cunto tallaagadda la geliyo.
 - c. Qashinka jikada oo lagu dhaafto maalmo badan weelkii lagu ururiyay.
 - d. a iyo c.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 222aad.

2. Haddii ad guri ama abbaarman ku kiraysatid Maraykanka gudhiisa, inaad heshiis kiro saxeexdid miyaa?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
3. Maxaad samayn lahayd haddii dad aanad garaneyn irridaada kuugu yimaaddan?
 - a. Irridda ka fur oo soo dhowee.
 - b. Haddaad waxooga Af-Ingiriisi ah taqaanid, weydii waxay yihiin iyo waxay rabaan.
 - c. Haddii ad dhibsasho dareentid ha u oggolaan inay soo galaan.
 - d. b iyo c.
4. Markaad saxeexaysid heshiiska kirada, maxaad oggolaanaysaa?
 - a. Kiradu inta ay tahay.
 - b. Inta bilood ee ad degganaanaysid.
 - c. Inta qof ee ku noolaan doonta guriga ama abbaarmanka.
 - d. Dhamman inta kor ku xusan.
5. Hay'adda dib'udejinta ma laga raba inay ku siiso alaab guri oo cusub?
 - a. Haa.
 - b. Maya.

6



Cutubka Lixaad ADEEGYADA BULSHADA

Hay'addaada dib'udejinta ka sokow, waxa degaankaaga ka jira hay'ado kale oo adeegyo bixiya. Adeegyadooda iyo qaabilaaddoodu waxay ku xiranyihiin hadba meeshay joogaan.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Adeegyada dawladda
- » Adeegyada caawimada gaarka ah
- » Adeegyada dadweynaha





ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Kadib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
Daryeelka Carruurta	child care	Fatima waxay raadisaa meel carruurta loogu daryeelo si ay u aaddo fasalka ESL.
	community	
	emergency	
	library	
	parks	
	public	
	recreation	
	translation	

Hay'adaha dawlaga ah ee u adeega bulshadu, waxay caawiyaan dadka baahi gaar ah qaba.



Ka fikir noocyada adeegyada ad ka heli kari lahayd dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo.

Dawladdu waxay qoysaska danyarta siisaa raashin gargaar ah, qaybintiisana waxay ku salaysaa tirada xubnaha qoyska iyo dakhligooda.

MUCAAWINADA DAWLADDA

Hay'adaha dawlaga ah ee adeegyada bulshadu waxay dadka ku nool degaanka siiyaan adeegyo. Waxay caawiyaan dadka leh baahi gaar ah, sida qoysaska danyarta ah, darbijiifka, iyo dadka laxaadka la'. Barnaamijyada dawladdu way xaddidanyihiin oo waxay leeyihiin nadaam la raaco si looga qaybqaato. Degaannadu waxay ku kala duduwanyihiin noocyada iyo mugga adeegyada ay bixiyaan. Waa kuwan barnaamijyo dawladeed oo caawiya qaxootiga.

BARNAAGMIJYADA CAAWIMADA LACAGTA KAASHKA AH.

Dadka shaqo helistu ku adkaato, laba barnaamij ayaa siiya mucaawino dhaqaale oo kumeelgaar ah: Mucaawinada Kumeelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance to Needy Families [TANF]) oo loogu tala galay waalidiinta carruurta leh, iyo Mucaawinada Kaashka (lacag caddaan ah) ah ee Qaxootiga (Refugee Cash Assistance [RCA]) oo loogu talagalay dhallinyarada iyo qoysaska aan carruur lahayn.



BARNAAMIJKA ISWAAFAJINTA DEEQDA.

Beddelka mucawinada kaashka ah ee qaxootiga la siiyo, hay'ado badan oo dib'udejinta ihi waxay barnaamijkan u bandhigaan qaxootiga raba inay shaqaystaan, laakin caawimo dhaqaale u baahan inta hore. Qaxootiga isku qora barnaamikani waxay ballanqaadaan inay si deg deg ah oo suurtagal ah shaqo u helaan. Ballanqaadkaa dartiis, waxa lagu abaalmariyaa mucaawino dhaqaale, tala-siin shaqo, iyo adeegyo shaqo-ku-meeleyn ah, afarta illaa lixda bilood ee ugu horreysa Maraykanka.



BARNAAMIJKA MUCAAWINADA NAFAQADA DHEERAADKA AH (SUPPLEMENTAL NUTRITION ASSISTANCE PROGRAM [SNAP]).

Barnaamijkan fedaraaliga ihi wuxuu siiyaa mucaawino dhaqaale dadka danyarta ah ee deggan Maraykanka si ay cunto u gataan. Qofka ku jira barnaamijkan waxa la siiyaa kaar u ku gato cunto cayiman bishiiba. Qaxootigu waxay arji u qoran karaan xafiiska dawladda maxaliga ah si ay u helaan mucaawinada cuntada. Mugga mucaawinadu waxay ku xirantahay tirada qoyska iyo dakhli.



TAAKULADA DAKHLIGA SAKUURITIGA (SUPPLEMENTAL SECURITY INCOME [SSI]).

Waa barnaamij fedaraali ah oo ku caawiya lacag cash ah dadka indhaha la', laxaadka la', ama da'doodu ka weyntahay 65 jir oo dakhligoodu yaryahay ama aan lahayn dakhli.



BARNAAMIJYADA MUCAAWINADA DARYEELKA CARRUURTA.

Degaannada qaar waxay xannaanada carruurta kharash yar ama lacag la'aan ku siiyaan dadka danyarta ah si ay u shaqo tagaan ama shaqo u raadsadaan (eeg Cutubka 12 si ad macluumaad dheeraad ah uga heshid daryeelka carruurta).

Abbas wuxu aaminsanyahay inuu heli doono mucaawino dawladeed markuu dego Maraykanka. Markuu la kulmo maamulaha kiiskiisa, wuxuu filanayaa inuu maamulaha kiiskiisu siin doon lacag caddaan ah ama jeeg, laakin labada midna muu helin. Maxay taasi u dhici weyday? Sifooyinke ayay mucaawinada dawladdu kugu soo gaadhi kartaa?

MUCAAWINADA GAARKA AH

Ururrada mucaawino ee gaarka loo leeyahayna waxay qaxootiga siiyaan adeegyo. Noocyada adeegyadan iyo inta ay leegyihin waxay ku kala duwanyihin hadba meeshay ku yaallaan, laakiin degaanno badan ayaa bixiya adeegyadan:

- Tala-siin.
- Taakulayn meeqaamka immigrayshinka.
- Fassallada Af-Ingiriisiga.
- Mucaawino shaqaaleyn (talo-siin xagga shaqada iyo tababar xirfadeed).
- Adeegyada tarjumaadda.

Waxa dhici karta inay ururro-diimeedku fidiyaan macaawino iyo taageero. Qaxootigu kuma qasbana inay ka qayb-qaataan hawlaha urur-diimeedka si ay u helaan adeegyada.

Ameerika waxa ka jira saddex nooc oo birmadka dedegga ah: waaxda dabdamiska, booliiska, iyo ambalaaska.

Gobi way ogtahay inay u baahantahay inay bilowdo barashada Af-Ingiriisiga. Waxay ogaatay in hay'addeeda dib'udejintu aanay bixin kalaasyo Af-Ingiriisi ah, laakin hay'addu waxay ka caawin kartaa inay ka hesho kalaas laga bixiyo degaankeeda meel ka mid ah. Gobi halkee ayay casharro ka qaadan kartaa?

Caadiyan, labada nooc ee ururrada adeegga gaarka ah waxay yihiin ururro ku salaysan bulshada iyo ururro diimeed.

URURRO KU SALAYSAN BULSHADA (COMMUNITY-BASED ORGANIZATIONS [CBOS])

Ururradani waxay ka hawlgalaan degaanka maxaliga ah oo waxay xubnaha degaanka siiyaan adeegyada madadaalo, bulsho iyo waxbarasho. Nooca CBO ee ad degaankaaga ka heli kartid wax ka mid ah ururro ku salaysan jinsiyad



bulsho. Ururradan waxa sameeyay qaxooti hore iyo muhaajiriin oo waxay ku caawiyaan dadka ku cusub degaankooda. Qarkood waxay bixiyaan fasallo waxbarasho, waxay abaabulaan kooxaha dumarka, waxaanay qabtaan xaflado dhaqan iyo madadaalo.

URURRO DIIMEEDKA



Kaniisadaha, masaajidyada, sinagaagyada iyo ururro-diimeed kale ayaa iyaguna bixiya adeegyo kala duwan. Qaarkood waxay dadka waaweyn siiyaan fasallo ESL ah, qaarkoodna waxay bixiyaan dhar iyo alaab duug ah. Qofka isticmaala adeegyadan lagama rabo inuu ka qaybgalo hawl-diimeedka ururka. Maraykanka gudahiisa, waxaad xor u tahay diintaad doontid inaad ku dhaqantid, ama inaad gebi ahaanba diinna raacin.

Kaniisad masiixi ayaa Saw Min iyo qoyskiisa ugu yaboohay kartoon cunno ah oo bilaash ah asbuuc kasta. Saw Min iyo qoyskiisu cuntada way u baahanyihiin, laakin krishtaan maaha, mana rabaan inay noqdaan. Saw Min inuu aqbalo cuntada ma u bannaantahay? Waayo?

ADEEGYADA DADWEYNE

Bulsho kastaa waxay leedahay adeegyo dadweyne oo diyaar u ah qof kasta oo ku nool bulshadaasi. Waa inaad adeegyadan kala barataa si aad uga faa'iidayatid. Waa kuwan dhowr adeegyo-dadweyne ee ugu caansan.

ADEEGYADA GURMADKA DEGDEGGA AH IYO WICIDDA 9-1-1. Degaannadu waxay leeyihiin adeegyada dab-demiska iyo gurmada degdegga caafimaadka. Si ad caawimo u heshid marka arrin degdeg ihi kula soo daristo, garaac 911 una sheeg obbareetarka waxaad u baahantahay (“booliis,” “Dabdemis,” ama “ambalaas”) iyo meeshaad joogtid. Haddii ad Af-Ingiriisi ku sharixi kari weydo dhibka ku haysta, dheh keliya, “Helb” ama “Immarjansi”, hana dhigin tilifoonka. Khadka tilifoonka ee furan wuxuu ka caawinayaa obbareetarku inuu ogaado meeshaad joogtid.

Shumac u shidan Gori Maya ayaa dhulka ku dhacay oo dab qabadsiiyay gogosha. Af-Ingiriisi weli kuma hadasho, hase yeeshe waxay xasuusataa inay wici karto 9-1-1. Tilifoon ka jawaabaha (Obbareetarka) ayay ku tiri “No English. Fire.” Maxay muhiim u tahay inay ku dhawaaqdo “fire”? Maxaa kale oo ay Gori Maya u baahantahay inay xasuusato?

Askarta boolisku waxay ilaaliyaaan oo ay caawiyaan dadka. Waa inaad amarkooda u hoggaansanaato, oo aanad ka biqin.

Maraykanka waxa ka jira saddex nooc oo ugu muhiimsan adeegyada gurmadda degdegga ah.



*Xarriiq layn ka bilow magaca waaxda oo gaarsii sawirka gaadiidka waaxdaasi isticmaasho.**

1.



a. Dabdemis

2.



b. Booliis



3.



c. Ambalaas



*Go'aami inay xaaladahani degdeg (immarjansi) yihiin iyo inkale. Hadday yihiin, go'aami adeegga dedegga ah ee la codsan lahaa.***

Xaaladdani ma degdeg baa?***	Haa, 911 wac			Maya, 911 ha wicin
	Dabdemis	Booliis	Ambalaas	
1. Waxaad soo toostay habeen badh oo waxaad aragtay dab qabsaday guriga kaa soo horjeeda. 				
2. Gabadha 8 jirka ah ee ku nool guri ku yaal xaafadda ayaa wiilkaaga kubaddiisa ka qaadatay oo gurigeeda la aadday. 				

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

** Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

*** Ra'yiga layligani wuxuu ka yimid Bugga Ardayga ee Hanuunita Dhaqanka Maraykanka (United States Cultural Orientation Student Handbook) oo ay diyaarisay Xarunta Taakulaynta Dib'udejinta ee Aasiyada Bari (Guddida Bedbaadada Caalamiga ah) (Resettlement Support Center in East Asia [International Rescue Committee])

Xaaladdani ma degdeg baa?*	Haa, 911 wac			Maya, 911 ha wicin
	Dabdemis	Booliis	Ambalaas	
<p>3. Gabadhaada ayaa geed ay fuushanayd ka soo dhacday, xanuun badanna wuu hayaa.</p> 				
<p>4. Aaladdaada digniinta dabka ayaa dhawaaqaysa, laakiin markaad fiirisay abbaarmankaaga waxad aragtay inaanu dab jirin.</p> 				
<p>5. Waxaad aragtay qof qariib ah oo jabsanaya abbaarmanka deriskaaga habeen ay magaalada ka maqnaayeen.</p> 				
<p>6. Si la ma filaan ah ayaad fartaada u goysey adigoo jarjaraya khudaar, dhiiggana waxaad ku joojisay adigoo saaray baandheej.</p> 				

BOOLIIS. Saraakiisha booliisku waxay u adeegaan dadweynaha, waxayna ilaaliyaan bulshada oo dadkay caawiyaan. Waa inaad raacda amarka sarkaalka booliisku ku siiyo oo waa inaad iyaga ka biqin. Haddii sarkaalka booliis ihi xaggaaga u soo dhaqaaqo oo u ku yiraahdo istaag, waa inaad fulisaa amarkaa. Haddii ad ka carartid, taasi waxay tilmaan u noqon kartaa inaad wax khalad ah samaysay, waxaanay kuu horseedi kartaa dhibaatooyin. Haddii aanad la hadli karin booliiska, codso turjumaan ama la xiriir hay'addaada dib'udejinta.



Tee Reh wuxuu u lugaynayaa dukaanka, waxaanu ka tallaabay jidka. Ka bacdi ayuu arkay barta looga tallaabo jidka, waxaanu garowsaday inuu u baahnaa inuu isticmaalo bartaa. Sarkaalad boolis ah ayaa xagga Tee Reh u soo dhaqaaqday, markaasu orod ku baxsaday. Sarkaaladdu way ka daba carartay oo way soo qabatay. Waxay Tee Reh u jartay tikidh ganaax ah oo ku saabsan sharciga jidgoynta oo u jabiyay iyo ganaax ku saabsan orodkii u ka orday. Tee Reh labo shay oo u ubaahnaa inuu fuliyo si u uga badbaado ganaaxyadan maxay ahaayeen? Maxaad Tee Reh uga sheegi lahayd booliska Maraykanka?

MAKTABADAHHA. Maktabadaha dadweynaha waxa yaalla buugaag iyo waxyaabo kale, sida siidii-yada (CDs) iyo diifiidii-yada (DVDs) oo ay dadka degaanku amaahan karaan lacag la'aan. Waa inaad dalbataa kaarka maktabadda si ad maktabadda ugala baxdid waxyaabaha yaalla. Maktabaduhu inta badan waxay bixiyaan fasallo Af-Ingiriisi ah ama teeb garaacidda, intooda badanna waxay leeyihiin kambiyuutarro ay dadweynuhu isticmaali karaan.



BEERAHA RAAXADA. Beeraha raaxada ee maxaliga ihi waxay dadweynaha u bandhigaan meelo dibadbax-maalmeed (bignig) lagu samaysto, meelo carruurto ku ciyaaraan, iyo garoommo isbortiga lagu ciyaaro. Beeraha raaxadu badanaa waxay leeyihiin shuruudo qeexaya waxa dadka booqanayaa samayn karaan ama aanay samayn karin. Beeraha raaxada qaarkood waa bilaash, qaarkoodna lacag baa lagu galaa.



Aamina waxay ku nooshay dhisme abbaarman ah oo aan lahayn daarad ay ciyaalkeedu ku ciyaaran. Waxay ogtahay inaanay carruurteeda u oggolaan karin inay jidka ku ciyaaraan. Carruurta Aamini xaggay ku ciyaari karaan?



Isbarbardhig adeegyada ka jira Maraykanka iyo kuwa ka jira dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Adeegyadee isku mid ah?
- Adeegyadee kala duwan?



Hoos ku sawir ama qor isku mid ahaantooda iyo kala duwanaantooda.



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Kooxaha hoos ku qoran kuwee ayaanay adeegyada bulsho ee dawliga ihi caawin?
 - a. Qofka/qoysaska danyarta ah.
 - b. Dadka laxaadka la'.
 - c. Darbijiifka.
 - d. Maalqabeennada.
2. Adiga iyo deriskaagu waxaad Maraykan timaaddeen isku mar. Waxaad kuwada nooshihiin abbaarmanno isku dhisme ku yaal, laakin waxaad u fiirsatay qoyskiisa oo 5 qof ka kooban inay lacag dheeraad ah oo kaash ah ka helaan dawladda marka la barbar dhigo qoyskaaga oo 3 qof ka kooban. Dawladdu miyay khaldantay?
 - a. Haa.
 - b. Maya, waayo adeegyada bulsho ee dawladdu waxay ku salaysanyihiin qoysku intuu dhanyahay iyo waxyaabo kale.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 222aad.

3. Haddii ad fasallo Af-Ingiriisi ah ka qaadatid urur-diimeed, waa inaad ku biirtaa diintaasi si ad u sii wadatid ka qaygalka fasallada.
 - a. Run.
 - b. Been.
4. Dadka Maraykanka badankoodu maxay dareemaan ama ku dhaqaaqaan markay arkaan sarkaalka booliis ah?
 - a. Waxay dareemaan amni iyo in la ilaalinayo.
 - b. Baqdin baa gasha.
 - c. Waxay caayaan sarkaalka booliiska ah
 - d. Way cararaan
5. Maktabadaha dadweynaha ee ad ka amaahan karto buugaagta, siidiiyada (CDs) muusigga, iyo diifidiiyadu (DVDs) ma bilaash baa?
 - a. Haa.
 - b. Maya.



Cutubka Toddobaad GAADIIDKA

Marka ugu horreysa ee ad Maraykanka soo gashid, waxay u badantahay inaad waqti badan ku lumisid u lugaysiga meelahaad rabtid inaad aaddid. Waxaad mardhow bilaabi doontaa inaad raacdid gaadiidka dadweynaha. Gaadiidka dadweynuhu waxay aad ugu kala duduwanyihiin degaannada. Meelaha qaar, meelkastood rabtid ayay ku geyn karaan. Meelaha qaarna, gaadiidka dadweynuhu wuu ku yaryahay ama maba jiraba. Hay'addaada dib'udejintu waxay ku siin doontaa macluumaad ku saabsan gaadiidka dadweynaha degaankaaga cusub isla markaad soo gaartid.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Noocyada gaadiidka dadweynaha
- » Caalamadaha taraafkada iyo nabadgelyada waddooyinka
- » Lahaanshaha iyo wadashada baabuurka


Gaadiidka dadweynuhu waa kala nooc xaafad ka xaafad. Meelaha qarkood way baaxad weynyihiin, meelaha qaarna helitaankoodu wuu yaryahay.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
Baaskiil/ bishkileeti	bicycle	
	bus	
	car	
	driver's license	
	road	
	street	
	traffic light	
	transportation	

Badanaa waa inaad tikidh gadato si ad u raacdid gaadiidka dadweynaha.

NOOCYADA GAADIIDKA DADWEYNAHA

Gaadiidka daweynuhu waxay dadka magaalooyinka deggen fursad u siiyaan inay magaalada dhexmaraan iyagoon baabuur wadan. Maraykanka waxa ka jira saddex nooc oo ugu muhiimsan gadiidka dadweynaha: basaska, sabweeyada, iyo tareennada shaqada loo raaco. Waxay ku socdaan jadwal oo badanaa waxay istaagaan meelo loogu talagalay inay rakaabku kaga degaan ama ay ka soo fuulaan. Badaanaba waxaad u baahantahay inaad tikidh gadatid si ad u isticmaashid gaadiidka dadweynaha. Waxa dhici karta in tagaasidana la helo, laakiin caadiyan waa qaali.



Ka fikir sidaad meelo u tagijirtay markaad joogtay dalkaagi hooyo ama waddankaagii magangelyo.

- Ma lugayn jirtay, ma baaskiil ayaad wadan jirtay, mise waxaad isticmaali jirtay gaadiid kale?
- Haddaad isticmaali jirtay gaadiid kale, ma wuxuu ahaa mid dadweyne mise mid gaar ah?
- Sideed ku tegi jirtay meelahaad rabtid?



Goobaabinta hoose, ku sawir ama ku qor sidaad ku tegi jirtay meelahaad rabtid markaad joogtay dalkaagii hooyo ama waddankaagii magangelyo?

**Suuqa
sideo baad ku
tegi jirtay?**

**Saaxiibkaa
sideo baad ku
booqatay?**

**Ehelkaa
sideo baad ku
booqatay?**

**Shaqada
sideo baad ku
tegi jirtay?**

**Meelaha
kasi fogfog
sideo baad ku tegi
jirtay?**

Ka fojignow caalmadaha iyo nalalka taraafikada si ad nabadqabkaaga u dhowrtid markaad lugaynaysid.

Inta hore way dhib badnaan kartaa, laakiin haddaad waqti siiso, waad fahmi doonta hannaanka gaadiidka. Waxa kalood ogaataa, meelaha qaarkood waxa dhici karta inaad safar dheer gashid ama ad raacdid dhowr nooc oo gaadiidka dadweynaha ah si ad meel uga baxdid ood u gaartid meel kale.

Meel ad ku cusubtahay barashadeedu waqti ayay qaadataa, markaa ha niyadxumaan. Mar uun baad kala baran doontaa u kala gooshidda!



CALAAMADHA TARAAFIKADA IYO NABADGELYADA WADDOOYINKA

Markaad raacaysid gaadiidka dadweynaha iyo markaad degaankaaga dhex lugaynaysid, waxaad u fiirsan doontaa dhowr calaamadaha iyo nalalka taraafikada ah. Kuwan iyo xeerarka kale ee waddooyinku waxay dadka ka caawiyaan inay si nabadgelyo leh ku lugeeyaan, baabuurta ku wataan.



*Caalamadda waafaji xeerkay ka tarjumayso.**

1.



a. Tani waxay calaamadinaysaa meesha jidka looga tallaabo. Marwalba jidka waa inaad ka goysaa meelaha ay calaamaddani ku taal.

2.



b. Tan micnaheedu waa "istaag." Ammaan ma aha inaad jidka goysid.

3.



c. Tan micnaheedu waa "soco." Waa ammaan inaad jidka goysaa.

4.



d. Gobolada badankoodu waxay qasab ka dhigaan inay ciyaalku gashadaan koofiyad adag (helmet) markay baaskiil kaxaynayaan.

5.



e. Markaad baabur socda ku dhexjirtid waa muhiim inaad xiratid suunka kursiga. Gobolada oo dhan waa qasab carruurta inay haystaan kursi amnigooda loogu talagalay.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.

Lahaanshaha iyo wadidda baabuurku wuu kharash badanyahay. Isku day inaad isticmaashid gaadiidka dadweynaha.

Adigoo sakhraansan inaad baabuur kaxaysaa waa danbi culus. Waxa dhici karta in lagaa qaado batantaha (liisanka) wadidda baabuurta, in ganaax weyn lagu saaro, ama inaad xabsi gashid.



Ka fikir xeerarka nabadgelyada waddooyinka ee ad ku dhaqantay hadda ka hor iyo waxyaabahaad u baahnaan kartid inaad isbeddel ku samaysid si aad ugu nabadgashid Maraykanka.

- Nabadgelyada waddooyinka sideed u dhaqangelisay hadda ka hor?
- Sideed tarafigga dhexdiisa ugu badbaadday?
- Maxaad u malaynaysaa inay nabadgelyada waddooyinka Maraykanku kaga duwanaan karto middaad u baratay? Maxaa yeelay?



Haddii aanad garanayn meeshaad u socotid, joogso oo tilmaan weydiiso. Qof kale ku tababar qaado oo weydii tilmaamaha. Su'aalahan ayaad weydiin kartaa:

- Halkeen suuqa u maraa?
- Meesha ugu dhow ee baska laga raaca waa halkee?
- Baskani suuqa ma tagaa?
- Meelahan dhodhow xafiiska boostu ma ku yaal?

Su'aalo ad adigu leedahay la imoow!

LAHAANSHAHA IYO WADIDDA BAABUURKA

Waxa dhici karta inaad rabtid inaad baabuur waddid isla markaad soo gashid Maraykanka, laakiin lahaanshaha iyo wadidda baabuurku waxay leeyihiin mas'uuliyado iyo kharash farabadan.



Isku day inaad raacdid gaadiidka

dadweynaha illaa ad shaqo ka heshid oo ad awood u yeelatid kharashka baabuurka.

Henri sannado badan ayuu baabur waday intaanu iman Maraykanka. Dhowr bilood markuu joogay ayuu iibsaday baabuur duug ah. Maalin maalmaha ka mid ah waxa baabuurkiisa gadaal kaga dhacay baabur kale. Henri khaladka muu lahayn, laakiin dhibaatooyin badan ayaan la so darsay madaama u watay baabuurka batante iyo caymis la'aan. Muxuu Henri u baahnaa inuu ka xasuusto baabuur ku wadidda Maraykanka gudahiisa?

LIISANKA (BATANTAHA) WADIDDA BAABUURKA

Markaad diyaar tahay inaad baabuur waddid, waxa ugu horreeya ee ad u baahantahay waa liisanka wadidda baabuurta oo maxalli ah. Intaanad liisanka qaadan, waa inaad ku najaxdaa imtixaanka aragtida indhaha, imtixaan qoraal ah, iyo imtixaan baabuur wadidda ah. Haddii lagu qabto adigoo baabuur wada bilaa liisan sharciyaysan, waxaad muutaysan kartaa inaad bixisid ganaax lacag ah, iyo waxa dhici karta in mustaqbalka liisan helistu kugu adkaato. Haddii ad sharciga jebisid, waxa dhici karta in lagaa qaado liisanka. Matalan, haddii lagugu soo xiro wadid baabuur adigoo sakhraansan, waxa dhici karta in lagaa qaado liisanka. Waxa kaloo dhici karta inaad bixisid ganaax culus, amaba xabsi muddo ku jirtid.



KHARASHKA LAHAANSHAHA BAABUURKA

Lahaansha baabuurka kharash badan ayaa la socda. Ugu horrayn, gobolada intooda badan waxay kaa rabaan inaad caymis baabuur gadatid. Caymiska baabuurku waa lacag go'an oo ad siinaysid shirkad caymis ah bil walba. Haddii ad shil gashid oo u qof ku dhawaacmo ama waxyeello soo gaarto hanti, shirkadda caymiska ayaa kharashka caafimaadka iyo samaynta baabuurkaba bixinaysa. Caymisku waa ku qaali qofka aan taariikh baabuur wadid ku lahayn Maraykanka. Nooca baabuurkaad wadatid, da'daada, iyo inta qof ee baabuurka wadi doontaa intuba saamayn ayay ku yeelanayaan qiimaha caymiska. Waxa jira kharashyo kale markaad baabuur ad leedahay wadatid—bansiinka, meel la dhigo, cashuur, diiwaangelinta baabuurka, iyo dacaytirka iyo samaynta wixii jaba.



Ka firkir farqiqa u dhexeyaa isticmaalka gaadiidka dadweynaha iyo lahaanshaha baabuurka Maraykanka gudihisa.

- Maraykanka gudihisa, maxay yihiin faa'iidooyinka isticmaalka gaadiidka dadweynuhu meeshii baabuur laga yeelan lahaa?
- Xuquuqda iyo mas'uuliyadaha lahaanshaha iyo wadidda baabuurka Maraykanka gudihisu sidee bay uga duwan yihiin kuwii dalkaagii hooyo ama waddankaagi magangelyo?

Yin Nyo waxay khaati ka taagantahay waqtiga dheer ee ay ku qaadato baska ay u raacdo shaqada, kagana soo noqoto. Waxay rabtaa inay gadato baabuur. Sidaasi ma fikrad ficanbaa? Maxaaad Yin Nyo uga sheegi lahayd raacidda gaadiidka dadwaynaha iyo lahaanshaha baabuur Maraykanka gudihisa?



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Kuwee ayaa ah nooc gaadiid dadweyne?
 - a. Basaska magaalada.
 - b. Sabweeyada (Subways).
 - c. Baabuurka saaxiibkaaga.
 - d. Tareennada shaqada loo raaco.
 - e. a, b, iyo d.
2. Maraykanka gudahiisa, waxaad u baahantahay inaad haysatid liisan si ad baabuur ugu waddid.
 - a. Run.
 - b. Been.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 223aad.

3. Adigoo sakhraansan oo baabur wada haddii lagu qabto, qodobbadan hoose kuwee baa dhici kara?
 - a. Liisanka ayaa lagaa qaadi in muddo ah.
 - b. Ganaax weyn ayaad bixin.
 - c. Xabsi ayaad muddo geli.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan.
4. Gobolada intooda badan waa qasab in gaadhigu caymis ku jiro.
 - a. Run.
 - b. Been.
5. Kharashka lahaanshaha baabuur kuwee baa ka mid ah?
 - a. Caymiska baabuurta.
 - b. Diiwaangalinta baabuurta.
 - c. Bansiin.
 - d. Dayactirka iyo samaynta wixii ka jaba baabuurka.
 - e. Dhammaan inta kor ku xusan.

8



Cutubka Siddeedaad DARYEELKA CAAFIMAADKA

Hannaanka daryeelka caafimaadka Maraykanka in la fahmaa way adagtahay, inta badanna waa qaali. Waxa dhici karta inta hore fahamka daryeelka caafimaadka Maraykanku inuu adagyahay, laakiin samir iyo waqti ka bacdi waxaad bilaabi doontaa barashadiisa. Xasuusnoow inay shaqaalaha dib'udejintu su'aalahaaga kaaga jawaabi karaan oo ay ku siin karaan macluumaad dheeraad ah markaad u baahatid.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Baadhitaakaaga caafimaad ee ugu horreeya
- » Bixiyeyaasha adeegga daryeelka caafimaadka
- » Bixinta kharashka daryeelka caafimaadka
- » Aragtida Maraykanka ee ku aaddan caafimaadka

Daryeelka caafimaad ee Maraykanku wuu murugsanyahay (complex), inta badanna waa qaali.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>Dhakhtarka ilkaha</i>	dentist	<i>Dhakhtarka ilkuhu waa dhakhtarka daaweeya dhibaatooyinka ilkaha iyo afka.</i>
	doctor	
	doctor's office	
	health	
	hospital	
	immunization	
	insurance	
	interpreter	
	medicine	
	nurse	
	sick	

Dhakhtarka la so socodsii haddii mushkilado caafimaad kula soo darsaan si lagu daweeyo si degdeg ah.

Wakaalado kala duwan ayaa daryeel caafimaad bixiya Maraykanka gudahiisa.

BAADHITAANKA CAAFIMAAD EE UGU HORREEYA

Waxa dhici karta in kulanka ugu horreeya ee ad la yeelatid daryeelka caafimaadka Maraykanku noqon doono baadhitaankaaga caafimaad ee kuugu horreeya. Hay'addaada dib'udejinta ayaa ku diyaarin doonta baadhitaankan bilaashka ah isla markaad Maraykanka soo gashid. Baadhitaanku wuxuu tilmaami oo u daryeeli doonaa wixii caafimaad darro ah ee saamayn kara dib'udegiddaada, sida inaad shaqaysan kartid ama inay carruurtaadu iskuul tegi karaan oo kale. Waxa dhici karta in caruurtaada la tallaalo goorta baadhitaanka, waayo gebi ahaanba carruurta galaysa iskuullada dadweynuhu waa inay xaqiijiyaan in la soo tallaalay.



Waa muhiim inaad dhakhtarka u sheegtid wixii caafimad darro ah ama jirro u bahaan in si degdeg ah loo daaweeyo. Waxa dhici karta in dhowrka asbuuc ee ugu horreeya imaatinkaaga ka dib aanu diyaar kuu ahayn daryeel caafimaad oo balaaran, haddii aanu jirin baahi daryeel oo degdeg ah.



Ka fikir wixii xaalado caafimaad ah oo ad u baahnaan kartid inaad u sheegtid dhakhtarkaaga.

Baadhitaanka caafimaad ee ugu horreeya ka bacdi, waxaad u baahantahay inaad xal u heshid sidaan adiga iyo qoyskaagu u heli lahaydeen daryeel caafimaad markaad u baahataan. Shaqaalaha dib'udejintu way kaa caawin karaan ka fiirsashada noocyada lagu soo bandhigo.



Ka fikir sidaan ula tacaashay arrimaha caafimaadka hadda ka hor.

- Markaad dareentid xanuun, maxaad yeeli jirtey?
- Markaad isdhaawacdid, maxaad yeeli jirtey?
- Goormaad dhakhtar u tegi jirtey?

BIXIYEYAASHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Maraykanka waxa ka jira dhowr nooc oo ah bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka. Waa kuwan bixiyeyaasha ugu caansan:

HAY'ADDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA. Hay'adaha caafimaadka dadweynuhu waxay dadka ka tallaalaan cudurrada, waxa kalooy bixiyaan adeegyo kale oo ku aaddan ka hortagga cudurrada, oo ay ka mid yihiin baadhitaanka iyo daaweynta tiibbishada. Adeegyada ka hortagga cudurradu waa adeegyo ka hortaga cudurrada intaanay dhicin. Adeegyadani qaxootigu waa lacag la'aan ama qaali ma aha. Badanaa ballan in la dhigto ayaa loo baahanyahay. (Aqoon dheeraad ah oo ku saabsan caymiska caafimaadka ka baro cutubkan, qodobka cinwaankiisu yahay "Caymiska Caafimaadka.")



KILINIGYADA BULSHO IYO XARUUMAHA CAAFIMAADKA. Kuwani waxay bixiyaan adeegyada caafimaad ee asaasiga ah iyo tala-siin xagga caafimaadka ah. Qaarkood waxay bixiyaan adeegyada daryeelka ilkaha iyo baadhitaanka indhaha. Kilinigyada magaalada qaarkood waxay daaweeyaan dad gaar ah, sida dumarka uurka leh ama dadka qaba HIV/AIDS-ka. Waxa dhici karta inaad ballan u baahantahay ama aanad u baahnayn markaad isticmaalaysid kilinigyada bulsho iyo xaruumaha caafimaadka. Kilinigyadu way aqbalaan caymiska gaarka ah ama medhikayd (Medicaid) (caymis dawli ah oo loogu talagalay dadka danyarta ah), in badanina waxay qaataan lacag u dhiganta kartida qofku u leeyahay bixinta kharashka.



DHAKHAATIIRTA GAARKA AH. Waxa Maraykanka ka jira laba nooc oo dhakhaatiir ah: dhakhaatiir guud iyo kuwo takhasus leh. Dhakhaatiirta guud waxay bixiyaan adeegyo guud oo daryeelka caafimaadka ah, oo ay ka mid yihiin baadhitaannada sannadkiiba hal mar la sameeyo. Dhakhaatiirta takhasusku waxay ku hawl galaan mihnad ka mid ah caafimaadka. Dhakhaatiirta takhasuska qaarkood waxay daaweeyaan kooxo gaar ah, sida dumarka ama carruurta. Qaarkood waxay ku takhasusaan unug ka tirsan jirka, sida wadnaha, indhaha, ama cagaha. Waa inaad



Qolka birmadka degdegga waxa loo isticmaala mushkiladaha caafimaad ee halista ah.

ballan dhigataa si ad u aragtid dhakhtar gaar ah. Intaanad hor tegin dhakhtarka gaarka ah, badanaa waa inaad tustaa inaad iska bixin karaysid kharashka adeegga ama inaad caymis caafimaad haysatid.

ISBITAALLADA. Dhakhaatiirta iyo kilinigyadu waxay dadka dhibaatooyin gaar ah qaba u diraan isbitaallada si loo baadho am qalitaan loogu sameeyo. Daryeelka isbitaalku waa qaali, markaa waa inaad tustaa inaad iska bixin karaysid kharashka adeegga ama inaad caymis leedahay.



QOLALKA BIRMADKA DEGDEGGA AH.

Dhismayaasha/qalabka ku yaal isbitaallada dhexdooda ama meelo kale waxa loogu talagalay amuuraha caafimaadka ee degdegga ah ama halista ah. Ballan uma baahnid inaad aaddid qolka gurmada degdegga ah, laakiin waa meelo aad u mashquul ah oo waxa dhici karta inaad muddo dheer sugtid haddii aanay arrintaadu halis ahayn. Adeegga qolka gurmada degdegga ihi aad ayuu qaali u yahay. Haddii xaaladdaadu aanay ahayn degdeg, waa inaad ballan ka samaysataa kilinig ama xafiis dhakhtar.



Lubna waxay si xun u goosay farteeda iyadoo jarjaraysa khudaar. Ninkeedu, Emaad, wuxu u wacay taksi, waxaanay aadeen isbitaalka ugu dhow qoolkiisa gurmada degdegga ah. Lubna iyo Emaad ma garanayaan ku hadalka iyo qoridda Af-Ingiriisiga, waxaanay buuxin kari waayeen waraaqihii. Maxaad dareemi lahayd haddaad ahaan lahayd Lubna ama Emaad? Maxay u baahanyihiin inay Lubna iyo Emaad sameeyaan?

KILINIGYADA DARYEELKA DEGDEGGA AH.

Degaannada qaar waxa ka jira kilinigyada daryeelka degdegga ah. Kilinigyadan waxa loogu talagalay markay kula soo darsaan xanuun ama dhaawac u baahan in sid dhaqsi ah wax looga qabto, laakiin aan sidaa halis u ahayn oo aan u baahnayn inaad tegtid qolka gurmada degdegga ah. Ballan uma baahnid.





Ka fikir wixii ku soo maray ee ku saabsan daryeelka caafimaadka

- Sideed u go'aansatay sidaad wax yeeli lahayd?
- Ma haysatay daryeel caafimaad oo ad kala dooratid?
- La macaamilkaagii bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku ma samaa mise wuu xumaa?



*Iswaafaji xaaladda caafimaad ee bidixda ku qoran iyo waxaad u baahantahay inaad samaysid oo midigta ku tusan**

1. Xummad ayaa 3 maalmood ku haysa.



a. Adigu xal u hel

2. Hargab ayaa ku haya, sankuna wuu ku da'ayaa.

3. Waxaad 2 bilood dareemaysay walaac iyo murugo.



b. Dhakhtar u tag

4. Waxaad dareemaysaa daal.

5. Waxaad u malaynaysaa inaad laf ka jabtey.



6. Calooshaa aad kuu xanuunaysa.

c. Qolka gurmada degdegga ah ee isbitaalka tag

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaqa A, bogga 223aad.

Badanaa Ameerikaanku waxay isku halleeyaan barnaamijyada caymiska caafimaadka maadaama kharashka daryeelka caafimaadku u aad qaali u yahay.



*Ka firsó bal inay xaaladaha caafimaad ee ku yaal bogga 95 ay yihiin kuwo sahal ah (oo iskood u roonaan doona ama lagu daaweyn karo guriga), kuwo u baahnaankara daryeel caafimaad, ama kuwo halis ah. Xaalad kasta waafaji sawirka saxda ah.**

Haddii u ku hayo wax:

Waa inaad:

1. Sahal ah



a. Tagtaa qolka gurmada dedegga ee isbitaalka.

2. U baahan eegid caafimaad



b. Guriga ku daaweysaa.

3. Ku soo bood ah oo khatar ah




c. Dhakhtar u tagtaa.

Haddii aanad hubin, wac oo waano ka raadso qof ad saaxiib tihiin ama maamulaha kiiskaaga.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.



*Calaamadahani hoose waa kuwo caadiyan Maraykanka looga isticmaalo arrimaha caafimaadka. Waafaji calaamadda safka sare micnaha ay leedahay ee safka hoose ku qoran.**



a. Isbitaal

b. Farmasi

c. Sun

d. Qolka gurgmadka degdegga ah

e. Gargaarka kowaad

f. Khatar

BIXINTA KHARASHKA DARYEELKA CAAFIMAADKA



Ka fiiro su'aalahan hoose ee quseeya daryeelka caafimaadka dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Daryeelka caafimaadka sidee loo bixiyay?
- Qaali miyuu ahaa?

Maraykanka waa ku qaali daryeelka caafimaadku, inta badanna dad aad u yar ayaa iska bixin kara guud ahaan karashka ku baxa daryeelka caafimaadkooda. Barnaamijyada dawladdu waxay bixiyaan karashka daryeelka caafimaadka ee dadka danyarta ah ee u qalma barnaamijyadan. Dadka kale waxay isku halleeyaan caymis caafimaad si ay u bixiyaan kharshkooda caafimaad.

CAYMISKA CAAFIMAADKA

Dadka haysta caymiska caafimaadku waxay lacag joogta ah siiyaan shirkad caymis, shirkadduna waxay bixisaa kharashkooda daryeelka caafimaad. Shaqaaleeyaal badan ayaa shaqaalahooda siiya qorshayaal caymis, oo badanaa qayb ka bixiya kharashka bil kasta. Inta ka soo hartay kharashka caymiska waxa laga jaraa mushaharka shaqaalaha oo cashuurta ayaa la raaciyaa. Shaqaalaha cusub badanaa waa inay sugaan in mudoo ah intaanay xaq u yeelan caymiska caafimaadka. Waa suurtagal inaad gadatid caymis caafimaad oo kuu gaar ah, laakiin inta badan aad ayuu qaali u yahay.



* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaqa A, bogga 223aad.

Dadka aan hawlgab ahayn ee danyarta ah dawladdu waxay u fidisaa barnaajmiyo ka bixiya daryeelka caafimaad muddo gaaban.

Maraykanka gudihisa, waxaad xaq u leedahay adeeg turjubaan iyo in la xafido macluumaadkaaga.

Maria waxay ka shaqaysaa shaqo dhiman, waxaanay qaadataa \$9 saacaddiiba, waxaana la siiya qoyskeeda daryeel caafimaad. Ninkeeda, Luis, wuxuu haystaa shaqo buuxda oo manaafacaad leh. Maria waxa la siiyay shaqo buuxda oo saacaddiiba \$13 bixinaysa, laakiin manfac daryeel caafimaad ma helayso. Maxaad samayn lahayd haddaad Maria ahaan lahayd? Manfaca daryeelka caafimaadku muxuu muhiim u yahay?

GARGAARKA DAAWEYNTA QAXOOTIGA (REFUGEE MEDICAL ASSISTANCE [RMA]), MEDHIKAYD, IYO MEDHIKAYR

Qaxootigu waxay xaq u leeyihiin inay dalbadaan RMA ama Medhikayd. Labada barnaamijba waxay kharashka daryeelka caafimaadka ka bixiyaan dadka aan hawlgabka ahayn ee u dakhligoodu hooseeyo, laakiin waxa loogu talagalay kaliya in la isticmaalo inta dadkaasi ay ka helayaan caymis shaqadooda ama mid ay iyagu gateen. Qaxootiga da'doodu ka weyntahay 65 jir waxay xaq u leeyihiin Medhikayr oo ah barnaamij faderaali ah oo ka caawiya dadka da'doodu ka weyntahay 65 kharashka daaweynta.



*Iswaafaji nooca caymiska iyo dadka loogu talagalay inuu caawiyo. Tusmo: Jawaabta midkood laba nooc oo caymiska ah ayay waafaqsantahay.**

1. Medhikayr 2. Gargaarka Daaweynta Qaxootiga 3. Medhikayd



a. Noca caymiskan waxa loogu talo galay dadka aan hawlgabka ahayn ee danyarta ah oo aan caymis ka helin meeshay ka shaqeeyaan. Qaxootiga wuu u furanyahanyahay caymiskani.



b. Caymiska caafimaad ee nocan ihi wuxuu ka caawiyaa dadka da'doodu ka weyntahay 65 jir kharashkooda daaweynta. Qaxootiga wuu u furanyahay caymiskani.

XUQUUQDAADA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Maraykanka gudahiisa waxaad ku leedahay laba xuquuq oo muhiim ah oo quseeya daryeelka caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay adeegyada turjumaadda iyo xogtaada inaan bannaanka la soo dhigin. Xaqqo ad u leedahay dhowridda xogtaada micnaheedu waa in dhakhtarkaagu ama kalkaaliyaha caafimaadku arrimaha la xiriira caafimaadkaaga aanu qof kale u sheegi karin adigoo oggolaan.



ADEEGYADA TURJUMAADDA

Waa inaad awood u leedahay inaad fahamtid oo ad la hadashid dhakhtarkaaga si ad u heshid daaweynta kugu habboon. Haddii ad dareentid inaad u baahantahay caawimaad xagga luqadda ah si ad ula hadashid dhakhtarkaaga, waxaad xaq u leedahay turjubaan ku caawiya. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin karta xagga xiriirka isbitaalka ama kilinigga si laguugu diyaariyo turjubaan.

Paw Mu waxay leedahay ballan Dhakhtar. Waxoogaa Af-Ingiriisi ah ayay ku hadashaa, laakiin markii ugu dambaysay ee ay dhakhtarkeeda aragtay may fahmin waxyaabo badan oo u usheegay. Maxaad dareemi lahayd haddaad ahaan lahayd Paw Mu? Maxay u baahantahay inay Paw Mu samayso?



Qof kale carbis (baraaktis) la samee sidaad u codsan lahayd turjubaan. Waa kuwan labo siyaabood oo ad ku codsan karto:

- Af-Ingiriisi ma aqaan. Fadlan ma heli karaa turjubaan?
- Waxaan ku hadlaa Af-Soomaali. Waxaan rabaa inaan la hadlo qof afkaa yaqaan.

XOG DHOWRID

Sharcigu wuxuu dhigayaa in wax kasta oo adiga iyo bixiyaha daryeelkaaga caafimaad idin dhexmaraa u yahay xog gaar ah. Bixiyaha daryeelka caafimaadkaagu xaaladdaada caafimaad uma sheegi karo qoyskaaga, asxaabtaada, ama ciddaad u shaqaysid adigoo u fasixin.

Badanaa dadka Maraykanku waxay dhakhtar arkaan sannadkii hal mar si ay u ogaadaan wixii caafimaad darro ah intaanay halis noqon.

Fayodhawlka shakhsigu waxay muhiim u tahay shaqo helid iyo ku waarid.

Umma way uuraysan la'dahay. Ninkeedu ma rabo inay Umma dhakhtar kala hadasho arrintan. Oo haddii u dhakhtarku qof kale u sheegana? Xaaladdan oo kale haddii ay kula soo daristo maxaad yeeli lahayd? Umma iyo ninkeedu maxaa muhiim u ah oo ay u baahanyihiin inay wax ka ogaadaan dhakhaatiirta Maraykanka?






Qof kale kala sheekayso sababta ay muhiim u tahay dhakhtarkaagu inuu dhowro xogtaada caafimaad.



ARAGTIDA MARAYKANKA EE KU AADDAN CAAFIMAADKA



Goobaabinta hoose dhexdooda sawir ahaan ku tus dabecadahaad u malaynaysid inay yihiin kuwo u roon caafimaadka.



Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin in cudurro badan lagaga hortegi karo nadaafad, nafaqo hagaagsan, jimicsi, iyo hurdo fiican. Waxay xirtaan dhar xilliga qaboobaha dhaxanta ka celiya, xilliga kulaylahana neecaw siiya. Badankoodu sannadkiiba hal mar ayay dhakhtar ama kilinig baadhitaan u tagaan, si ay u ogaadaan wixii caafimaad darro ah intaanay halis noqon. Waxay u tagaan dhakhtarka ilkaha sannadkiiba laba goor si loogu nadiifiyo ilkaha iyo si ay uga hortagaan wixii ilkahooda halis ku ah.



Waxa dhici karta in dhakhtarrada Maraykanku aanay garanayn hababka waddamada kale jirrooyinka loogu daaweeyo. Waxaad u baahnaan kartaa inaad dhakhtarkaaga u sharaxdid daaweynta adiga iyo carruurtaadu ad hadda ka hor hesheen, iyo inaad faahfaahisid habka daaweynta iyo dawooyinka laga isticmaalo waddankaaga. Waa muhiim inaad ogaataa in dhakhaatiirta iyo kalkaaliyeyaasha caafimaad ee Maraykanku ay rumaysnaan karaan in dawooyinka iyo habka daaweynta waddamada kale aanay ahayn kuwo ammaan ah. Waxa dhici karta in qaar ka mid ah hababka iyo dawooyinku mamnuuc ka yihiin Maraykanka.

Soe Naing caloosha ayaa xanuunta, waxaanu isticmaalaa geedo dalkiisa laga keenay. Muddo ka bacdi markuu Soe Naing raysan waayay ayuu Dhakhtarad u tagay. Dhakhtaraddu way yaabtay marku Soe Naing u sheegay geeduhuu isticmaalayay. Waxay u sheegtay inuu joojiyo isticmaalka geedaha. Maxay dhakhtaraddu ugu sheegtay inuu joojiyo isticmaalka geedaha? Haddaad ahaan lahayd Soe Naing, ma yeeli lahayd talada dhakhtaradda, oo ma joojin lahayd isticmaalka geedaha? Soe Naing muxuu u baahanyahay inuu ka xasuusto arrimaha la xidhiidha daawo-dhaqameedka loo isticmaalo daryeel caafimaad Maraykanka gudhiisa?

NADAAFADDA IYO FAYADHOWRKA SHAQSI

Dadka Maraykanka badankoodu maalin walba way qubeystaan, ilkahooda waxay cadayaan laba jeer, shaambuu ayay ku dhaqaan timahooda inta badan, caraf ayay marsadaan maalintii hal jeer, oo dharkooda mar kasta way dhaqaan. Dukaamadu waxay gadaan alaabooyin badan oo kala nooc ah oo dadka ka caawiya inaanay u ekaan wasakh ama lahaanin ur iyo dhidid. Fayadhowrka shaqsigu si gaar ah ayuu muhiim ugu yahay helidda iyo ku waaridda shaqada.



Horjoogiihiisa cusub wuxuu Mathieu u sheegay inuu u baahanyahay in maalin walba qubaysto oo u walxaha carfana marsado. Maxaad dareemi lahayd, haddaad Mathieu ahaan lahayd? Sidee ayuu Mathieu dhacdadan isaga ilaalin lahaa?

NAFAQO HAGAAGSAN

Nafaqo hagaagsan micnaheedu waa cunidda cunto ku habboon taageeridda jir caafimaad qaba. Waxa kale oo u micnaheedu yahay waa yareynta cuntada keeni karta caafimaad darro iyo jirro halis ah haddii mar walba si xad dhaaf ah loo cuno. Cunnooyinka waxa ka mid ah kuwa ay ku badanyihiin sonkortu, cusbadu ama baruurtu (sida cuntada la shiilay, macmacaanka, iyo soodaha).



*Goobaabi sawirka tilmaamaya cuntada u roon caafimaadka. Istallaab saar cuntada aan u rooneyn caafimaadka.**



a. Nacnac



b. Digaag



c. Miro



d. bataati (baradho) la shiilay



e. Caano



f. Saliid



g. Bariis



h. Cunto cusbo badan leh



i. Sooda (kooka Koolla oo kale)



j. Khudaar



k. Biyo

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.



Ma sheegi kartaa cunnooyin kale oo u roon caafimaadka ama kuwo aan u rooneyn? Qaarkood hoos ku sawir.

Cunto u roon caafimaadka

Cunto aan u rooneyn caafimaadka

Saxankan cuntada ihi waxuu ra'yi ka bixinayaa cuntada loo baahanyahay in la cuno si caafimaadka loo dhowro.



Xasuusnoow cunnidda cunto caafimaadka u roon oo dheelitiran ka sokow, waxa kaloo muhiim u ah maskax iyo jir caafimaad qaba jimicsi joogta ah, sida maalin kasta in la luugeeyo 20 daqiiqo.

Ameerikaanku waxay aaminsanyihiin in caafimaadka dhimirku muhiim u yahay sida ka jidhka oo kale.

DARYEELKA CAAFIMAADKA DHIMIRKA

Caafimaadka dhimirku wuxu tilmaamaya dareenkaaga, fikirkaaga iyo hab dhaqaankaaga markaad la tacaalaysid nolosha. Waxa kaluu tilmaamaya sidaad u maareysid isku-buuqidda (istireska).



Ka fikir siyaabaha caafimaadka dhimirka looga fulin jirey dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Dadku caafimaadka dhimirka ma ka hadli jireen?
- Yaa caafimaadka dhimirka lagala hadli jirey?
- Dadku siday u maareyn jireen isku-buuqa?
- Maxa ka mid ah siyaabaha caadiga ah ee loo maareyn jirey isku-buuqa?

Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin in muhiimadda caafimaadka dhimirku la mid yahay kan jirka, iyo in loo adeegsado daaweyntiisa qof ku takhasusay caafimaadka dhimirka marka loo baahdo u ka mid yahay daryeel caafimaad oo wanaagsan. Qaxootiga iyo dadka kale ee ku cusub Maraykanku waa inay ka taxaddaraan caafimaadka dhimirkooda, waayo badanaaba waxay soo mareen xaalado aad u adag, waxayna inta badan la kulmaan isku-buuqid aad u baahsan iyagoo ku guda jira la qabisga nolosha Maraykanka. Haddii ad abid dareentid inay noloshu aad u adagtahay oo ad maareyn kari weydid hawl maalmeedka, waa inaad raadsataa adeegyada daryeelka caafimaadka dhimirka. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin karta helidda adeegyadan, oo xogtaadana dhowri doonta.

Lix bilood markay Namina Joogtay Ameerika waxay bilowday inay u xiisto dalkii. Way ogtahay inay caadi tahay, laakiin muddo ka bacdi waxay bilowday inay in badan murugooto oo ay guriga ka baxdo kaliya markay shaqo tagayso. Maxay Namina u baahantahay inay samayso? Maxay muhiim u tahay inay Namina fiiro gaar ah siiso dareenkeeda?



Ka fikir waxaad samayn lahayd markaad dareentid walaac iyo isku-buuqid.

- Sideed u maareysaa?
- Maxaa kalood samayn kari lahayd?
- Yaad la hadli lahayd?



Qof kale la jil hab ad qof u weydiisan lahayd caawimo

- Qofka 1aad: Haye! Iska warran?
- Qofka 2aad: Beryahan xaalkaygu ma fiicna?
- Qofka 1aad: Maxaa dhacay?
- Qofka 2aad: Waxbaan iska fahmi la'ahay?
- Qofka 1aad: Maxaad ula jeeddaa?
- Qofka 2aad: Aad uma faraxasani. Mana garanayo waxaan ka yeeli lahaa? Ma i caawin kartaa?

Ka fikir siyaabo kale oo caawimo ad ku weydiisatid adigoo qofka kale la jilaya.

Haddii ay kugu adkaato inaad dareenkaaga muujisid, firi Lifaafa C: Wajiyada Dareenka ee ku yaal bogga 229 si ad hogotusaaleyn uga heshid.



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Baadhintaan caafimaad ma mari doontaa ka bacdi markaad Maraykanka soo gashid?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
2. Maxaa ka mid ah siyaabaha ay dadka Maraykanku iskaga bixiyaan kharashka daryeelka caafimaadka?
 - a. Caymis caafimaad (inta badan laga siiyo meeshay ka shaqeeyaan).
 - b. Barnaamijyo dawladeed oo kharasha daryeelka caafimaad qaarkiis dadka danyarta ah ka bixiya mudda kooban keliya.
 - c. Lacagtay shaqaysteen.
 - d. Barnaamijyo dawladeed oo kharashka caafimaadka oo dhan ka bixiya dadkoo dhan.
 - e. a, b, iyo c.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.

3. Qofku waan inuu qolka gurmada degdegga ah tagaa keliya markuu la kulmo arrimo halis ku ah caafimaadkiisa.
 - a. Run.
 - b. Been.
4. Arrimahan hoos ku qoran kuwee bay dadka Maraykanku aaminsanyihiin inay ka hortagaan jirrada?
 - a. Jimicsi joogta ah.
 - b. Cunidda cunnooyin soonkor iyo cusbo badan leh.
 - c. Hurdo fican oo habeenkii la seexo.
 - d. Nadaafadda oo la dhowro.
 - e. a, c, iyo d.
5. Haddii ad dhakhtarkaaga wax u sheegtid, waxa laga raba dhakhtarkaaga inuu u sheego qoyskaaga, asxaabtaada, iyo dadkaad u shaqaysid.
 - a. Waa run.
 - b. Waa been.

9



Cutubka Sagaalaad MAAREYNTA LACAGTA

Heerka maciishadda (kharashka nolosha) Maraykanku aad ayay u sarreysaa. Sidaa darteed waa muhiim qaangaarka shaqaysan karaa inay si degdeg ah shaqo u helaan. Waa inaad ka taxaddartaa lacagtaadaa si aanad u gelin kharash aanad awood u lahayn. Shaqaalaha hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doona inaad qorshe lacageed samaysatid. Qorshuhu wuxuu kaa caawinayaa inaad ogaatid inta lacag ah ee ad haysatid, intaad kharashkaaga ku bixin lahayd, iyo intaad meel dhigan lahayd.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Qorsheynta kharashka
- » Meelaha laga adeegto
- » Cashuuraha, isticmaalka bangiga, iyo taariikh deymeedka

Miisaaniyad aad samaysataa waxay kaa caawinaysaa inta lacag ee ad haysatid, inta kharash ah ee ad bixin kartid, iyo intaad meel dhigan kartid.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>awoodid</i>	afford	<i>Lilith iyo Abdul waxay fiiriyaan akoonkooda bangiga si ay u ogaadaan inay awoodi karaan baabuur gadasho.</i>
	budget	
	change	
	cheap	
	coins	
	dollar	
	expensive	
	money	
	sales tax	
	wallet	
	How much does it cost?	

Bil kasta waxaad u bahantahay inaad bixisid kharashka noloshaada daruuriga ah iyo karashaadka kale.

Haddii ad higsanaysid yoolal fogfog, sida tacliinta ama iibsasho guri, waxaad u baahantahay inaad qadar lacag ah bishiiba dhigatid akoonkaaga keydka ee bangiga.

QORSHEYNTA KHARASHYADA

Bil kasta waxaad bixin doontaa kharashka asaaska u ah nolosha iyo kharashyo kale.



Maxay ahaayeen kharashyadaada joogtada ah markaad joogtay dalkaagi hooyo ama waddankaaga magangelyo?

Maraykanka gudahiisa kharashyada ugu waaweyn ee noloshu waa kuwan:

IJAARKA. Waxay u badantahay inuu kani yahay kharashkaaga ugu weyn bil walba.

Hani wuu ogaa in ijaarku qaali ku yahay Maraykanka, laakiin wuu yaabay markuu helay biilkiisa ugu horreeyay ee korontada. Maxaa kale oo kharash nololeed ah oo ku soo gudboon Hani?



YUTILITIGA. Waxa ka mid ah korontada, gaaska ama saliidda la shito, biyaha iyo qashin qaadidda. Kuwani qaarkood waxay ku jiri karaan ijaarkaaga, laakiin waxa dhici karta inaad mid ama ka badan si gaar ah u bixisid. Dhulka Maraykanka badankiisa, biilkaaga korontada, gaaska ama saliidda ee waqtiga qaboobaha iyo bilaha kuleylaha wuu badnaan doonaa markaad u baahantahay kuleyl dheeraad ah ama qaboojin dheeraad ah.



CUNTADA. Kharashkaaga cuntada waad yareyn kartaa haddaad raadisid dukaammada iyo alaabada qiimahoodu jaban yahay iyo haddaad gadatid shayga qiimihiisa la dhimay.



DARYEELKA CARRUURTA. (ka eeg Cutubka 12 macluumaad dheeraad ah ku saabsan daryeelka carruurta.)



GAADIIDKA. Kan waxa ku jira kharashka aadista shaqada iyo ka soo noqoshada, dukaammada, iyo ballamaha.



TILIFoonKA. Kharashka tilifoonkaaga waa inaad bil walba bixisaa. Xasuusnoow tilifoonnada dibadda loo diraa inay qaali noqon karaan. Dadka degaankaaga deggan wareyso si aad u baratid sida ugu fiican ee loo wici karo dibadaha.



DEYNTA SAFARKA. Qiyaastii 6 bilood ka bacdi markaad Maraykan soo gashid, waxaad bilaabi doontaa bixinta bil walba deyntaada safarka illaa ad wada bixisid.



DARYEELKA CAAFIMAADKA. Markaad heshid shaqo buuxda, waxa dhici karta in lagu siiyo nooc caymiska caafiimaadka ah. Hase yeeshee, shaqooyinka hooseeyaa bilaha ugu horreeya ma bixiyaan caymiska. Waxaad u baahnaan kartaa inaad gadatid caymis kuu gaar ah.



MEEL DHIGASHO LACAG IYO GARGAARKA EHELADAADA DIBEDDA JOOGTA. Haddii ad leedahay yool fog sida waxbarasho ama guri gadasho, waxaad bil walba qadar lacag ah ku shubi kartaa akoonkaaga keydka bangiga. Waxa kalood lacag u diri kartaa eheladaada weli joogta dalkaagi hooyo. Markaad shaqo heshid ee ad ogaatid kharashkaagu intuu yahay bil walba, waxaad go'aamin kartaa bil walba intaad meel dhigan lahayd ama intaad u diri lahay dalkaagii hooyo.



Goobaabi kharashyada ugu waaweyn ee ku taxan bogga 110 iyo bogga 111 ee ad hadda ka hor bixisay.



Waa kuwan tusaalooyin ka mid ah kharashyada aad ka fiirsanaysid markaad qorshe lacageed ku samaysanaysid Maraykanka gudihisa.

Nooca Kharashka	Faahfaahin iyo xusid	Kharashka Maraykanka gudihisa	
		1 Qof	Qoys 5 qofood ah
Ijaarka			
Yutilitiga (gaaska, korontada, IWM)	Kharashka biishiiba oo celcelis ah		
Cuntada	Cunto guriga lagu kariyay, barbardhig in bannanka wax laga cuno		
Daryeelka carruurta	Ilmihiiba kharashka ku baxa		
Gaadiidka	Gaadiidka dadweynaha, barbardhig lahaansho baabuur		
Tilifoon	Maxalli, gobolada fogfog, dibedda		
Deynta safarka	Waan in la bixiyaa 36 bilood gudahood		
Caymiska caafimaadka	Mid shaqadu bixiso, barbardhig inaad gadatid mid kuu gaar ah, barbardhig inaanad caymis lahayn		
Kharashyada kale	Lacag meel la dhigto iyo taakulada ehelada dibedda jooga, dharka, agabka guriga, alaabada musqulaha, alaabada iskuulka		

Kharashyo kale oo u baahan in laga fiirsado:

Nooca Kharashka	Faahfaahin iyo xusid	Kharashka Maraykanka gudahiisa	
		1 Qof	Qoys 5 qofood ah
Soo caweyn			
Balwad			
Telefishin/ internet/ moobaayl			
Hawlo kale			

Saw Tun labo shaqo ayuu ka shaqaynayay si uu u caawiyo saddexdiisa carruur, lacagna ugu diro eheladiisa joogta dibedda. Markasta daal ayuu dareemaa waqtiga kooban ee u haysto inuu ciyaalkiisa la qaato. Haddaad Saw Tun ahaan lahayd maxaa ka mid ah waxyaabahaad tixgelin siin lahayd inaad samayso? Yaad kala tashan lahayd caqabadahan?

Subbermaarketyadu waa dukaamada cuntatada noocyada ugu caansan ee meelwalba laga helo.



*Waxa jiri kara waxyaabo adiga ama xubno qoyskaaga ka tirsani rabtaan inaad ka gadataan Maraykanka gudahiisa. Qorshe dhaqaale awgeed, waa muhiim inaad kala saartaan waxay qoyskaagu rabaan iyo waxay u baahanyihiin. Waxa dhici karta in waxyaabaha la rabaa qaali yihiin, daruuri aanay ahayn, oo ay baajiyaan daboolidda baahida qoyskaaga. Goobaabi waxyaabaha qoyskaagu u baahnaan karo. Istallaab saar waxyaabaha aanu qoyskaagu baahi u qabin, laakiin ay rabi karaan.**



a. Shaqo



b. Dhar habboon



c. Baabuur



d. Haruur



e. Alaabooyinka fayodhowrka



f. Guri weyn



g. Abbaarman ama guri dhexdhexaad ah



h. Jimicsi joogto ah



i. Telefishin



j. Shahaado jaamacadeed



k. Khudaar



l. Biyo

*Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.

MEELAHA LAGA ADEEGTO

Dukaammada iyo suuqyada Maraykanku waxay iibiyaan alaabooyin iyo adeegyo kala duduwan.



Ka fikir meelahaad ka adeegan jirtey markaad jootay dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Xaggeed cuntada ka soo gadan jirtey?
- Xaggeed daawooyinka ka heli jirtey?
- Xaggeed ka gadan kari lahayd waxyaabaha kale ee gurigu u baahanyahay?
- Xaggeed ka heli jirtey dharka iyo kabaha?

Sumitra waxay baratay meelo badan oo kala duduwan oo laga adeegto xaafaddeeda. Waxay ogtahay inay qorshe dhaqaale leedahay, markaa waxay waqti badan ku qaadata inay dukaamo kala duduwan tagto is ay u hesho qiimaha ugu fican. Laakiin taasi waqti badan ayay qaadataa oo Sumitra markay shaqada bilowday waqti badan ma haysato oo ay dukaamo badan ku tagto. Maxaa ka mid ah waxyaabaha ay Sumitra samayn karto?

Waa kuwan meelaha ugu caansan ee Maraykanka laga adeegto:

SUBBARMAARKETKA. Waa nooca ugu caansan ee cuntada lagu gado. Badankoodu waxa kalooy gadaan alaabooyinka wax lagu nadiifiyo, kuwa la isku qurxiyo, joornaallada, agabka guryaha, iyo daawooyinka caadiga ee aan u baahneyn qoraal dhakhtar.

DUKAAMMADA DAAWOYINKA. Dukaammadani waxay caadiyan leeyihin farmasi laga gadan karo daawooyinka dhakhtar u qoray. Badankooduna waxay gadaan daawooyinka, alaabooyinka la isku qurxiyo, joornaallada, iyo cunto. Cuntada ay gadaan badanaa waa qaali, noocyada laga helaana way koobanyihiin marka la barbardhigo kuwo lagu gado subbarmaarketka.

DUKAAMMADA WAAWEYN . Dukaammadani waxay gadaan dharka, kabaha, alaabta guriga, qalabka jikada (sida tallaagadda iyo foornada) iyo qalabka dharka lagu dhaqo, agabka guriga, iyo kuwo kale oo aan cunto ahayn.

DUKAAMMADA GURI HAGAAJINTA. Dukaammadan waxa lagu gadaa waxyaabaha lagu dayacatiro guriga, sida qalabka yaryar ee gacan-qabadka ah, qalabka jikada iyo kuwa dharka lagu dhaqo, alwaaxda, iyo dhirta.



Waa suurtagal inaad dukaamada ajaanibka ah ka heshid cunto ad aqoon u leedahay.

Cashuurta Maraykanku waxay bixisaa adeegyo badan oo dadkoo dhammi wada isticmaalaan.

DUKAAMMADA QIIMAHA JABAN.

Dukaammadani waxay alaabooyinka ku gadaan qiime ka jaban kuwa caadiyan lagaga gado dukaammada waaweyn. Dharka ka sokow, dukaammadani waxa kalooy gadaan qalabyada elektroonigga ah iyo cunto.



DUKAAMMADA LAGU GADO WIXII DUUG AH.

Dukaammadani waxay qiimo jaban ku gadaan alaab duug ah, sida alaabta guriga, maacuunta, iyo dharka. Caadi ayay dadka Maraykanka u tahay inay alaab duug ah gataan.



DUKAAMMADA CUNTADA EE AJAANIBKA.

Dukaammadan inta badan waxa iska leh oo maamula dad muhaajiriin ah ama dad qaxootinnimo ku yimid. Waxa dhici karta inaad cuntadii dalkaaga ad ka heshid dukaammada cuntada ajaanibka.



Fariba waxa ku adkaatay inay cuntada qaar oo ay ku karin jirtay wanddankeeda ka hesho subbarmaarketka Maraykanka. Xaggee bay ka heli kartaa waxyaabahan? Ayay Fariba Kaalmo weydiisataa?

GURIGA HORTIISA IYO GARAASHKA OO WAX LAGU GADO.

Meelahan oo kale, dadku waxay qiimo jaban ku gadaan waxyaabo guriga u yaallay. Waa meelaha ugu wanwanaagsan ee laga gato alaabta guriga iyo dharka. Gadidda noocan ah waxa lagu xayaysiiyaa wargeysyada iyo calaamado xaafadaha lagu dhajiyay.



Nolosheeda Maraykan ka hor, Basma may yeelan alaab guri oo duug ah. Waxay rabtaa inay beddesho alaabta duugga ah ee hay'adda dib'udejintu siisay, hase yeeshe ma haysato lacag ay ku iibsato wax cusub. Haddaad ahaan lahayd Basma, maxaad dareemi lahayd? Basma maxay samayn kartaa?

BIXINTA CASHUURAHA

Cashuuraha Maraykanku waxay maalgeliyaan adeegyo badan oo ay isticmaalaan dadka ku nooli, oo ay ku jiraan qaxootigu. Cashuuruhu waxay maalgeliyaan waxabarashada bulsho; dacaytirka waddooyinka; booliiska, dabdemiska, iyo gurmada degdegga ah; iyo barnaamijyada adeegga bulsho. Dadka deggan Maraykanku waxay bixiyaan saddex nooc oo cashuuraha ah:

Beter Htoo weligii cashuur muu bixin, mana uu fahansanayn sababta loo bixiyo. Dareen cadho leh ayay ku abuurtay inta lacag ee musharkiisa wiig walba laga goosto. Maxaad Beter Htoo uga sheegi kartaa cashuuraha?

CASHUURAHA DAKHLIGA. Qof kasta oo shaqaystaa wuxuu bixiyaa cashuurta dakhliga ee federaalka ah, dadka deggan gobolada qaarna waxa kalooy bixiyaan cashuurta dakhliga ee gobolka. Cashuuraha waxa mushaharkaaga ka jaraya qofka ama shirkadda ad u shaqaysid. Haddii u musharkaagu ka hooseeyo heer cayiman, dawladdu waxay ku soo celin doonta in ka mid lacagtii lagaa gooyay.



CASHUURAHA HANTIDA GAARKA AH. Dawladaha maxalliga ihi waxay cashuur ka qaadaan guryaha, dhulka iyo dhismayaasha ad iska leedahay. Kireeyuhu cashuur ayuu ka bixiyaa gurigaad ka ijaaratay. Meelaha qaarkood waxay cashuur ka qaadaan baabuurta.



CASHUURAHA IIBKA. Gobollada badankoodu waxay cashuur saaraan waxyaabaha ay dadku gataan. Cashuurta iibku waa dulsaar qimaha shayga. Gobollada qaar cashuur lama saaro waxyaabaha qaar, sida cuntada ama daawada. Waxyaabaha qaarkood, sida sigaarka iyo khamriga, cashuurtoodu way badantahay.



Ameerikaanku badanaaba lacagtooda waxay dhigtaan bangiga, waayo lacagtaasi caymis dawladeed ayay ku jirta. Taas micnaheedu waxa weeyi, lacagtu hadday bangiga ka lunto ama laga xado, dawladda Maraykanka ayaa gudaysa.



*Goobaabi waxyaabaha hoose kuwa ay suurtagal tahay in cashuuraha dawladdu maalgeliyaan. Istallaab saar kuwa aanay cashuuruhu maalgelin Maraykanka gudihiisa.**



a. Waxbarasho bulsho



b. Jidadka iyo haayweeyada



c. Dayactirka guriga



d. Baabuurka qofku gaarka u leeyahay



e. Adeegyada gurmada degdegga ah



f. Khamri ama sigaar



g. Saabuunaha dharka lagu dhaqo



h. Barnaamijyada adeegga bulshada



Xaggeed lacagtaada dhigan jirtey markaad joogtay dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo?

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 223aad.

ISTICMAALKA BANGIGA

Dadka Maraykanku inta badan waxay lacagtooda dhigtaan bangi ama urur deymeed (credit union), oo ay ka doorbidaan inay dhigtaan guriga. Lacagtaad bangiga dhigatid waxa dammaanad qaadda dawladda Maraykanka. Taa micnaheedu waa haddii ay lacagtu lunto ama laga xado bangiga, dawladda Maraykanka ayaa kuu gudi doonta lacagta. Bangiyadu waxay leeyihiin akoonyo kala duduwan oo loogu talagalay isticmaal kala duduwan. Waxa jira laba nooc oo akoon bangi oo ugu muhiimsan:

AKOONYADA KAYDKA (SAVING ACCOUNTS). Kuwani waa kuwa lagu kaydsado lacagta. Bangiyadu waxay akooniyadan kugu siiyaan lacag kor-saar ah madaama ad u oggolaatay inay lacagtaada kuu hayaan oo ay isticmaalaan.

AKOONYADA JEEKINKA (CHECKING ACCOUNTS). Kuwani waxa loo isticmaalaa bixinta kharashyada. Bangigu wuxuu ku siin doonaa jeegagga ad iskaga bixisid ijaarka iyo biilasha kale. Waa inaad ka taxaddartaa inaad qorin jeeg lacagtiisu ka badantahay inta ku jirta akoonkaaga jeekinka. Haddii ad yeeshid sidaa, bangigu lacag ganaax ayuu ku saaraya.

Jeeggu sidan ayuu u egyahay:

Your full name	Check number
Your street address	
Your city, state, zip code	
	Date
Pay to the order of _____	\$ _____
	Dollars
Name of bank	
For _____	
Bank and state routing numbers; your account number	



Ka firso su'aalahan:

- Waa maxay faa'iidooyinka ku jira inaad bangiga ku keydsatid lacagtaada?
- Maxay dhaqan caadi ah ugu tahay Maraykanka in lacagta la dhigto akoon bangi?
- Maxa loo aaminsanyahay in lacagta oo bangiga la dhigtaa ay ammaan tahay?

Markaad isticmaashid barnaamij deyn ah ama kaadhka deyn, waxaad amaahanaysaa lacag oo waxa, inta lagugu leeyahay, la dulsaarayaa faa'iido.

Si ad u yeelatid taariikh-deymeed fiican, waa inaad waqtigeeda ku bixisaa inta lagaa rabo.

Waddankeeda markay joogtay, Malyun waxay lacagteeda ku qarsan jirtay meel gurigeeda ka mid ah. Hadda iyadoo Ameerika joogta kuma kalsoona inay lacagteeda bangiga dhigato, inkastoo ay ogtahay in dadka Maraykanka badankoodu lacagtooda bangiga ku kaydsadaan. Malyun maxaad u sheegi lahayd? Bangigu muxuu ammaan ku yahay inaad dhigatid lacagtaada?

KAARKA DEYNTA IYO TAARIIKH DEYMEED



Dadka Maraykanku caadiyan waxay isticmaalaan kaararka deynta (credit cards) iyo qorshooyin deyn ah (credit plans) si ay u gataan waxyaabaha qaaliga ah sida baabuurta iyo alaabta guriga. Kaararka iyo qorshooyinku waxay fursad u siinayaan inay bixiyaan qadar yaroo lacag ah in muddo ah, meeshay ka bixin lahaayeen lacagtoo dhan isla markay gadanayaan shayga.


Markaad isticmaalaysid qorshe deymeed ama kaarka deynta, waxaad amaahanaysaa lacag. Bangiga ama kambaniga bixiya kaarka deyntu wuxuu lacagta u kugu leeyahay saaraa lacag kor-saar ah (interest), waana in aad lacagtaa bixisaa bil walba. Haddaad geftid bixinta lacagta hal mar, kambaniga kaarka deyntu wuxuu ku saari karaa lacag ganaax ah. Haddaad dhowr jeer geftid bixinta lacagta, waxa dhici karta inuu dukaanku kaala noqdo waxyaabahaad ka gadatay.

Haddii aad go'aansatid in aad qaadatid kaarka deynta, waa inaad si taxaddar leh u isticmaashaa. Aad ayay u sahlantahay inaad deynta ku talax tagtid adigoo isticmaalaya kaarka deynta. Intaadan wax ku gadan kaarka deynta, hubi inaad bixin kartid lacagta lagaa rabo bil walba iyo kharashyadaada kale.

Kambani kaarka deynta ah ayaa u fidiyay Myint tikidh diyaaradeed oo bilaash ah haddii u qaadashada kaarka deynta saxeexo, waanu sameeyay. Kaarkiisa cusub ayuu u isticmaalay inuu ku iibsado waxyaabo aanu awoodin. Bil ka bacdi wuxu helay biilkii. Myint muu ogayn in laga rabo inuu markiiba wada dhiibo kharashka ama bixiyo dulsaar badan. Myint sidee ayuu uga badbaadi lahaa kharashkan? Maxaad Myint uga sheegi lahayd kaadhka denyta?



Miisaanka hoose ku sawir ama ku qor wanaagga iyo xumaha lahaanshaha kaarka deyntu u leeyahay.



Wanaagga iyo xumaha, adiga iyo qof kale ka wada hadla.

TAARIIKH DEYMEED

Markay deyni kugu jirto ama ad isticmaashid kaarka deynta, waxaad samaysaneysaa taariikh deymeed. Hay'adaha madax bannaan ee warbixinta deyntu waxay keydiyaan warbixinta deynta oo sheegaysa taariikhdaada deymeed. Bangiyadu waxay eegaan warbixintan markaad codsatid deyn ama kaarka deynta.

TAARIIKH DEYMEED FIICAN. Haddii aad lacagta lagaa rabo bil walba waqtigeeda ku bixisid, taariikhdaada deymeed waxay noqonaysaa mid fiican, bangiyaduna waxay raalli ka ahaanaayaan inay lacag ku deymiyaan iyo inay ku siiyaan kaararka deynta.



Fursadda ugu horreysa ee ad haysatid inaad taariikh-deymeed fiican ku yeelatid Maraykanka waa adigoo bishiiba iska dhiiba kharashkii deynta socdaalkaaga.

TAARIIKH DEYMEED XUN. Haddaad geftid inaad bixisid lacagta lagaa rabay ama ad ku gadatid kaarka deynta wax aanad awood u lahayn inaad bixisid, waxaad yeelan doontaa taariikh deymeed xun. Taa micnaheedu waxa weeyi, waxa kugu adkaan doona inaad mustaqbalka deyn qaadatid.



Haddii aanad biilashaada bixin waqtigii lagaa rabay markaad joogtay dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo maxaa dhici jirey?

DEYNTA SAFARKA

Waa muhiim inaad bil walba lacag meel u dhigtid si ad iskaga bixisid deyntaada safarka. Waa fursadda kuugu horreysa inaad Maraykanka ku samaysatid taariikh deymeed fiican.

Xasuusnoow in gefidda bixinta lacagta lagaa rabo ay sabab u noqon karto inaad yeelatid taariikh deymeed xun. Haddii ad dhibaato kala kulantid bixinta lacagta lagaa rabo, si degdeg ah ugu sheeg xafiska dib'udejinta.

Your Monthly Refugee Travel Costs Statement	
Statement Date	September 1, 2007
Case Number	
Previous Balance	
Amount of Last Payment	
Date of Last Payment	September 20, 2007
New Balance	
Amount Past Due	

Jasmin waxay heshay biilkeedi ugu horreeyay ee deyntii safarka. Waxay ka shaqaysaa shaqo aan buuxin, waxaanay dareentay inaanay lacag ku filan oo ay iskaga bixiso haysan. Maxay muhiim u tahay inay Jasmin bixiso lacagta, xataa hadday tahay in yar?

BIXINTA BIILASHA

Wax kalood u baahantahay inaad waqtiga lagaa rabay ku bixisid biilashaada ijaarka iyo yutilitiga bil walba. Haddii ad dib uga dhacdid bixinta, waxaad jabinaysaa qodobbo ka mid ah heshiishkaad gashay iyo inaad la kulantid dhibaatooyin xagga sharciga ah. Dhibaatooyinkani waxay ka muuqan karaan warbixintaada deymeed.



Naw Gay iyo ninkeedu Af-Ingiriisi ma akhriyi karaan. Maalin maalmaha ka mid ah ayay heeleen baqshad boosta ka timid. Baqshadda waxa ku dhexjiray warqad ay erayo ku qoranyihiin. Bishii ku xigtay waxay heleen baqshad kale. Dhowr asbuuc ka dib korontadoodii ayaa shaqayn weday. Naw Gay waxay wacday maamulaha kiiskeeda oo markuu guriga yimid arkay waraaqaha. Naw Gay may bixin biilka korontada, waana laga jaray. Maxay Naw Gay iyo ninkeedu u baahanaayeen inay sameeyaan? Maxaad kula talin lahayd?



Dhammeystir weedhaha soo socda ee ku saabsan bixinta biilasha iyo kharashyada kale Maraykanka gudahiisa:

- Kharashyada an wax ka ogahay waa ...
- Biilasha igu cusub waa ...
- Waxaan dareen kalsooni ah oo weyn ka qabaa ...
- Waxyaabaha walbahaarka igu abuura waa ...



Qof kale kala sheekeyso arrimaha quseeya kharashyada Maraykanka gudahiisa.



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Kuwee baa ah adeeg guriga faa'iido u leh?
 - a. Korontada
 - b. Gaaska wax lagu karsado ama la shito
 - c. Qashin qaadidda
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan
2. Cuntada in laga gato dukaamada yaryar ayaa ka jaban meeshii laga gadan lahaa subbarmaarketka.
 - a. Run.
 - b. Been.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 223aad.

3. Kuwee ayaa ah cashuuraha dadka Maraykanku bixiyaan?
 - a. Cashuuraha dakhliga.
 - b. Cashuuraha hantida gaarka ah.
 - c. Cashuuraha iibka.
 - d. Dadka Maraykanku inay cashuuro bixiyaan maaha.
 - e. a, b, iyo c.
4. Dadk Maraykanka badankoodu xaggay dhigtaan lacagtooda?
 - a. Guriga, furaashka hoostiisa.
 - b. Bangiga ama urur deymeed (credit union).
 - c. Khasnad gurigooda taal.
 - d. Saaxiib ay aaminsanyihiin ama ehel.
5. Saaxiibkaa wuxuu mar dhow bilaabay shaqadiisi ugu horreysay, bil ka bacdina wuxu qaatay kaarka deynta. Wuxuu bilaabay inuu alaab guri oo cusub, dhar, iyo waxyaabo kale oo badan ku gato kaarka deynta. Mushahar ku filan ijaarkiisa iyo kharashka cuntada ayuu qaataa, laakiin ma qaato lacag ku filan inuu iskaga bixiyo waxyaabaha u kaarka deynta ku gatay oo dhan. Mar dhow iska bixin kari maayo lacagta bil kasta ay ka rabto shirkadda kaarka deyntu. Taariikhdiisa deyntu maxay noqon doontaa?
 - a. Taariikh deymeed xun.
 - b. Taariikh deymeed fiican.



Cutubka Tobnaad LA QABSIGA DHAQANKA IYO ISBEDDELKA DOORARKA

Sida dadka kale ee dalkoodii ka soo tagey dibna udegay waddan qalaad, waa suurtagal inaad dareentid werwer iyo walbahaar adigoo isku dayeya inaad la qabsatid waddankaaga cusub. Dareennadani waa caadi, muddo ka baccina way baabba'aan. Waxa dhici karta inay kugu qaadato 2 illaa 5 sano inaad si buuxda ula qabsatid nolosha degaankaaga cusub. La qabsigaagu wuu dhib yaraan doonaa haddii ad la jaanqaaddid kuwa ku caawinaya iyo haddii ad noqotid qof samir leh oo maskax furan oo si daacad ah ula dhaqma dadkaasi. Si degdeg ah oo ad Af-Ingiriisiga u barataana waxay kaa caawin kartaa la qabsigaaga. Inaad ku noolaatid meel dhaqan cusub leh ma dhib yara, laakiin waxay noqon kartaa khibrad fiican markaad baranaysid waxyaabo cusub oo ad kororsanaysid xirfado cusub.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » La qabsiga dhaqanka
- » Maareynta dhaqan-argaggaxa iyo iskubuuqa
- » Isbeddelka Doorarka qoyska dhexdiisa

U barashada nolosha waddan cusub waqti ayay qaadataa. La qabsashadaadu way dhib yaraanaysaa haddii ad u dhego nugushahay dadka ku caawinaya, iskuna daydo inaad Af-Ingiriisiga si dhaqso ah oo suurtagal ah u baratid.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
Daryeelka carruurta	child care	<i>Daryeelka carruurta waa xannaanaynta carruurta ay dad kale dhaleen oo lagu xannaaneeyo adeegga daryeel maalmeedka ah (daycare), ama ay hayso haweenay xannaanaysa ilmaha (nanny), ama qof ilaaliya carruurta (babysitter).</i>
	culture	
	culture shock	
	diversity	
	retirement	
	traditions	
	values	

Qaxooti badani waxay ku dhegaan dhaqankoodii iyo waxay aaminsanyihiin, iyagoo isla markaana barta habka cusub ee Maraykanka.

LA QABSIGA DHAQANKA

Madaama ad ku cusubtahay Maraykanka, waxaad u baahantahay inaad baratid caadooyinka iyo Maraykanku waxay qaddariyaan. Haseyeeshe, tan micnaheedu maaha inaad tuurtid dhaqankaagii oo dhan. Runtii, qaxooti badan ayaa iyagoo haysta dhaqankoodii hore iyo waxay qaddariyaan haddana barta hababka cusub ee Maraykanka. (Eeg Cutubka 2 si ad uga heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqanka Maraykanku wuxuu qaddariyo.) Waxa kalood fursad u heli kartaa inaad dhaqankaaga la qaybsatid xubnaha bulshada degaankaaga.




Sabah waxay dareentaa inay labo shaqsiyadood tahay. Markay shaqada joogto, inta badan way dhiibataa ra'yigeeda, raggana way la qabataa shaqada. Markay guriga joogto waa hooyo dhaqameed oo guri joogta ah. Cuntada ayay karisaa oo gurigay nadiifisaa, carruurta ayay daryeeshaa, waxaanay ninkeeda ku raacdaa ra'yigiisa. Hadaad Sabah ahaan lahayd, maxaad dareemi lahayd? Labadaada shaqsiyadood ma goni ayaad u kula saari lahayd mise waxaad isku dayi lahayd inaad isu dheellitirto labadooda?



Ka fikir waxyaabo ad qaddarisid oo muhiim kuu ah. Waxa ka mid noqon kara carruurtaada oo waxbarata, inaad ku noolaatid xaafad ammaan ah, inaad xor u tahay hadalka, ama inaad ku dhaqantid diintaada.

Goobaabinta hose ku qor ama sawir waxyaabo ad qaddarisid oo aad muhiim kuugu ah. Matalan, waxay ka koobnaan karaan qoyskaaga, caafimaadka, ama iskufilnaansho dhaqaale.




Waxyabaha Maraykanka gudihiisa lagu qaddariyaa way ka duwanaan karaan kuwaad adigu qaddarisid ee muhiimka kuu ah. Waxa muhiim kuu noqon doona inaad heshid isku dheelitirka labada geesood ee qaddarinta.

Myo Myint and Yin Nwe way isqabaan. Horraantii imaatinkooda Maraykan waxay aad iskugu taxallujiyeen inay samaystaan nolol la mid ah tii ay ku haysteen waddankooda. Laakin, Yin Nwe ayaa shaqo hor heshay, Myo Myint guri joog ayuu noqday oo wuxuu daryeela carruurta iyo guriga. Muddo ka dib, Myo Myint wuxu helay shaqo dhiman, waxaase ka lacag badnayd shaqada Yin Nwe. Maxaad dareemi lahayd haddii ad ku jiri lahayd xaaladdan?

Dhaqan-argaggax iyo iskubuuqiddo waa caadi. Qof kasta oo ku nool meel ku cusub wuu la kulmi karaa.

MARXALADHA LA QABSIGA DHAQANKA

Jaantuska hoose wuxuu tilmaamayaa marxaladaha dadka badankoodu ay ka soo maraan la qabsiga dhaqanka markay u guuraan ama booqdaan meel cusub.



<p>MARXALADDA TODDOBAGALKA (AROOS CUSUB OO KALE)</p> <p>Dareenno hiyikicin iyo farxadi ku jirto, markay wax walba cusub yihiin oo ay xiiso leeyihiin oo ay fiicanyihiin. Tani waxay dhacdaa isla marka la soo gaadho meel cusub.</p>	<p>MARXALADDA DHAQAN-ARGAGGAXA</p> <p>Dareenno werwer iyo wareer leh isagoo qofka cusub isku dayeya inuu kaalintiisa kaga soo baxo meel ka duwan tuu u bartay.</p>	<p>MARXALADDA LA QABSIGA</p> <p>Dareennadu way degayaan qofka cusubi markuu ka soo gudbo dhaqan-argaggaxa oo u bilaabo dareen nafis dheeraad ah iyo iskukalsooni u ku qabo meesha cusub.</p>	<p>MARXALADDA WAAYA-ARAGNIMADA</p> <p>Dareen nafis ku aaddan nololsha cusub iyo dhaqanka, inkastoo ay marmar weli jiraan waqtiyo adag.</p>
---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

Wax walba si fiican ayay Tara ugu bilaabmeen. Si dhaqsi ah ayay shaqo u heshay, ciyaalkeedu iskuulka way ka heleen, Af-Ingiriisigeedu wuu sii fiicnaaday siday ugula hadlaysay asxaabteeda cusub. Laakiin lix bilood ka dib markey Marykanka timid, Tara waxay u hiloowday wadankeedii hooyo. Wiilkeedu wuxuu bilaabay inuu iskuulka ku dhibaatoodo, waanay garan wayday siday u caawin lahayd. Sida lagu sheegay jaantuska marxaladaha la qabsiga dhaqanka, maxaa ku xigi doona? Illaa goormay ku qaadan doontaa inay Tara dareento roonaan? Maxaad sameyn lahayd haddii aad Tara ahaan lahayd? Ayaad la hadli lahayd?

MAAREYNTA DHAQAN-ARGAGGAXA IYO ISKUBUUQA

Markaad ku jirtid dhaqan-argaggaxa, waxaad inta badan dareemi doontaa inaad tahay qof aan miciin haysan oo ku walbahaarsan nolosha waddan aanad fahamsanayn. dhaqan-argaggaxu waa caadi. Waa wax soo mara qof kastoo ku nool meel cusub.

Haddii u dhaqan-argaggax kula soo darsay, waa kuwan dareennada ad lahaan kartid:

- Walbahaar, waayo waxaad ka soo bixi kari la'dahay waxyaabo fudud, sida adeegsi dukaan ama raacidda gaadiika dadweynaha.
- Daal maalinnimadii ama hurdo la'aan habeenkii.
- Careysan mar walba ama caro sanko ka saarantahay.
- Aan waxna xiiso u muujinayn ama murugeysan.
- Niyad-xun, sababtana aan garanayn.
- Cuntada aan xiiso u qabin.



Mary Baw caadiyan waa qof farxad iyo firfircooni leh. Laakiin, markay Maraykan 4 bilood jootay waxay noqotay qof aamusan oo murugaysan. Dhib ayay ku noqotay inay aroortii toosto oo ay qabato hawl maalmeedka, sida bixinta biilasha, adeegga suuqa iyo shaqada. Mary Baw waxay bilowday inay ka hadasho ku noqosho dalkeedii hooyo, waxaana ka lumay niyaddii ay u haysay cuntada. Mary Baw maxay u baahantahay inay samayso? Ayay la hadli lahayd? Haddii ad istaqaannaan Mary Baw, sideed u caawin lahayd?

Siyaabaha looga hortago dhaqan-argaggaxa waxa ka mid ah: la kulmida asxaabta, ciyaaridda isboortiga, ama la xidhiidhida urur- diimeedyada.



Ka fikir dareennadan.

- Kuwee ayaad dareentay hadda ka hor?
- Markaad sidaan dareentay, maxaa ku caawiyay in dareenkaagu roonaado?

Fikradahaaga la wadaaq qof kale. Qofka kale weydii ra'yiyo kale.

Dareennadani aad ayay caan u yihiin oo waa caadi, inta badanna dareennadani way baabba'aan muddo ka dib. Dadka ku cusub Maraykanka badankoodu way lahaayeen dareennadan, waxaanay noqdeen dad ad-adag oo karti dheeraad ah yeeshay siday ula tacaalayeen dareennadan.

Farxaddii ay Grace u haysay nolosheeda cusub ayaa libidhay markay arrimuhu adkaadeen oo iskubuuq meesha yimi. Niyadjab ayaa ku dhacay oo waxay bilowday inay ku cadho-baxdo qoyskeeda. Waxay arrintan kala hadashay maamulaha kiiskeeda, waxaanu Grace ka caawiyay inay hesho qof ku takhasusay talo bixinta oo ay la hadasho. Waxay talo-bixiyaha la kulantaa asbuuciiba hal mar. Kulamadoodu waqti ayay qaataan, laakiin Grace dareenkeedu wuu soo fiicnaanayaa. Waxay bilowdy inay kalsooni dheeraad ah ku dareento meelaha cusub ee ku xeeran. Wax walba way sii fiicnaanayaan! Grace maxay samaysay markay dareentay niyadjab? Maxaa ka mid ah waxyaabahay Grace u baahnayd inay samayso si ay ula qabsato dhaqanka? Maxay muhiim u ahayd inay Grace raadiso qof caawiya?

Marmarka qaar iskubuuqa ka yimaadda dhaqan-argaggaxu wuxuu horseedi karaa iskahorimaad qoys iyo in xataa lagu dagaallamo guriga dhexdiisa. Waa muhiim inaad garatid iskubuuqa ad dareemaysid, inaad heshid ilaha caawimada, iyo inaad yeelatid xirfado caafimaad qaba oo ad ku maareysid.

Garo wixii isku-buuq kuu keeni kara si ad u hanatid khibrado caafimad qaba oo ad kaga hor tagtid. Xasuusnowna labo shay: Ugu horrayn, dhaqan-argaggaxu waa caadi. Dad badan oo kale ayaa sidaadoo kale dareemaya. Tan labaad, wax walba way hagaagi doonaan!



Markaad dareentid murugo, maxaa ka mid ah waxyaabahaad samayn jirtey markaad joogtey dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

Dhaqammada iyo dadka kala duduwan waxay dhaqan-argaggaxa u maareeyaan siyaabo kala duduwan. Waxa dhici karta inaad durtaba yeelatay xirfado ad ku maareysid, sida:

- Cunto fiican cunid, jimicsi, iyo hurdo kugu filan.
- La kulan asxaab ama ka qaybgelid xaflad bulsho ama dhaqan.
- Samaysasho yoolal la higsado.
- In lala xiriiro ilaha diimaha.
- Ku kifaaxid hawl la jecelyahay ama dhageysi muusig la yaqaan.
- Ku biirid kooxo ay leeyihiin dad dalkaaga hooyo ka yimid ama kooxo jinsiyadeed.



Isbeddelka kaalinta u qofku ku leeyahay qoyska ayaa qayb weyn ka ah iskubuuqa ka dhasha dib'udejinta.

Ahmed wuxu la yaabay sida dhaqsaha ee u udareemay dhaqan-argaggaxa marku yimid Ameerika. Wuxu u xiisay eheladiis iyo asxaabtiis, wax kastaana waxay ku noqdeen wax ku cusub oo aanu hore u arag. Si fican uma seexanayn, daal ayuu dareemayay, caadiyanna ma faraxsanayn. Dhowr asbuuc ka dib, Ahmed wuxu la hadlay maamulaha kiiskiisa oo ka caawiyay Ahmed inuu helo talobixiye u la hadlo. Ahmed wuxu ka walbahaarsanaa inuu dareenkiisa kala hadlo qof aanu garanayn, laakiin muddo ka dib wuu ku kalsoonaaday talobixiyaha oo arrimuhu way soo ficnaadeen. Maxaa muhiim ka ah siduu Ahmed u maareeyay arrintan? Maxaa kale oo u Ahmed samayn kari lahaa si u isu caawiyo?



Sawir ama qor siyaabo caafimaad qaba oo ad kula tacaali kartid dhaqan-argaggaxa.



Qof kale kawada sheekeysta arrimahan.

Wiilka ay dhashay May Htoo, Boe Kyaw, wuxu isqoray dugsiga dhexe marki ugu horreysay ee ay yimaadeen. Boe Kyaw Af-Ingiriisiga si dhaqso ah ayuu u bartay marka hooyadii la barbar dhigo. Boe Kyaw wuxuu May Htoo u raaci jiray adeegga si uu uga caawiyo Af-Ingiriisiga, waxaanu May Htoo u tarjumi jiray farrimaha iskuulka looga soo diro. Maxaad u malaynaysaa sida u yahay dareenka May Htoo ee arrintan ku wajahan? Boe Kyaw se dareenkiisu muxuu yahay? Arrintani wax ma ka beddeli kartaa xiriirkooda? Sidee? Maxaad samayn lahayd haddii ay xaaladdani kula soo daristo?

ISBEDDELKA DOORARKA QOYSKA DHEXDIISA

Caqabadda ugu weyn ee hortaalla inta badan qaxootiga Maraykanka waa isbeddelka ku dhaca doorarka qoyska. Abbayaasha, hooyooyinka, kurayga, carruurta, iyo wayeelkuba waxay arki doonaan inay nolasha Maraykanku beddeli doonto xiriirka ka dhexeeya. Tani waxay ka mid tahay arrin caadi ah oo la xiriirta dib'udegidda, lakiin abuuri karta dhibaatooyin inta hore.



Bradeeb waxuu Ameerika la yimid gabadhiisa, ninkeeda iyo saddexdooda carruur ah. Bradeeb af barashadii ayaa ku adkaatay, markaa inta badan guriga kamuu bixi jirin. Bradeeb waxa dareen murugo ku abuuray carruurta u awowga u yahay oo diiddan inay afkoodii ku hadlaan ama waqti siiyaan si ay u dhagaystaan sheekooyin ku saabsan nolosha dalkoodii hooyo. Marmar xattaa edeb darro ayay u muujinayeen waalidkooda. Bradeeb maxaa la soo darsay? Doorka ay ku leeyihiin qoyskooda siduu isku beddelay? Haddaad ahaan lahayd Bradeeb, maxaad yeeli lahayd?

Ameerikaanku waxay aaminsanyihiin sinnaanta dheddig iyo lab, waxaanay qaddariyaan madax-bannaanida ragga iyo dumarkaba.



Shaxdan hoose, ku sawir ama ku qor dadka ad Maraykanka kula nolaan doontid qoys ahaan (adigu ad ka mid tahay). Ka bacdi ka fikir doorarka ay ku lahaayeen qoyska iyo kuwa ay hadda ku leeyihiin. Ka firso sida ay doorarka qoysku isku beddeli karaan markaad Maraykan ku nooshahay.

Xubinta Qoyska:	Qofka doorkiisu/ doorkeedu muxuu ahaa markaad joogteen dalkaagii hooyo?	Doorku muxuu ahaa markaad joogteen waddankaaga magangelyo?	Siduu doorku isku beddeli karaa Maraykanka gudihiisa?
<i>Tusaale: waalid, ilmo, walaal</i>	<i>Tusaale: arday, reerka u shaqeeya, walaal weyn</i>	<i>Tusaale: cunto kariye, turjubaan, walaal weyn</i>	<i>Tusaale: Ilmuhu shaquu haystaa, ninka ama naaqtu wuxuu/waxay dhigtaa/dhigataa fasallo ESL ah</i>
<i>Aniga</i>			

RAGGA IYO DUMARKA

Maraykanka gudahiisa, ragga iyo dumarka labaduba way la kulmi karaan dhibaato xagga la qabsiga doorarka ragga iyo dumarka. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin sinnaanta dhadigga iyo labka, oo waxay qaddariyaan madaxbannanida ragga iyo dumarkaba. Qoysas badan ayay ninka iyo xaaskiisuba shaqeeyaan, waxaanay kala qaybsadaan mus'uuliyadaha daryeelka carruurta.



Qoysaska qaar, xaaska ayaa ka mushahar badan ninkeeda. Qoysaska kalena, waxa shaqo haysata xaaska halka u ninkeedu shaqo la'yahay. Markaan oo kale, waxa ninka looga fadhiyaa inuu carruurta xannaaneeyo markaanay iskuul ku maqnayn. Qaxootiga qaarkood markay xaaladahan oo kale la soo dersaan, raggu waxay dareemi karaan inay waayeen doorki hoggaamiyennimo ee ay ku lahaayeen qoyska. Dumarka qaxootiga ah qaarkood waxay dareemi karaan iskubuuq markay bilaabaan inay qaadaan mas'uuliyado cusub, sida soo hoynta inta badan lacagta qoysku u baahanyahay. Muujin istaageerid, oo ay la socoto wada hadal furan oo daacad ah, ayaa abuurka kara isfaham dheeraad ah oo yarayn kara iskubuuqa dhexmara labada isqabta.

Adam iyo xaaskiisa Fatima labadooduba way shaqeeyaan. Laakiin shaqada Fatima ayaa ka lacag badan oo qoyska siisa caymiska caafimaadka. Marka xagaagu soo galo, Adam waqti ka yar intii hore ayuu shaqada joogaa si u carruurta guriga ugu xannaaneeyo. Haddaad Adam ahaan lahayd, maxaad dareemi lahayd? Sidee ayaad u maareyn lahayd xaaladdan? Haddaad dareemi lahayd niyadjab, maxaad yeeli lahayd?

FIKRADO KA YIMID QAXOOTIGA

“Yoolkaygu wuxuu ahaa inaan Maraykan imaado, markaa aad ayaan u farxay markaan soo gaaray halkan.”

“Marnaba ma dhaho ‘wax walba halkan way ku dhanyihiin, wax walba way dhib yaryihiin,’ maya. Noloshu sidaa uma dhibyara, laakin ugu yaraan waxaad dareemaysaa nabadgelyo. Adigoo nabad ah ayaad shaqo tegi kartaa oo ad ka soo noqon kartaa. Waa nicma weyn.”

“Markaan mala awaalay nolasha Maraykanka siday noqon doonto, waan niyadkacay... Laakiin, waxan hadda halkan ku noola in muddo ah oo waxaan bilaabay inaan la qabsado hannaanka.”

“Halkan, haddii an shaqo helno oo an ku hadalno afka, noloshu aad bay u dhib yaraan.”

“Waxan u malaynaynay inay nolosha Maraykanku dhaami doonto. Waxan u malaynaynay inaanay noo dhaamin annaga keliya, laakiin carruutayadana u dhaanto. Wax walba way iska fiicanyihiin illaa hadda.”

“Markaan joogney waddankii, wax walba waxaan ku qaban jirney koox ahaan, ma ogtahay. Koox ahaan baan wax u wada cuni jirney, u wada shaqayn jirney ...koox ahaan, iyo waxaan ku wada hadli jirney afka qabiilkayaga. Taasi waan u xiisay. Waxan u xiisay ilmaadeerraday, asxaabtaydii. Aniga, ku noolaashaha Maraykanku iima dhibyara, laakiin qoyskayga wuu u fiicanyahay.”

DADKA DHALLINYARTA AH

Dib'udegiddu aad ayay ugu adkaan kartaa dhallinyarada, siiba kurayga (da'doodu u dhaxayso 13 jir illaa 19 jir). Waa inay la qabsadaan nolosha dhaqanka cusub, isla markaana waxa laga rabaa inay u dhaqmaan sidii caadadu ahayd markii la joogey dalkii oo la dhex joogey bulshadii. Oo waa inay sidaan yeelaan iyagoo haddana la kulmay isbeddel ka yimid koritaankooda oo ay ka korayaan carruurnimo noqonayaanna dhallin qaangaartey.



Dib'udejintu aad ayay ugu adkaan kartaa qaangaarka, iyagoo la qabsanaya noloshan iyo dhaqankeeda ayaa isla markaana laga rabaa inay u dhaqmaan sidi caadada u ahayd waddankooda iyo bulshadooda.

Madaama ay inta badan Af-Ingiriisiga si dhaqsi ah u bartaan, marka la barbar dhigo waalidiintooda, dhallinyarada waxa la weydiin karaa inay waalidkooda turjubaan u noqdaan iyo inay dhabarka u ritaan mas'uuliyado kale. Inta badan waa inay shaqeeyaan oo ay isla markaana iskuul aadaan. Waalidkoodu waxay dareemi karaan inaanay carruurtooda caawin karin, madaama fahamkooda ku aaddan hannaanka iskuullada Maraykanku u kooban yahay.

Isku day inaad fahamto carruurtaadu arrimahay la tacaalayaan si ad u caawisid!



Kuraygu waxay inta badan dareemaan inaanay waalidkooda kala hadli karin iskubuuqa noloshooda. Marka iskubuuqyadani sii xoogeystaan, dhallinyarta qaar waxay dhexgalaan hawlo iyaga ama dad kale wax yeeli kara. Wax dhici karta inay bilaabaan iskuul ka baaqasho, ku biirid koox (gang), ama isticmaalid daroogo. Ku

dhiirrigali carruurtaada inay kaala hadlaan waxay samaynayaan iyo waxay dareemayaan. Waxa kalood ku dhiirrigalisaa inay ku biiraan hawlaha iskuulka, sida isboortiga, ama hawlaha bulshada oo ah meelaha ay waqtigooda kula qaadan karaan dad kale oo da'dooda ah. Tani waxay ka caawin kartaa inay si kasii fiican ula qabsadaan degaankooda cusub.

Wiilka uu dhalay Balaram oo lagu magacaabo Bhim wuxu dhigtaa dugsiga sare. Bhim wuxuu lahaa asxaab, iskuulkana wuu ku fiicnaa. Wuxuu u ekaa inuu faraxsanyahay. Laakiin, maalin maalmaha ka mid ah, Balaram dariskiisa Ameerikaanka ah, Colleen, ayaa u sheegtay inay aragtay Bhim oo la baashaalaya ciyaal had iyo jeer dhibaato geysta. Colleen waxay Balaram kula talisay inuu Bhim la hadlo inta aanu isaguna bilaabin inuu dhibaato dhexgalo. Haddaad ahaan lahayd Balaram, maxaad yeeli lahayd?

Qaxootiga waayeelka ihi waxay dareemaan go'doon iyo kelinnimo iyagoo dhibaato kala kulmaya barashada afka iyo dhaqan cusub.

Haddi adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan ad innaba dareentaan inaad la tacaali weydaan culaayska noloshiinna cusub ee Maraykanka, si dhaqsi ah talo u raadsada.

Carruurtaada ku dhiirrigeli inay kula sheekaystaan. Isfahamkiinna ayaa ficnaanaya!

WAAYEELKA

Isbeddelka doorarku waxa kale oo u ku adagyahay waayeelka, oo dareemi kara inay lumiyeen meeqaamkoodii hore ee ay ku lahaayeen qoyskooda iyo bulshada, sida noqoshada ilaha aqoonta iyo waayo aragnimada. Dhibaataada barashada luqad cusub, iyo dhaqan



cusub, iyo weliba dhibaatooyinka xagga jirka ayaa horseedi kara dareenno goninnimo iyo kali ahaan. Waayeelku waxay dareemi karaan in aanay bulshada u hayn meeqaam mudan xushmad.

Waayeelku waxa kale oo u la kulmi karaa caqabado dhaqaale. Wax dhici karta in qaxootiga da'da waaweyn oo filanaayay inay hawlgab noqdaan oo ay heelaan beenshinkoodii (pension) ay noqoto inay sii wadaan shaqada, gaar ahaan haddii ay da'doodu ka yartahay 65 jir. Qaxootiga da'doodu ka weyntahay 65 jir waxay arki doonaan inaanu manfaca hawlgabka ee Maraykanku ahayn waxay filayeen, inaanu manfaca laxaad li'idu daboolin kharashkooda daawooyinka, iyo inaanu qoyskoodu caawin karin siday u caawin jireen markay joogeen dalkooda hoyo.

Alaso waxay jirtaa 61 oo sannado badan ayay hawlgab ahayd markay ku soo biirtay carruurteeda waaweyn ee joogta Maraykanka. Alaso waxay ogtahay in qoyska wiilkeedu aanay lacag badan haysan. Waxay haystaan in ku filan keliya inay kharashkooda iskaga bixiyaan. Alaso waxay la yaabtay inaanay helayn mucaawino dawladeed. Dawladdu miyaanay ogayn inay hawlgab tahay? Haddaad ahaan lahayd Alaso maxaad dareemi lahayd? Maxaad yeeli lahayd?

Caqabadahan oo dhan waxay waayeelka u horseedi karaan iskubuuq iyo dhibaatooyin kale oo xagga dhimirka ah. Dhiirrigalinta waayeelku inay ka qaybgalaan hawlo dhaqdhaqaaq oo ay dhexgalaan dadka, matalan, galidda fasallo lagu barto Af-Ingiriisigu, wuxuu ka caawin karaa inay dareemaan firfircooni iyo ka qaybgal.

Waayeel badan oo qaxooti ah ayaa nolol farxad badan leh ku haysta Ameerika iyagoo yeeshay asxaab, kana qayb qaata hawlaha qoyska iyo bulshada.



Dib u eeg shaxda xubnaha qoyska ee ku yaal bogga 136. Macluumaadka laga wada hadlay adigoo ku salaynaya, ma tusi kartaa isbeddello kale ama ka duwan doorarka adiga ama xubnaha qoyskaagu ad la kulmi kartaan Maraykanka gudihisa? Dib u sax shaxda haddii loo baahdo.



Qoyskaagu sideey isku taageri karaan inta lagu gudajiro hawsha dib'udegidda?

RAADSASHO CAAWIMO

Haddii adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsani dareentaan inaad maareyn kari la'dihiin iskubuuqa noloshan cusub ee Maraykanka, si degdeg ah caawimo u raadi. Ka hadal arrimaha doorarka cusub ee qoyska markaad ku jirtid fasallada hanuuninta dhaqanka ama kala hadal shaqaalaha kiiskaaga ee Maraykanka. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta inaad heshid ilaha kaa caawin lahaa inaad yeelatid xirfado maareyn ah iyo inaad wanaajisid arrimaha guriga iskubuuqa ku dhaliya.



Ka fikir sidaad caawimo u weydiisan lahayd markaad dareentid wareer iyo walbahaar. Adigoo qof kale la jilaya, muuji dareennadaada oo qofka kale caawimo weydiiso.

- Qofka 1aad: Haye! Iska warran?
- Qofka 2aad: Maanta ma fiicni.
- Qofka 1aad: Maxaa dhacay?
- Qofka 2aad: Waan murugaysanahay.
- Qofka 1aad: Wan ka xumahay arrintaasi. Maxaa murugada keenay?
- Qofka 2aad: Waxaan u xiisay qoyskaygii.

Haddii ay kugu adkaato inaad dareenkaaga muujisid, firi Lifaafa C: Wajiyada Dareenka ee ku yaal bogga 229 si ad hogotusaaleyn uga heshid.



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi.

1. Waxay kugu qaadan kartaa 2 illaa 5 sano inaad si buuxda ula qabsatid degaankaaga cusub.
 - a. Run.
 - b. Been.
2. Siyaabaha hoose kuwee ayaa ka mid ah sida loo maareyn karo iskubuuqa iyo dhaqan-argaggaxa?
 - a. Qof saaxiib ah wax la cunid.
 - b. Ka qaygelid munaasibad diimeed.
 - c. Dhageysi muusig ad jeceshahay.
 - d. Inaad isku soo xirtid qolkaaga saddex maalmood.
 - e. Xulka a, b, iyo/ama c ayaa noqon kara hab caafimaad qaba oo lagu maareeyo iskubuuqa iyo dhaqan-argaggaxa.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 223.

3. Wada hadal furan oo daacad ah oo ka dhexeeya xubnaha qoysku wuxuu sahli karaa habka la qabsiga.
 - a. Run.
 - b. Been.
4. Haddii ad la kulantid dhaqan-argaggax, sidee buu dareenkaagu noqon karaa?
 - a. Cadho ama xanaaqi-og.
 - b. Murugo.
 - c. Farxad.
 - d. Xiise-darro cunno
 - e. Xulka a, b, iyo/ama d.
5. Yaa soo mari kara isbeddel doorarka qoyska Maraykanka gudihiisa?
 - a. Ragga iyo dumarka.
 - b. Kurayga.
 - c. Waayeelka.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan.



Cutubka Kow iyo Tobnaad XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA SHARCIGA MARAYKANKU DHIGAYO

Sharciyada Maraykanka waxa loogu talagalay inay ilaaliyaan xuquuqda dadkoo dhan, markaa waa inaad aqoon asaasi ah u lahaataa xuquuqda iyo waajibaadka sharcigu ku siinayo.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga
- » Sharciyada Maraykanka eed u baahantahay inaad ogaatid
- » Sharcigaad ku joogtid iyo Muwaaddininnimo

Sharciyada Maraykanka waxa loogu talagalay inay ilaaliyaan xuquuqda shacabka Maraykanka.






ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib’udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>Maxkamad</i>	court	
	judge	
	jury	
	law	
	law office	
	lawyer or attorney	
	legal clinic	
	responsibilities	
	rights	
	U.S. Constitution	

Qaxooti ahaan, waxaad leedahay xuquuq aasaasi ah ood kala simantahay qof kasta oo ku nool Maraykanka.

Ameerika gudihiisa haddaad sharciga jabisid waa lagu ciqaabi karaa, xataa haddii aanad aqoon u lahayn sharcigaad jabisey.



Xuquuqahaad lahayd maxay ahaayeen markaad joogtey dalkaagii hooyo ama waddankaagii magangelyo? Waajibaadkaagu maxay ahaayeen? Qof kale kala sheekeyso xuquuqahaas iyo waajibaadkaas qaarkood.

XUQUUQAHAAGA



Qaxooti ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha asaasiga ah ee u qof walba oo Maraykanka ku nooli leeyahay. Xuquuqahan waxa ka mid ah xorriyadda hadalka, xorriyadda diinta, iyo xorriyadda kulanka. Dadka Maraykanka si sharci ah ku deggan oo dhan, oo ay ku jiraan qaxootigu, waxay leeyihiin xuquuqo siman xagga shaqaaleynta, guryeynta, waxbarashada, iyo adeegyada dawladda.

TAKOOR KA ILAALIN

Sharciga Maraykanku wuxuu mamnuucayaa takoor ku salaysan midab, diin, ama jinsiyadda u ka soo jeedo qofku. Haddii lagu takooro ama xuquuqdaada lagu diido sababo la xiriira muuqaaga ama afkaad ku hadashid, waxaad xaq u leedahay inaad talaabo sharciya raadisid.

Patricia waxay diyaar u tahay inay u guurto abbaarman weyn, waxaanay la hadashay kireeyaha daar u dhow inay ka ijaarato abbaarman halkaa. Kireeyuhu wuxu Patricia u sheegay inaanay ku noolaan karin abbaarmankaa madaama aanu ka ijaarin qaxootiga. Patricia waxay wediisay sababta, waxaanu u sheegay inuu dhibaato kala kulmay goys qaxooti ah dhowr sannadood ka hor. Maxay arrintani u tahay takoor? Patricia maxaa u bannaan?

DAMBI-LAAWE ILLAA DAMGIGA LA CADDEEYO

Maraykanka gudahiisa haddii dambi lagugu eedeeyo, waxa lagu arkaa inaad dambi-laawe tahay illaa dambiga lagugu caddeeyo. Waxaad xaq u leedahay garyaqaan wakiil kaaga noqda maxkamadda. Haddii aanad awood u lahayn garyaqaan, maxkamadda ayaa kharashka garyaqaanka ku difaacaya bixin doonta.



Ka fikir xuquuqda iyo waajibaadka Maraykanka marka la barbar dhigo dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Halkey xuquuqda Maraykanka iyo kuwa dalkaagii hooyo iskaga egyihiin?
- Halkey ku kala duwanyihiin?
- Waajibaadku halkey iskaga egyihiin?
- Halkey ku kala duwanyihiin?

Qof kale kale sheekeyso isku ekaanshaha iyo kala duwanaanshaha.

WAAJIBAADKAAGA

Maraykanka gudahiisa, waa lagu ciqaabi haddii ad sharci jabisid, xataa haddii aanad aqoon u lahayn sharcigaad jabisay. Xadgudubyada qaar ciqaabtoodu wa mastaafuris lagugu celiyo dalkaagii hooyo. Sidaa darteed aad ayay muhiim u tahay inaad sharciga baratid oo ad u hoggaansanaatid.

Waxa Maraykanka ka jira saddex nooc oo sharci:

SHARCIYADA FEDARAALKA, sida sharciyada ka hortagga soo waaridda daroogada oo saameeya qof walba oo ku nool Maraykanka.

SHARCIYADA GOBOLKA oo ku xiran kolba gobalkuu ka hirgalayo. Matalan, gobollada qaar waxaad liisan baabur wadidda ah qaadan kartaa markaad 16 jirsatid, lakiin gobollada qaarkood waa inaad jirtaa 18.

SHARCIYADA MAXALLIGA AH waxay ka hirgalaan magaalo khaas ah ama degmo (county).



Dadka Ameerika ku nool looma oggola in ay khamri cabbaan ama gataan illaa ay ka gaadhaan da'da 21 jir.



Waxaad u baahantahay inaad fahamtid sharciyada Maraykanka waayo qaar badan ayaa ka duwanaan kara sharciyadii waddankaaga. Hoos waxa ku qoran waxyaabo muhiim ah oo ad u baahantahay inaad ka ogaatid sharciyada Maraykanka qaarkood.

Waa mamnuuc in carruur aan qof qaangaadh ihi la joogin meel lagaga tago.

Sharcigani wuxuu khuseeyaa:	Sharaxaadda sharciga:	Sharci la mida ah ma ka jiraa dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo?
 <p>Darrogada</p>	<p>Waa sharci darro in la gato, la gado, ama la isticmaalo darroogada qaar, sida heeroowin (heroin) iyo kookeyn (cocaine). Haddaad sharcigan jabisid, waxa dhici karta in dalka lagaa mastaafuriyo.</p>	
 <p>Sigaar cabbid</p>	<p>Meelaha qaarkood, in sigaar lagu cabbo fagaare dadweyne waa mamnuuc, sida tayaatirka ama xafiisyada iyo maqaaxiyo badan. Haddaad sigaar cabtid, weydii hay'addaada dib'udejinta sharciyada degaankaaga.</p>	
 <p>Khamri</p>	<p>Dadka Maraykanku khamri inay cabbaan ama ay gataan maaha sharci illaa ay 21 jirsadaan. Meelo badan ayay isla markaa mamnuuc ka tahay in khamriga lagu cabbo jidadka ama bannaanka, marka laga reebo meelaha qaar sida baararka ama maqaaxiyaha. Adigoo sakhraansan haddaad baabuur kaxeyso waxay kuu horseedi kartaa in lagaala noqodo liisankaaga iyo/ama in lagu xidho.</p>	

Sharcigani wuxuu khuseeyaa:	Sharaxaadda sharciga:	Sharci la mida ah ma ka jiraa dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo?
 <p data-bbox="215 682 394 716">Baabuur wadid</p>	<p data-bbox="488 489 971 915">Waa sharci darro inaad baabuur waddid adigoo haysan liisan Maraykan ah ama inaad baabuur waddid adigoo sakhraansan. Waxa kaloo jira in gobolada Maraykanka badankoodu leeyihiin sharci ku saabsan xirashada suumanka baabuurta ku jira. Waalidka waxa qasab ku ah inay carruurtooda u xiraan suunka oo ay ilmaha yaryar ku ridaan kuraasta ammaanka ah ee loogu talagalay. Sharciyo la mid ah ayaa qaangaarkana qabanaya.</p>	
 <p data-bbox="215 1157 394 1226">Dhowr xaas/nin guursasho</p>	<p data-bbox="488 968 971 1037">Guursashada hal xaas/nin wixii ka badan waa sharci darro.</p>	
 <p data-bbox="277 1478 331 1512">Jirdil</p>	<p data-bbox="488 1291 971 1482">Waa sharci darro inaad xaaskaaga/ninkaaga ama ilmahaaga u geysatid jirdil (inaad wax ku dhufatid ama tuntid). Waxa dhici karta in hay'adda ilaalada carruurta ilmaha la tumay ay guriga ka kaxayso.</p>	

Sharcigani wuxuu khuseeyaa:	Sharaxaadda sharciga:	Sharci la mida ah ma ka jiraa dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo?
 <p>Daryeelka Carruurta</p>	<p>Waa sharci darro in carruur meel lagaga tago iyadoo aanay ilaalinayn dad qaangaar ihi. In kastoo gobolada qaar sharcigoodu qeexayo da'ada ilmaha keligood guriga loogaga tegi karo, carrurta da'doodu qiyaastii tahay 12 jir iyo wixii ka yar ma ahan in keligood meel lagu dhaaf. Waddamada qaar carrurta waaweyn ayaa haya kuwa yaryar, laakiin Maraykanka gudihiisa waa inay dad qaangaarihi ilaaliyaan carruurta. Haddii ilmo keligii meel lagaga tago taasi waa daayacaad horseedi karta inay hay'adda ilaalada carruurta ilmaha ka kaxayso guriga.</p>	
<p>Faraxumeynta ilmaha</p>	<p>Galmo lala yeesho ilmaha (qof kastoo ka yar da'da 18 jir) waa sharci darro gobolada intooda badan. Faraxumeyn loo geysto ilmaha waxay horseedi kartaa xukun xabsi iyo mastaafuris.</p>	
 <p>Handadaad-shukaansi</p>	<p>Faallo meel-ka-dhac ah ama habdhaqan la xidhiidha shukaansi (handadaad-shukaansi) ee goob shaqo waa sharci darro.</p>	
 <p>Hub</p>	<p>Sharciyo haga gadashada, gadidda iyo isticmaalka hubka ayaa jira. Sharciyadani inta badan gobolka ayay ku salaysanyihiin oo way kala duduwanyihiin.</p>	

Sharcigani wuxuu khuseeyaa:	Sharaxaadda sharciga:	Sharci la mida ah ma ka jiraa dalkaaga hooyo ama waddankaaga magangelyo?
 <p>Ugaadhsiga iyo kalluumaysiga</p>	<p>Badanaa meel kasta waa ka mamnuuc in la ugaadhsado duurjoogta ama in mallaayga/kalluunka la dabto liisan la'aan.</p>	
 <p>Deegaanka iyo beeraha nasashada ee dabiiciga ah</p>	<p>Waxa jira sharciyo ilaaliya deegaanka iyo beeraha nasashada ee dabiiciga ah. Tusaale ahaan, beeraha qaarkood waa sharci darro in dab la shido ama xataa sigaar lagu cabbo. Beeraha lagu nastoo dhan, dadka u dibad baxaa waa inay qashinkooda hore u sii qaataan markay ka baxayaan.</p>	
 <p>Arxandarro loo geysto xayawaanka</p>	<p>Gobolada qaarkood waxay qaabaan sharciyo ka ilaalinaya in xayawaanka si xun loola dhaqmo. Weydii hay'addaada dib'udejinta sharciyada degaankaaga.</p>	



Qof kale Kala sheekeyso sharciyada Maraykanka ee bogaggii hore lagu qeexay.

- Sharciyadee kuu dhib yaraan kara inaad u hoggaansanaatid?
- Kuwee baa kugu adkaan kara?

Sannadka kuugu horreeya Ameerika, waxaad ku joogaysaa qaxootinnimo.

Intaad qaxootinnimada ku joogtid, uma safri kartid meel Ameerika ka baxsan adigoon fasax qaadan.

Ka firso dhacdooyinkan:

Othman intaanu u duulin Maraykanka ayuu boorsadiisa ku riday jaad. Markuu soo gaaray goobta soo gelidda, waxa Othman laga qaaday jaadkii, waxaana la geeyay qol su'aalo lagu weydiiyo. Othman wuu ogaa inay sharci darro ka tahay Maraykanka in daroogo la soo geliyo, laakiin muu ogeyn in jaadku yahay daroogo ka reebban Maraykanka. Othman muxuu u baahnaa inuu sameeyo intaanu u ambabixin Maraykanka?

Nway Meh waxay leedahay saddex carruur ah. Maadaama derisku ay mar walba ka ag dhowyihiin, waxay carruurteeda kaga tagtaa meesha baabuurta la dhigto ee u dhow abbaarmankeeda si ay ugu cayaaraan intay dukaanka ku maqantahay. Maalin maalmaha ka mid ah, waxay guriga ku soo noqotay iyadoo booliis u joogo meesha. Wuxuu Nway Meh weydiiyay sababta carruurta keligood looga tagay. Nway Meh way wareertay. Deris badan ayaa mesha ka ag dhow. Waa maxay dhibaataadu? Nway Meh maxay u baahantahay inay samayso si ay ugu hoggansanaato sharciyada Maraykanka ee ku saabsan daryeelka carruurta iyo dandarreynta?

Ebaid wuxuu beeraley ka soo gatay ri', waxaanu keenay abbaarmankiisa. Neefkii ayuu guriga daaradiisa ku gawracay, wuxuuna soo casuumay deriskiisa si ay ula qaybsadaan hilibka. Hase yeeshee waxa meesha yimid booliis oo u sheegay Ebaid inuu ri'da ka qaado meesha. Waa maxay dhibaataadu? Khaladka u Ebaid galay waa maxay?

Naw Baw waxay mallaay ku dabaysay haro ku ag taal gurigeeda. Sarkaal booliiska ah ayaa u sheegay inay tahay sharci darro inay mallaay meeshan ku dabato. Mallaaygii ay dabatay ayuu biyaha ku celiyay, waanu ganaaxay. Naw Baw waxay tiri mar danbe sidaa yeelimaayo, waxaanay sarkaalka ka codsatay inaanu ganaaxin, maadaama aanay ogeyn inaanay mallaay ka daban karin haroda. Maxaad u malaynaysaa inuu sarkaalka booliisku ugu jawaabay?

SHARCIGAAD KU JOOGTID IYO MUWAADDININNIMO

SHARCIGA QAXOOTINNIMO

Sannadka kuugu horreeya Maraykanka, waxaad leedahay sharci qaxootinnimo. Muddadan waa inaad mar kasta sidataa nuqul ah I-94-kaaga iyo kaarka EAD, si ad u xaqiijisid inaad sharci ku joogtid. Dukumeentiyada orijinaalka ah meel ammaan ah ku keydi. Qaxooti ahaan, waxyaabahan ayaad samayn kartaa:

- Inaad u safartid meel kastoo Maraykanka ka mid ah. (Xasuusnoow, haddaad guurtid, waxa lagaa rabaa inaad ogeysiisid laanta Adeegyada Muwaadininnimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services) toban maalmood gudahood markaad beddeshay cinwaankaaga.)
- Inaad gadatid hanti magguuraan ah.
- Inaad shaqaysatid.
- Inaad iskuul aaddid.
- Inaad soo casuuntid saygaaga/xaaskaaga iyo carruurtaada da'doodu ka yartahay 21 jir ee aan guursan. Haddii aad rabtid in saygaaga/xaaskaaga iyo carruurtaadu kuugu yimaadaan Maraykanka, hay'addaada dib'udejinta ayaa kuu sharrixi doonta waxaad u baahantahay inaad yeeshid.



Ka fikir xuquuqahan. Sideey uga duwanyihiin xuquuqahaad lahayd intaanad imaan Maraykanka? Goobaabi xuquuqaha kor ku taxan ee adiga iyo qoyskaaga muhiimadda ugu weyn u leh.

WAXYAABAHA AANAD SAMAYN KARIN INTAAD KU JOOGTID SHARCIGA QAXOOTINNIMO

Basaaboor Maraykan ah ma qaadan kartid, ma ku biiri kartid ciidanka, doorashooyinka kama codeyn kartid, ama kama shaqayn kartid shaqo dawladeed oo u baahan muwaadininnimo Maraykan ah. Inataad ku joogtid sharciga qaxootiga, kama bixi kartid Maraykanka adigooon fasax ka haysan laanta Adeegyada Muwaadininnimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services [USCIS]), oo ah hay'ad dawli ah oo u xilsaaran socdaalka. Haddii ay lagama maarmaan noqoto inaad dibedda u safartid, hay'addaada dib'udejinta ayaa ku sharrixi karta sidaad u codsan lahayd oggolaanshaha. Haddii ad ku noqotid dalka ad ka soo jeeddid intaad qaxootinnimo ku joogtey, waxa dhici karta inaan lagu oggolaan inaad Maraykanka dib u soo gashid.

Hal sano markaad Ameerika joogtid ka dib, waa inaad dalbataa sharci rasmi ah ood ku joogtid.

Kulankoodii ugu horreeyay ee dhexmaray Saw Eh Do iyo lataliyaha xagga shaqada, ayuu lataliyuhu weydiiyay Saw Eh Do shaqooyinku rabo inuu dalbado. Saw Eh Do wuxuu yiri wuxuu rabaa inuu noqdo askari sidii aabbihii iyo adeerradii ku ahaayeen dalkoodii hooyo. Lataliyaha shaqadu muxuu Saw Eh Do u sheegay? Saw Eh Do ma ku biiri karaa ciidanka Maraykanka? Maxaa yeelay? Weligii ma ku biiri karaa?

ADEEGGA CIIDAN

Nimanka da'doodu u dhexayso 18 illaa 25 jir ee Maraykanka deggan waa inay iska diiwaangeliyaan adeegga ciidan ee loo yaqaan Sallektif Sarfis (Selective Service), oo ah hay'ad dawli ah oo ugu yeeri karta shakhsiyaad inay gutaan adeegooda ciidan,



inta badan marka lagu jiro dagaal. Tani ragga qaxootiga ahna way qabataa. Waqtigan xaadirka ah, xubnaha ciidammada Maraykanka oo dhan waa dad oggolaaday inay iskood ugu biiraan ciidanka. Ragga aan isdiiwaangelin dhibaato ayay kala kulmi doonaan inay helaan sharci deggenaansho rasmi ah iyo/ama muwaaddinnimo.

Markii wiilka u Thom dhalay ee Leonce 18 jir noqday, wuxuu ku niyad-kacay inuu aakhirikii qaangaaray. Leonce wuxuu Thom uga sheekeeyay xuquuqda u ku leeyahay Maraykanka. Haddaad Thom ahaan lahayd, maxaad Leonce uga sheegi lahayd waajibaadkiisa?

SHARCIGA DEGGANAANSO RASMI AH


Hal sano markaad Ameerika joogtid ka dib, waa inaad dalbataa sharci rasmi ah ood ku joogtid, ama si ad u heshid Giriin Kaar (Green Card). Dadka haysta sharciga degganaansaha rasmiga ah dibedda way u safri karaan (inkastoo aanay fiicnayn in dibedda lagu maqnaado hal sano wax ka badan), way ku biiri karaan ciidanka Maraykanka, laakiin dooro-shooyinka Maraykanka kama codeyn karaan, mana ka shaqayn karaan shaqooyinka dawladda ee u baahan muwaaddininnimo. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kuu sharrixi doonta sidaad ku noqon lahayd qof ku deggan sharci rasmi ah.



Leyla waxay Maraykan joogtaa qiyaastii 9 bilood, waxaanay ogtahay inay u baahantahay inay dalbato sharciga rasmi ku joogga ah. Laakiin ma garanayso habkii loo mari lahaa. Leyla ayay la hadli kartaa si ay macluumaad ku saabsan dalbashada u hesho?

MUWAADDININNIMO

Markaad Maraykanka joogtid 4 sano iyo 9 bilood, waxaad dalban kartaa muwaaddininnimo. USCIS ama hay'addaada dib'udejinta ayaa kuu sheegi kara waxaad u bahantahay inaad noqotid muwaaddin. Waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin, sida inaad tahay qof muujiya akhlaaq sami oo aqoon asaasiya u leh Af-Ingiriisiga, taariikhda Maraykanka iyo dawladda. Muhaajiriinta ama qaxootiga noqday muwaaddinku waxay leeyihiin xuquuqo la mid ah kuwa ay leeyihiin muwaaddiniinta u dhalatay Maraykanka.



Meertooyinka ku yaal bogga xiga ku qor ama sawir ku muuji xuquuqda qaar ee ad qaxooti ahaan ku lahaan doontid Maraykanka. Afar-xaglayaasha ku ag yaal meertooyinka ku qor ama sawir ku muuji waajibaadka qaar ee ku saarnaan doona.

XUQUUQ:

Sida ka ilaalinta takoorka ama u safrid meel kasta oo ka tirsan Maraykanka.

WAAJIBAAD:

Sida cilmi kororsiga iyo u hoggaansanaanta sharciga ama hubinta carruurta inay haystaan qof ilaaliya.



XUQUUDA IYO WAAJIBAADKA KU SALAYSAN SHARCIGA QOFKU KU JOOGO*

Shaxda hoose iyo bogga xiga, ku muuji xuquuda iyo waajibaadka ay leeyihiin shaqsiyaadka haysta sharciga kala duduwan oo ay Maraykanka ku joogaan.

	Qaxooti	Sharci Degganaansho Rasmi ah	Muwaaddin
Loo oggolyahay	La haysto Isla marka la soo galo Maraykanka	la dalabado hal sano ka bacdi	la dalbado 4 sano iyo 9 bilood ka bacdi
Dokumentiga	I-94	I-551 ama Giriin Kaar	Baasaaboora Maraykan

XUQUUQ

Dalbasho isku keenid qoyska			
Dalbasho caawimo dadweyne (bulsho)			
Iskuul aadid iyo shaqo tegid			
U safrid si xor ah Maraykanka gudahiisa			
U safrid Maraykanka dibeddiisa fasax la'aan			
Codeyn			

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 224aad.

	Qaxooti	Sharci Degganaansho Rasmi ah	Muwaaddin
WAAJIBAAD			
Ogsoonaan iyo u hoggaansanaan sharciga			
Bixinta cashuuraha			
Iska diiwaangelin adeegga ciidan haddii u ninka muwaaddinka da'diisu u dhexeyso 18 illaa 25 jir			
In la xaqdhowro xuquuqda dadka kale			
Gudasho shaqo guddi garsoor (Jury) ee maxkamadeed.			
Daryeelidda iyo inaad baahi- tirtid carruurtaada			



GABAGGABO*

*Run ama been? Maxaad ka taqaannaa dib'udenjinta qaxootiga ee Maraykanka? Ku tijaabi aqoontaada weedhaha hoos ku qoran. Akhri weedhahan oo goobaabi erayga **Run** haddii ad u malaynaysid weedhu inay sax tahay, goobaabi **Been** haddii ad u malaynaysid weedhu inay khalad tahay.*

- | | | |
|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|------------|-------------|
| 1. Qaxooti ahaan, waxaad leedahay xuquuqo aasasiya oo u haysto qof kastoo ku nool Maraykanka. | Run | Been |
| 2. Maraykanka gudihiisa waa lagugu ciqaabi karaa sharci aanad aqoon u lahayn. | Run | Been |
| 3. Dhismayaasha dadweynaha (bulshada) waa la oggolyahay in sigaar lagu cabbo. | Run | Been |
| 4. Meelo badan ayaa u baahan inaad haysatid liisan ad xayawaanka ama mallaayga ku ugaarsatid. | Run | Been |
| 5. Inaad isku mar yeelatid in ka badan hal nin/naag waa laga oggolyahay Maraykanka. | Run | Been |
| 6. Hal sano markay Maraykan joogaan ka dib, haddii ay qaxootigu rabaan inay sii joogaan dalka waa inay dalbadaan sharciga degganaanshaha rasmiga ah. | Run | Been |
| 7. Ragga da'doodu u dhexeyso 18 illaa 25 jir ee aan iska diiwaangelin adeegga ciidanku waxay la kulmi doonaan dhibaato inay helaan sharci degganaansho rasmi ah iyo/ ama muwaaddininnimo. | Run | Been |
| 8. Waxaad dalban kartaa muwaaddininnimada markaad Maraykan joogtid laba sano ka bacdi. | Run | Been |

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 224aad.



Cutubka Laba iyo Tobnaad SHAQAALEYN

Shaqo heliddu waxay ka mid tahay arrimaha ugu muhiimsan ee ad qaban doontid markaad soo gashid Maraykanka. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin dadka qaangaarka ihi inay shaqaystaan si ay baahidooda iyo ta qoyskoodaba u daboolaan, oo waa inaanay ku tiirsanaan mucaawinada kaashka ah ee ay dawladdu bixiso. Madaama mucaawinada dawladdu ay wakhti ahaan iyo mug ahaanba koobantahay, si degdeg ah in shaqo loo helaa aad ayay muhiim u tahay.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Shaqo helid
- » Mushahar
- » Shaqo ku guulaysasho

Waa muhiim inaad si degdeg ah shaqo u heshaa, waayo mucaawinada dawladdu way koobantahay.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Fiiiri erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>arji</i>	application	<i>Yi Yi wuxu dhammaystiray arji shaqo si u shaqo uga helo bangiga.</i>
	career	
	employee	
	employer	
	employment	
	full-time job	
	job	
	part-time job	
	résumé	
	salary	
	volunteer	

Waxa dhici karta inay kugu qaadata asbuucyo ama bilo inaad shaqadaada kuugu horreysa heshid, sidaa darteed waa muhiim inaad aqbashid shaqada ugu horreysa ee lagu siiyo.

Barashada Af-Ingiriisigu waxay kaa caawin kartaa inaad shaqo heshid.

Qaxooti badani waxay shaqo ka bilaabaan meel hoose.

SHAQO HELID

Waxyaabahan xasuusnoow markaad shaqo raadinaysid:

- Helidda shaqadaada kuugu horreysaa waxay qaadan kartaa waqti yar oo maalmo ah ama muddo dheer oo bilooyin ah. Sidaa darteed, waa muhiim inaad isla markiiba shaqo raadin bilowdid.
- Waxa lagaa filayaa inaad aqbashid shaqada ugu horreysa ee lagu siiyo, xataa haddii aanu mushaharkeedu ficnayn ama aanay ahayn shaqo la mid ah taad dalkaagii hooyo ku qaban jirtey.
- Dad badan ayaa arji u soo qoranaya shaqo keliya, markaa waa muhiim inaad oggoshahay inaad aqbashid shaqo kugu cusub.
- Dawladda iyo hay'addaada dib'udejinta midkoodna ma dammaanad qaadayaan shaqaaleyntaada.
- Adeegyada shaqaaleynta qaxootiga ayaa kaa caawin doona shaqo raadinta, laakiin haddii aanad adigu shaqo raadsan heli maysid shaqo.
- Qaxootiga diida shaqo la siiyay, waxy waayi karaan manfaca dawladdu siiso.
- Af-Ingiriisiga oo ad barataa wuxuu kaa caawin doonaa shaqo helidda. Shaqaaleeyayaasha badankoodu waxay raadiyaan qof ku hadla, akhriya oo qora Af-Ingiriisiga.



Gori Maya waxay qaadatay shaqdii ugu horreysay ee la siiyay. Shaqadeeda ma jecla, laakin waxay barataa Af-Ingiriisiga, asxaab badan oo fiicanna way yeelatay. Labo sano ka bacdi markay Gori Maya dalbatay shaqo cusub, waxay karti u yeelatay inay waraysiga shaqada ku gasho Af-Ingiriisi, waxaanay hadda haysatay tixraac. Shaqdii ugu horreysay ee ay Gori Maya qaadatay siday u caawisay?

NOOCYADA SHAQOYINKA



Ka fikir shaqada ama shaqooyinka ad hadda ka hor soo qabatay.

- Shaqooyin nooc ee ah ayay ahaayeen?
- Xirfado nooc ee ah ayaad u baahnayd si ad ugu qalantid shaqadaa?

Maraykanka waxa ka jira saddex nooc oo shaqo: shaqo aan xirfad u baahnayn, shaqo xirfad u baahan, iyo shaqo u baahan aqoon iyo tababar (baroofishinaal).



Iswaafaji sawirka tilmaama nooca shaqo ee dhinaca bidixda iyo faafaahinta ugu saxsan ee ku qoran dhinaca midigta.*



1. Shaqo aan xirfad u baahnayn ama heer hoose ah

- a. Shaqooyinkani waxay ugu yaraan u baahanyihiin shahaado jaamacadeed, Af-Ingiriisi heer sare ah, iyo xirfado dheeraad ah oo la xiriira shaqada. Waxay inta badan u baahanyihiin liisan ama caddayn gaar ah (certification). Shaqooyinka noocan ihi badankoodu waxay bixiyaan mushahar sannadka ama bishii ku cayiman, meeshay ka bixin lahaayeen mushahar saacadle ah.



2. Shaqo xirfad u baahan

- b. Shaqooyinkani uma baahna tababar ama khibrad. Shaqooyinkani waxay inta badan bixiyaan mushahar saacadle ah, umana baahna aqoon badan oo afka Ingiriisiga ah. Qaxooti badan ayaa shaqooyinkan qabta intay baranayaan Af-Ingiriisiga ama xirfado kale.



3. Shaqo baroofishinaal ah

- c. Shaqooyinkani waxay u baahanyihiin tababar, Af-Ingiriisi dheeraad ah, iyo khibrad illaa heer ah oo ku aaddan nooca shaqada. Shaqooyinkani inta badan waxay bixiyaan mushahar saacadle ah ama toddobaadle ah oo mushaharkoodu wuu ka sarreeya inta badan shaqooyinka heerkoodu hooseeyo ee bilowga ah, iyo xataa qaar ka mid ah shaqooyinka baroofishinaalka ah.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 224aad.

Ameerika gudihiisa ragga iyo dumarku way wada shqeeyaan, dumarkuna marar badan ayagaa horjooge u noqda ragga.



Ka firso su'aalahan hoose:

- Muxuu yahay dareenkaaga ku aaddan inaad shaqooyin kala duduwan ka shaqaysid?
- Shaqooyinka kuu dhib yar inaad heshid waa kuwee?
- Kuwee baa kugu yara adkaan kara?
- Muxuu yahay dareenkaaga ku aaddan xaqiiqda ah in shaqada ugu horreysa ee qaxootiga inta badani helaan ay tahay shaqo heer hoose ah oo bilow ah?
- Haddii ay shaqadaadu kugu adkaato yaad la hadli? Maxaad yeeli?

Isla markuu Maxamed Maraykan yimid wuxuu la kulmay Claire oo ah la taliye xagga shaqada ah. Claire waxay kula talisay Maxamed inuu dalbado shaqo nadiifiye xafiis ah. Maxamed ma oggola inuu shaqadan oo kale qabto, waanu diiday inuu dalbado shaqada. Saddex bilood ka dib wuxuu Maxamed booqday Claire, waayo weli shaqo muu helin. Jagadii nadiifiyaha ahayd waa la buuxiyay, laakiin Claire waxay tiri Maxamed waan la socodsiin haddii ay maqasho jago bannaan. Maxay muhiim u tahay in la qaato shaqada ugu horreysa ee bannaan? Maxay u tahay ra'yi fiican in loo maskax furnaado shaqo kasta?

RAG IYO DUMAR SHAQAYNAYA

Maraykanka gudihiisa ragga iyo dumarkuba way shaqeeyaan. Xoogga shaqaalaha kalabar waa dumar, oo waxay qabtaan shaqooyin la mid ah kuwa raggu qabtaan heer kasta, waaxaanay inta badan kormeeraan ragga.



Khin Myint wuxuu dareemayaa in waraysigiisii shaqo sii fiican u dhacay, waanu farxay markii tilifoon loo soo diray ee loo sheegay inuu shaqada helay. Hase yeeshe muu ogayn in horjoogihisu tahay qof dumar ah. Weligii wuxuu la shaqeeyay keliya ragga. Haddaad Khin Myint ahaan lahayd, maxaad dareemi lahayd? Muxuu u baahanyahay inuu Khin Myint sameeyo?



Ka fikir ra'yiga ah inay ragga iyo dumarku iska barbar shaqeeyaan.

- Markaad joogtey dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo, ma caadi bay ahayd inay ragga iyo dumarku meel kawada shaqeeyaan?
- Sideed u malaynaysaa inuu yahay dareenkaaga ku aaddan inay ragga iyo dumarku iska barbar shaqeeyaan? Inaad laqabsatid ma kugu adkaan doontaa?
- Haddii laqabsigu kugu adkaado, yaad arrintan kala hadli?

Aisha weligeed meel guriga ka baxsan kama ay shaqayn. Shaqo alaab-bac-ku-gurid ah ayay ka heshay dukaanka cuntada oo ku yaal suuqa, waxaanay ogaatay inay maalin walba la shaqaynayso niman kala duduwan. Aisha arrintan way dhibsatay. Haddaad Aisha ahaan lahayd, maxaad samayn lahayd? Maxaad dareemi lahayd haddaad la shaqayn lahayd shaqsi ad lab iyo dheddig kala tihiin?

CARRUUR SHAQAYNAYSA

Maraykanka gudihisa, carruurta da'doodu tahay 14 jir iyo ka weyn waxay qaban karaan shaqooyin dhiman (part-time), laakiin way xaddidnaan karaan saacadaha ay shaqeeyaan iyo noocyada shaqo ee ay qabanayaan. Dhallinyaro badan oo Maraykan ihi waxay ka shaqeeyaan shaqooyin dhiman marka iskuulka laga soo rawaxo ka dib, asbuuca dhammaadkiisa (weekend), iyo xilliyada fasaxa lagu jiro.



Ka fikir siday wax noqon karaan haddii dadkan ka tirsan qoyskaagu ay shaqo tagaan Maraykanka gudihisa.

Xubinta qoyska:	Siduu isku beddeli karaa doorka qofkani ku leeyahay qoyska haddii u shaqo tago?
Adiga	
Saygaaga/xaaskaaga	
Carruurtaada	
Waalidkaaga ama seeddigaa/soddohdaa	
Walaalaha	

Meheradaha daryeelka carruurta waxay xannaaneeyaan carruurta yar yar ee labada waalid, ama waalid keli ihi u shaqo kaga maqanyahay.

Macalinka Dinesh wuxuu kula talinayaa Dinesh inuu qaato fasallo xagaaga si u heerka ardayda iskuulka ula qabsado, hase yeeshe Dinesh wuxu rabaa inuu xagaaga shaqaysto si u qoyskiisa u caawiyo. Sideed u maarayn lahayd arrintan? Haddaad ahaan lahaydeen waalidka Dinesh, maxaad ku odhan lahaydeen? Sidee u roon Dinesh – shaqo mise inuu soo gaadho heerka iskuulka laga rabo? Waayo?



Ka fikir isbeddelada la qabsi ee ad u baahnaan kartid inaad samaysid.

- Qoyskaaga yaa dhibaato kala kulmaya isbeddelladan?
- Sideey mus'uuliyadaha qoysku isku beddeli karaan?
- Yaa u baahan inuu ka shaqeeyo in la yeesho xirriir wadahal oo dheeraad ah? Sidee ayuu qoyskaagu arrintan u fulin karaa?

DARYEELKA CARRUURTA

Qoysas badan oo Maraykan ah oo leh carruur yaryar ayaa labada waalidba shaqeeyaan. Waalidiintani waxay u baahanyihiin qof carruurta u haya inta ay shaqada ku maqanyihiin.



Xarumaha xannaanaynta carruurta ayaa ah kuwa hawshaa qabta. Inta badan adeegyada xannaanaynta carruurta bilaash maaha. Waxa kaloo carruurta guryahooga ku xannaanayn kara dad shaqaale ah.

Ubax iyo ninkeeda, Abdullah, waxay leeyihiin ilmo yar iyo mid labo jir ah. Ubax waxay ka shaqaysaa habeenkii shaqo buuxda oo qoyskeeda siisa manfac daryeel caafimaad. Abdullah maalintii wuxuu haystaa shaqo dhiman. Abdullah wuxuu fidkii heli karaa shaqo kale oo dhiman. Haddii u qaato shaqadaa, qoysku wuxu heli doona lacag dheeraad ah, laakin waa inay lacag siiyaan qofkii carruurta u hayn lahaa. Ubax iyo Abdullah maxay u baahanyihiin inay ka fikirkaan markay go'aanka gaadhayaan? Maxaad ku talin lahayd?



Sawir ama qoraal ku muuji cidda ku xannaanaysa carruurta dalkaaga hooyo ama waddankaaga megangelyo.



Ka fikir sidaad dareemi kartid haddi carruurtaada ama kuwaad u tahay awoow/ ayeeyo u kuu hayo qof aan ka tirsanayn qoyskaad la nooshahay, sida:

	Faa'iidada xulkan ku jiraa waa maxay?	Maxaa faa'iido darro noqon kara?
Ehel ku nool meel dhow		
Xarunta xannaanada carruurta		
Xannaanada carruurta ee guryaha		
Qof ilmaha ku haya gurigaaga		
Dugsi ah iskuulka-ka-hor ee loogu talagalay ilmaha da'doodu tahay 3 jir iyo ka badan		

- Daryeelka carruurta ee kugu habboon kee buu noqon lahaa?
- Keebaad u malaynaysaa inuu ugu jabanyahay?
- Keebaa adiga kugu habboon marka ugu horreysa ee ad shaqo ka bilowdid Maraykanka?

Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta helitaanka adeegyada shaqaaleynta.

Waa muhiim inaad ilaalisid waqtiga ballanta wareysiga shaqo ee lagu qabtay.

Markaad ku jirtid wareysiga shaqada, si toos ah u eeg indhaha wareysi qaadaha, dhoollacaddee, oo qacanqaad.

SIDA LOO RAADSADO SHAQO



Ka fikir sida ay dadku shaqo uga raadsadaan dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Halkeed ka raadin kartaa shaqada?
- Tallaabooyinkeed qaadi kartaa?

Qofka ugu fiican ee shaqo kuu heli karaa waa adiga naftaada. Haseyeeshe waxa jira dad kale oo kaa caawin kara dadaalkaaga:

- HAY'ADAHA DIB'UDEJINTA IYO ADEEGYADA SHAQAALEYNTA QAXOOTIGA.** Shaqaalaha hay'adahani waxay ku caawiyeen qaxooti badan inay shaqo ka helaan Maraykanka. Dhageyso talooyinka ay shaqaalaha hay'addaada dib'udejintu ku siiyaan. Waxay khibrad u leeyihiin inay qaxootiga shaqo u helaan.



- EHELADA IYO ASXAABTA.** Weydii asxaabtaada iyo eheladaada haysta shaqooyin inay kuu sheegaan wixii shaqo ah ee ka bannaanaada shirkadaha ay u shaqeeyaan, ama shirkadaha ka ag dhow.



- WARGEYSYADA, INTERNETKA, IYO HAY'ADAHA DADWEYNE EE SHAQAALEYNTA.** Shirkadaha badankoodu waxay shaqooyinka bannaan ku xayaysiiyaan wargeysyada iyo internetka.



Shirkadaha qaar waxay la macaamilaan hay'adaha shaqaaleynta ee dadweynaha si ay dadka u shaqaaleeyaan. Ka feejignoo adeegyada shaqaaleynta ee ku weydiiya lacag, kuuna ballanqaada inay shaqo kuu helayaan.



Goobaabi hababka ku taxan bogga 168 ee ad hadda ka hor isticmaashay markaad shaqo raadinaysay.

Ka firso su'aalahaan hoose:

- Haddii ad dhibaato kala kulantid inaad Maraykanka shaqo ka heshid, yaad ku kalsoontahay inaad caawimo weydiisatid?
- Sababta ad ugu kalsoontahay qofkan inaad caawimo weydisato waa maxay?
- Qofka ku xiga ee ad caawimo dheeraad weydiisan kartaa waa ayo?

Alberto wuxuu wargeyska ku arkay xayaysiis shaqo oo xiisa galiyay. Xayaysiiskii ayuu u keenay maamulaha kiiskiisa, waxaanay ka caawisay in uu buuxiyo arjiga dalabka shaqada. Dhowr habeen ka dib, waqtigii cashada, Alberto ayaa saxiibkii u sheegay jagadan. Alberto saaxibkii ayaa sheegay inuu garanayo qof halkaa ka shaqayn jiray, qofkaasoo ay u suurto gashay inuu Alberto ka bixiyo war fiican. Maxaa ka mid ah waxyaabaha u Alberto sameeyay ee caawiyay inuu shaqo helo? Maxa ka mid ah waxyaabaha aad qorshaynaysid oo kugu caawin kara shaqo heliddaada? Ayaad ku kalsoontahay oo ad weydiisan kartaa inay kaa caawiyaan shaqo helidda?

WAANOYIN LA XIRIIRA KU GUULAYSASHADA WAREYSIYADA SHAQO

Markaad ku jirtid wareysi shaqo (interview), qof ka tirsan shirkadda ayaa shaqada kaaga sheekeyn doona. Way kula hadli doontaa oo waxay su'aala kaa weydiin doontaa khibradahaaga la xiriira shaqooyinkaagi hore si ay u ogaato inaad shaqaale fiican ka noqon doontid shirkaddooda. Wareysiga shaqadu waa muhiim. Haddii ad ku guulaysatid in fikrad fiican lagaa qaato, waxay u badantahay inaad shaqada heshid. Hoos waxa ku qoran waxyaabahaad samayn kartid si fikrad fiican lagaaga qaato.

- WAQTIGA LAGUU QABTO KU IMOW.** Arrintani aad ayay muhiim ugu tahay dadka Maraykanka. Haddii ad ka soo daahdid wareysiga shaqo, horjooguhu wuxuu ku fikiri karaa inaad shaqadana maalin walba ka soo daahi doontid.
- NADIIF AHOW OO SOO XIRO DHAR KU HABBOON SHAQADA.** Lataliyahaaga xagga shaqada ayaa kaa caawin kara sidaad u baran lahayd dharkaad xiran lahayd.



Waa caadi in dhowr jeer wareysi lagaa qaado ka hor intaan shaqada lagu siin.

- WAREYSI QAADAHA INDHIHIISA EEG, DHOOLLACADDEE, OO GACANQAAD.** Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin inay daacadnimo muujiso inaad qofka indhihiisa fiirisid markaad la hadlaysid, dhoollacaddaynta iyo gacanqaadkuna ay tilmaamaan iskulkalsoonni iyo aragti fiincan oo ku aaddan shaqada.
- SU'AALO KA DHIIBO WAXYAABAHAAD SHAQADAN U QABAN DOONTID.** Tani waxay horjoogaha tusaysaa inaad niyad u haysid shaqadan.
- WAXOOGA AF-INGIRIISI AH KU HADAL, HADDAAD GARANAYSID.** Xataa haddaad ogtahay inaad ku hadashid in yaroo Af-Ingiriisi ah, ku hadalkiisu wuxuu horjoogaha tusayaa inaad isku kalsoontahay. Waxa kaloo u tusayaa inaad niyad u haysid inaad baratid Af-Ingiriisiga, taaso kordhin karta inaad nasiib u yeelatid helidda shaqo fican.
- ISKU DAY INAAD DABACSANAATID.** Qof kasta waxa ku dhaca walbahaar markay wareysi shaqo galayaan. Ogoow inaanad kaligaa ahayn.



Qof kale la jil:

- Indhaha isku fiiriya.
- Dhoollcaddeeya.
- Is gacanqaada.
- Qadar Af-Ingiriisi ah ku hadal (xataa hadday tahay "hello" oo keliya).
- Isdabci.



Qof kale wada jila ka jawaabidda su'aalaha shaqaaleeyaha, sida:

- Wax ma iiga sheegi kartaa naftaada?
- Maxaad u rabtaa jagadan?
- Khibradahaagii hore kuwee kaa caawin kara shaqadan?
- Goormaad shaqada bilaabi kartaa?



Haddana wada jila isweydiinta su'aalo kale, sida:

- Shaqadani ma mid dhiman baa mise mid buuxda?
- Shaqadu goormay maalin walba bilaabanta?
- Waa maxay waxyaabahaan qaban doono?
- Horjoogahaygu yuu noqon doonaa?
- Goorma ayuu qofkaad qaadataan shaqada bilaabi doona?

Waxa dhici karta inaad dhowr wareysi shaqo gashid ka hor intaanad helin shaqo. Tani waa u caadi dadka shaqo ka raadsanaya Maraykanka oo dhan. Waxa dhici karta inaad niyad jabtid haddi aan shaqo lagu siin wareysigaaga shaqo ee ugu horreeya, laakiin waa inaad samir yeelataa. Ka codso qoyskaaga iyo lataliyahaaga xagga shaqada inay ku dhiirrigeliyaan haddii ad u baahatid.

Niyadsamow! Qoyskaaga iyo lataliyaha shaqaaleynta dhiirrigelin ka raadso.

Ganga si ay iskugu diyaariso shaqo doonisteeda, way qubeesatey dhar nadiif ah na way gashatey. Waxay isticmaashay Af-Ingiriisigii yaraa ee ay garnaysay, waxay gacanqaadday hojoogaha iyadoo si toos ahna u eegtay. Ganga waxay dareentay in waraysiga shaqadu sii fican u dhacay, laakiin weli lama soo wicin. Maxaa dhacay ayaad u malaynaysaa? Maxaad u malaynaysaa Ganga in ay dareemayso? Intaad shaqo doonka tahay si aad u niyadsamaatid maxaad samayn lahayd?



ASTAAMAHAAGA WANAAGSAN

Shaqaaleeyayaasha badankoodu waxay wareysiga shaqada ku warsadaan astaamaha wanaagsan. Hoos waaxa ku taxan erayo la xiriira shaqaaleynta oo tilmaami kara astaamaha wanaagsan ee shakhsiga. Calaamadi saddexda astaamood ee ugu sarreeya oo ad adigu leedahay.



Astaan/ dabeecad	Af-Ingiriisi	Sawir, ama qor micnaha ay adiga kuu leedahay.
	Honest	
	Dependable	
	Flexible	
	Hard worker	
	Good work ethic	

Astaan/ dabeecad	Af-Ingiriisi	Sawir, ama qor micnaha ay adiga kuu leedahay.
	Cooperative	
	Motivated	
	Fast learner	
	Reliable	
	Positive attitude	
	Good listener	
	Punctual	



Isku tababar werysigaaga shaqo ee mustaqbalka adigoo qof kale Af-Ingiriisi ugu sheegaya astaamahaaga wanaagsan.

Waa inaad shaqadaada kuugu horreysa joogtaa ugu yaraan lix bilood.



Haddii ad in muddo ah shaqo heli weydid, ka fikir waxyaabahaad samayn lahayd si ad u niyad samaatid adigoo weli sii wada shaqo raadinta. Goobaabi waxyaabaha hoose kuwa kaa caawin kara inaad yeelatid dareen wanaagsan oo ku aaddan naftaada.



Ka qaybgal xafladaha bulsho ama xafladaha dhaqameed



Jimicsi samee



Ku lug-lahow iskuulka ciyaalkaaga



Muusig ad garanaysid dhageyso



Joogtee ku hadalka Af-Ingiriisiga



Qaado tababar xirfadeed



La hadal madax-diimeed degaanka ka mid ah



kala hadal asxaabtaada iyo qoyskaaga sidaad dareemaysid



Tabarruce ka noqo degaankaaga



Maxaa ka mid ah waxyaabahaad samayn lahayd si ad u sii waddid niyadsamida shaqo raadintaada?

TAARIIKHDA SHAQO



Ka fikir shaqadaad hadda haysid ama shaqooyinkaad hore u soo qabatay?

- Ma gurigaaga ayaad ku shaqayn jirtey mise bannaanka?
- Shaqooyinkeed qabatay?
- Maxay ahaayeen xirfadaha ad u baahnayd inaad shaqooyinkaa qabatid? Maxay ahaayeen xirfadahaad u baahnayd markaad guriga ku shaqaynaysay?



Meeshan hoose ku sawir ama qor hawlaha qaar ee ad dhammaystirtay shaqooyinkaagii hore ku soo maray.

Boe Hser wax loogu wacay wareysi shaqo, ka bacdi markay dalbatay shaqo guri daryeelid ah. Weligeed meel guriga ka baxsan kama ay shaqayn, laakiin waxay ka hadashay khibrada ay u leedahay nadiifinta iyo dhar dhaqidda qoyskeeda. Asbuuc ka dib, Boe Hser waxa la siiyay shaqo. Sidee bay Boe Hser u caawisay khibraddeeda shaqo oo ay hadda ka hor soo qabatay? Sidee bay kuu caawin karaan khibradahaagii hore?

Shaqada kuugu horreysaa waxay noqon doontaa tallaabo muhiim u ah inaad taariikh shaqo ku yeelatid Maraykanka. Iskuday inaad shaqada kuugu horreysa joogtid ugu yaraan 6 bilood, xataa haddii ay shaqadu tahay mid aanad rabin. Shaqaaleeyayaasha mustabalku markay ka fiirsanayaan inay ku shaqaaleeyaan waxay fiirin doonaan sidaad hawsha shaqadaasi uga soo baxday.

Masood iyo Ali waxay dalbadeen isku shaqo. Sannadkii hore, Masood wuxuu haystay hal shaqo meeshuu Ali ka shaqeeyay afar shaqo oo kala geddisan. Kumaad u malaynaysaa in la shaqaaleyn doono? Maxay tahay tilmaanta ay ka bixineyso qofka ku raaga hal shaqo?

Aqoontaada Af-Ingiriisiga ood kobcisaa waa habka ad uga dalici kartid shaqadaad haysid, una hanan kartid mid ka fiican oo ka mushahar badan.

Haddaad wax fahmi weydid, warso.

YOOLKA SHAQADA



Waa inaad samaysato yool shaqo oo ad tilmaanto waxyaabahaad u baahantahay inaad samaysid si ad u hanatid yoolkaaga.

Ka fikir yoolkaaga shaqo. Goobaabinta hoose ku sawir ama qor yoolkaaga shaqo. Iskuday inaad xaqqiqada ku salaysid!

Yoolkaaga shaqo ee hal bil:

Yoolkaaga shaqo ee 6 bilood:

Yoolkaaga shaqo ee 1 sano:

Yoolkaaga shaqo ee 5 sano:

Si aad kor ugu dallacdid shaqo dhaanta oo ka lacag badan taad haysid, waxaad u baahantahay inaad Af-Ingiriisigaaga wanaajisid, waxaanad u baahnaan kartaa inaad baratid xirfado cusub. Haddii ad dalkaagii hooyo ku qaban jirtay shaqo baroofishinaal ah, waxa dhici karta inaad shaqadaasi oo kale ka qaban kartid Maraykanka, laakiin waxaad u baahnaan kartaa inaad fassallo qaadatid oo ad heshid shahaado caddeyn ah. Hanashada yoolkaagu waxay qaadan kartaa waqti, markaa waan inaad samir yeelataa. Wax walba waxa ka muhiimsan, xasuusnoow dalka Maraykanku wuxuu caan ku yahay fursadda ay heelaan dadka hawlarka ihi.

Siddeed bilood ka dib markay Arsu joogtey Maraykanka waxay ka fakartey yoolkeeda shaqada. Waxay ka niyadjabtay inaanay arrimuhu us socon sidii ay qorshaysatey. Haddaad ahaan lahayd Arsu, sideebaad dareemi lahayd? Maxaad samayn lahayd? Sideebay Arsu khibraddeeda Marykan ugu niyadsamaan kartaa?

MUSHAHARKA, SAACADAHA, IYO MANAAFACAADKA

Shaqaaaleeyuhu markuu shaqo ku siinayo, wuxu kaala hadli mushaharka, saacadaha iyo manaafacaadka. Waa kuwan waxyaabaha qaar ee lagu sheegi doono:

- Mushaharku intuu yahay.
- Inuu mushaharkaagu ku salaysanyahay saacad ama sannad.
- Goorta mushaharka lagu siinayo.
- Inta saacadood ee ad asbuucii shaqayn doontid.
- Jadwalka shaqadu siduu yahay.
- Manaafacaadka jira



Haddii aanad wax fahmin, warso.



Qof kale la jil idinkoo isweydiinaya shaqada takhasuskeeda iyo baahideeda, sida:

- Meeqa saacadood ayaa la shaqaynayaa asbuucii?
- Shaqada maalintii goormaa la bilaabaa?
- Meeqa jeer ayaa mushaharka la i siinayaa?
- Waa maxay manaafacaadka shaqadu leedahay?

Su'aalahaaga keen!

Mushaharkaaga waxaad u heli doontaa si joogto ah, oo noqon kara asbuuciiba hal mar, labadii asbuucba hal mar, ama bishiiba hal mar. Waxaad heli doontaa isagoo jeeg ah oo ku dheggan xaashi ama warbixin. Warbixinta jeegga la socota adiga ayay diiwaan kuu tahay. Keydso warbixintaa markaad jeegga kaash ku beddelatid ama ad ku shubtid akoonkaaga.

Ameerika waxaa muhiim ka ah inaad cashuurta bixiso.

Intaad shaqada ku gudajirtid, iska ilaali inaad la sheekaysatid eheladaada, asxaabtaada, iyo dadkaad la shaqaysid, hana dirsan tilifoonno shaqsi ah.

Abid ha ka tagin shaqadaada illaa ad mid cusub ka heshid.

SHAQOYINKA BIXIYA LACAG KAASH AH

Maraykanka gudahiisa, lacag kaash ah inaad mushahar ahaan u qaadatid waa sharci darro, haddii aanad cashuur siinayn dawladda.

Haddii qofkaad u shaqaysaa ku siiyo kaash, haseyeeshe aanu ku siin warbixin la socota oo

tilmaamaysa mushaharka guud, cashuurta lagaa jaray, iyo inta soo hartay, adiga iyo shaqaaleeyuhuba waxaad jabinaysaan sharciga. Haddii ad sharciga jabisid, waxa dhici karta inaad ganaax bixisid ama aaddid xabsi.



Claudia waxay heshey shaqo ah nadiifinta guryaha.

Mushaharkeeda waxa lagu siinayay lacaga kaash ahaan ah, inta badanna waxay heli jirtay bakhshiish kaash ah. Claudia

maxaad uga sheegi kartaa bixinta cashuurta? Maxay u bixineysaa canshuurta?



Su'aalahan ku saabsan cashuuraha ka fiirso:

- Maraykanka gudahiisa, maxay muhiim u tahay in la bixiyo cashuuraha?
- Maxaa dhici kara haddii aanad bixin cashuuraha?

WAANOYIN KU GUULEYSASHADA SHAQADA

- HA KA DAAHIN SHAQADA.** Shaqaaleeyayaashu waxay shaqaalhooda ka filayaan inay shaqada waqtigeeda ku galaan, ra'yi fiicanna waa lagaa qaadan haddaad mar walba waqtiga ku timaaddid. Haddii ad shaqada ka daahdid, mushaharkaaga ayaa la dhimi karaa. Haddii ad mar walba soo daahdid, shaqadaad waayi kartaa.

- SHAQADA XANUUN DARTII FASAX UGA QAADO KELIYA MARKAAD DHAB AHAAN U JIRANTAHAY.** Waxa kalood fasax u qaadan kartaa haddii qof ehel soke ihi (saygaaga/xaaskaaga ama ilmahaaga) u xanuunsado oo adiga kuu baahanyahay inaad dhakhtar geysid. Tanoo kale hadday dhacdo, horjoogahaaga sii ogeysii.
- WAC HADDAAD KU TALAJIRTID INAAD SHAQADA KA BAAQATID.** Markasta wac horjoogahaaga haddii ad soo daahaysid ama baaqanaysid sababtu waxay doonto ha ahaate. Haddii ad ogtahay inaad shaqada ka baaqanaysid ballan darteed, horey ula hadal horjoogahaaga si ad fasax u qaadatid inaad maqnaatid ama soo daahdid.
- FURFURNOOW.** Saacadda qadada iyo bareegyada ayaa noqon kara waqti fiican oo ad ku baratid dadkaad la shaqaysid. Waxyaabaha caadiga ah ee laga sheekeysto meela shaqada waxa ka mid ah hawada, wixii la qabtay fasaxa asbuuca dhammaadkiisa (weekend), cuntada, iyo isboortiga. Waxaad fursado badan u heli doontaa inaad dadkaad la shaqaysid la wadaagtid dhaqankaaga, gaar ahaan xilliyada ciidaha caadada ah.
- SI HAWLKARNIMO LEH U QABO SHAQADA.** Iska ilaali inaad sheekooyin gaar ah la yeelatid qoyskaaga, asxaabtaada iyo dadkaad wada shaqaysaan, tilifoonno shaqsi ahna ha dirsannin waqtiga shaqada.
- SU'AALO WARSO.** Haddii aanad wax fahamsanayn, waxaasi su'aal ka dhiibo. Shaqadaadu way ka sii fiicnaan, shaqaaleeyahaaguna wuu kugu xushmeyn dadaalkaaga aqoon kororsiga iyo horumarka.
- SHAQOQOYIN CUSUB IYO MAS'UULIYADO CUSUB BARO MARKAY SUURTAGAL TAHAY.** Waxa dhici karta inaad u dallacdid shaqo fiican haddii ad raalli ka tahay inaad xil iska saartid mas'uuliyado dheeraad ah.
- OGEYSIIN SII INTAANAD SHAQADA KA TEGIN.** Markaad shaqo ka tegaysid ood mid kale qaadanaysid, shaqaaleeyahaagii hore ogeysiin ugu yaraan laba asbuuc ah sii. Weligaa ha ka tegin shaqo adigoo mid kale helin.



Goobaabi waanooyinka ku guuleysashada shaqo ee ka duwan kuwa kugu soo maray shaqooyinkaagii hore.



Ka firso su'aalahan:

- Waanooyinke kuu dhib yar inaad raacdid?
- Waanooyinke kugu adkaan kara?
- Maxaad samayn doontaa si aad iskugu daydid inaad shaqadaada ku guulaysatid?

Waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqaysid meel ammaan ah oo caafimaad leh.

Sanaa shaqadeeda cusub si hawl karnimo ah ayay u qabataa, hase yeeshe marmarka qaar may fahmin wixii laga rabay. Sanaa Af-Ingiriisi badan ma taqaanno, markaa umay sheegin horjoogaheeda in aaney fahmin waxyaabahay qaban lahayd qaarkood. Sanaa sideebay shaqadeeda si wanaagsan ugu fahmi lahayd? Haddii aad Sanaa ahaan lahayd sidee baad u maareyn lahayd xaaladdan?

Boris wuxuu shaqo bilaabey dhowr bilood ka dib markii uu Ameerika yimid. Af-Ingiriisi badan kuma hadleyn, laakiin wuxuu ahaa shaqaale fiican oo dabeecad wanaagsan, horjoogihisa iyo shaqaalaha kalena way ka heleen. Lix iyo toban bilood ka dib, Boris wuxuu shaqo ka dalbadey meel kale, shaqadiisii horena wuu ka tagey isaga oo aan cidna u sheegin. Wuu yaabay markii uu waayay shaqadii cusbeed. Mar danbe wuxuu ogaadey in horjoogihisi shaqadii hore uu san ka bixin warbixin wanaagsan. Khaladkuu Boris sameeyay waa maxay? Maxay tahay sida ka duwan uu Boris yeeli lahaa?

XUQUUQAHA GOOBTA SHAQO

Qaxooti ahaan, xuquuqaahaaga goobta shaqo waxay la mid yihiin kuwa muwaaddiniinta Maraykanku leeyihiin. Shaqaaleeyuhu kuguma takoori karo qaxootinnimadaada, shaqo ama dallacaadna kuuma diido karo sababo la xiriira da'daada, laxaad li'i, inaad reer leedahay iyo inkale, jinsiyaddaada ama qoomiyaddaad ka soo jeeddid, midab, diin, dheddig ama lab, ama hammigaaga dumarka/ragga xaguu u janjeero. Haseyeeshe, shaqooyinka qaar waxay u furanyihiin kaliya muwaaddiniinta Maraykanka ah.



Shariciyada shaqadu waxay shaqaalaha ka ilaaliyaan xaaladaha shaqo ee aan ammaanka ahayn. Shaqaaleeyayaashu waa inay hubiyaan in goobta shaqadu bad iyo caafimaad qabto. Shariciyada shaqadu waxa kalooy shaqaalaha ka ilaaliyaan faraxumayn-shukaansi marka la joogo goobta shaqada. Faraxumayn-shukaansi waa dabeecad kasta oo salka ku haysa shukaansi oo qofka ku abuuri karta dareen baqdin ama dhibsasho.



Maamulaha Sangita waa nin aad u naxariis badan, caawinaad iyo saxiibtinnimo leh. Laakiin marmar garabka ayuu ka taabtaa markuu la hadlayo. Sangita arrintaa wey dhibsatey. Waa maxay arrinta jirtaa? Maxay u baahantahay inay Sangita samayso?



Ka fikir xuquuqda Maraykanka ee goobta shaqada.

- Xuquuqahani siday ugu egyihiin kuwaad hadda ka hor soo martay?
- Sideebay uga duwanyihiin?
- Sideed ula qabsan doontaa kala duwanaanshahan?



GABAGGABO*

*Run ama been? Maxaad ka taqaannaa dib'udenjinta qaxootiga ee Maraykanka? Ku tijaabi aqoontaada weedhaha hoos ku qoran. Akhri weedhahan oo goobaabi erayga **Run** haddii ad u malaynaysid weedhu inay sax tahay, goobaabi **Been** haddii ad u malaynaysid weedhu inay khalad tahay.*

- | | | |
|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|------------|-------------|
| 1. Shaqada kuugu horreysa inaad heshaa waxay kugu qaadan kartaa waqti gaaban oo aan ka badnayn dhowr maalmood illaa bilooyin badan. | Run | Been |
| 2. Dawaladda ama hay'addaada dib'udejintu waa inay shaqo kuu helaan. | Run | Been |
| 3. Barashada Af-Ingiriisigu waxay kaa caawin kartaa shaqo helidda iyo kordhinta rajooyinkaaga shaqo. | Run | Been |
| 4. Qaxooti badani waxay shaqo ku bilaabaan shaqo heer hoose oo bilow ah. | Run | Been |
| 5. Maraykanka gudihiisa dumarku waxay badanaa goobta shaqada horjooge u yihiin ragga. | Run | Been |
| 6. Haddii ad ka soo daahdid wareysiga shaqo, waxa dhici karta inaan shaqada lagu siin, waayo waxa lagaa qaadan karaa fikrad ah inaad shaqadana ka soo daahi doontid. | Run | Been |
| 7. Qofka ugu fiican ee kaa caawin kara shaqo helidda waa adiga. | Run | Been |
| 8. Qaxootigu inay dawladda Maraykanka cashuur siiyaan maaha. | Run | Been |

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 224aad.



Cutubka Saddex iyo Tobnaad BARASHADA AF-INGIRIISIGA

Barashada luqad cusubi waxay qaadataa waqti iyo shaqo. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin inaanay barashada wax cusubi lahayn da'weyni ama da'yari. Barashada Af-Ingiriisigu waxay kaa caawin doontaa inaad shaqo heshid, inaad ku guulaysatid shaqadaada, inaad dadka kale ee Maraykanka ah la sheekeysatid, iyo inaad si degdeg ah ula qabsatid noloshaada cusub ee Maraykanka.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Muhiimadda barashada Af-Ingiriisiga
- » Siyaabaha loo barto Af-Ingiriisiga
- » Siday barashada luqad cusubi u qaadatao waqti iyo hawl karnimo

Barashada Af-Ingiriisigu waxay kuu sahlaysaa inaad shaqo heshid, oo ad si deg deg ah ula qabsatid noloshaada cusub ee Maraykanka.



ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib’udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Firi erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>Fadlan ku celi mar kale.</i>	Please say that again.	<i>Fadlan ku celi mar kale. Maan fahmin markii ugu horreysay.</i>
	Can you repeat that?	
	What does ____ mean?	
	Can you speak more slowly?	
	I don't speak English.	
	I don't understand...	
	Can you understand me?	

Af-Ingiriisiga si dhaqsi ah ayaad u baran kartaa haddii hammi weyn ad u haysid barashada afkaasi.



Ka fakir sababaha ay kartida la hadalka dadka kale faa'iido u tahay.

Luqadaheed ku hadashaa? Halkan ku qor:

Qof kale kala sheekeyso meelahaad ku isctimaali jirtey luqadahan markaad jootey dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo. Meelahaasi waxay noqon karaan guriga, suuqa, markaad meel u socotid ee ad bas raacaysid, iwm.




Ka firso su'aalahan:

- Luqadahaad ku hadashid sideed ku baratay?
- Maxaa ka mid ah siyaabaha ad ula xiriiri lahayd ama ula hadli lahayd dad ku hadla af ka duwan kaaga? Tusaale ahaan, maxaa ka mid ah siyaabahaad ula hadli lahayd dadka Maraykanka intaanad baran Af-Ingiriisiga?
- Intee in leeg oo Af-Ingiriisi ah ayaad hadda taqaannaa?



Miisaanka hose ku muuji heerka aqontaada Af-Ingiriisiga. 0 waa heer Af-Ingiriisi oo bilow ah (ama Ingiriisi eber ah), 5nna waa heer sare oo Af-Ingiriisi ah.



QIIMAYNTA AF-INGIRIISIGA

Ha werwerin haddii aanad wax Af-Igiriisi ah aqoon ka hor intaadan qaadan fasallo Af-Ingiriisi ah. Galaasyadu intaanay bilaabmin, waxa la qiimayn doona aqoontaada Af-Ingiriisiga. Qiimayntu waa imtixaan oo kale. Galaasyada Af-Ingiriisigu waxay leeyihiin heerar kala duduwan, bilow illaa heer sare, markaa qiimayntu waxay muujin doontaa heerkaaga. Qiimayntu waxay noqon karta mid hadal ah ama mid qoraal ah.

Fasallada Af-Ingiriisigu waxay ku kala duwanyihiin nooca Af-Ingiriisiga lagu baro. Fasallada qaar waxay baraan Af-Ingiriisi fudud oo dhaqangal ah, qofka cusubina u baahanyahay inuu barto si u bulshada u dhexmaro – sida dukaan wax ka gadasho, akhriska jadwalka baska, ama shaqo raadin. Kuwa kale waxay baraan Af-Ingiriisi shqooyin gaar ah looga baahanyahay – tusaale ahaan, shaqada huteellada ama caafimaadka. Waxa kaloo jira fasallo Af-Ingiriisi ah oo ardayda u diyaariya waxbarasho jaamacadeed. Fasalladan oo kale waxay waqti badan siiyaan akhriska and qoraalka.

MUHIIMADDA BARASHADA AF-INGIRIISIGA

Nadia markey timid Maraykanka, turjubaan ayey marwalba u baahneyd markay Dhakhtarkeeda u tagto. Taasi way ku adkeyd waayo maalinta keliya ee turjubaan dumar ah la heli karo waa maalinta Talaadada ah. Hadda, saddex sano ka dib Nadia keligeed ayay sameysataa ballamaheeda oo uma baahna turjubaan. Taasi waxay ka dhigan tahay in ay aadi karto Dhakhtarka maalintay rabto. Barashada Af-Ingiriisigu sidee buu Nadia u caawiyey? Maxaa ka mid ah siyaabaha aad Af-Ingiriisi ku hadalka leyli uga dhigan lahayd?

Af-Ingiriisiga waxaad si degdeg ah u baran kartaa markaad hammi weyn u haysid barashada afkaasi. Sababahan ayaa ka mid ah sababta barashada Af-Ingiriisigu muhiim u tahay.

- In shaqo la helo.
- In shaqada lagu guulaysto.
- Inaad fahamtid carruurtaada iyo kuwaad ayeeyda/awoowga u tahay waxay ku hadlayaan.
- Inaad la hadashid macallimiinta carruurtaada.
- Inaad madaxbannaanaatid: si ad u raacdid gaadiidka dadweynaha ood u soo adeegatid, qoyskaagana u soo adeegtid.
- Inaad dariskaaga la sheekeysatid.



Ku hadalka Af-Ingiriisiga ku barbaro dadka kale ee baranaya afkaa ama dadka hore u garanayay.

- Inaad kala socotid telefshinka, wargeysyada iyo internetka waxa adduunka ka dhacaya.
- Inaad ku najaxdid imtixaanka muwaaddininnimada si ad u noqotid muwaaddin Maraykan ah.

Naw Ku Af-Ingiriisiga waxay ku baratey shaqadeeda, laakiin ninkeeda, Soe Thu, wax yar buu ka yaqaannaa Af-Ingiriisiga. Markay ka qaybgaleen shirarka waalidiinta iyo macallimiinta ee iskuulka carruurtooda, Naw Ku ayaa u tarjunta Soe Tue wixii laga hadlayo. Hadda, labo sano ka dib, Soe Thu Af-Ingiriisigiisu wuu dhaama sidii hore oo isaga iyo Nau Ku-ba way ka hadli karaan shirarka waalidiinta iyo macallimiinta. Barashada Af-Ingiriisigu sidee bay Soe Thu u caawisey? Maxa ka mid siyaabaha u Soe Thu ku bartay Af-Ingiriisiga?



Maxay barashada Af-Ingiriisigu faa'iido kuugu leedahay Maraykanka gudhiisa? Meeshan hoose ku Sawir ama ku qor sababaha qaar.

Bhamba waa nin waayeel oo ay dhib ku noqotay barashada Af-Ingiriisigu. Wiilkiisa iyo gabadha uu qabaa labaduba way shaqeeyaan, ciyaalka uu awoowga u yahayna iskuul bay tagaan, markaa inta badan keligii buu joogaa. Bhamba muxuu sameyn karaa si uu Af-Ingiriisigiisu u roonaado?

SIYAABAHA AF-INGIRIISIGA LOO BARTO

Siyaabo badan oo ad Af-Ingiriisiga ku baran kartid ayaa jira. Waa kuwan qaar tusaale ah:

QAADO FASALLO LUQADDA INGIRIISIGA (oo badanaa loo yaqaan ESL ama Af-Ingiriisiga luqad labaad ahaan [English as a Second Language]). Fasallada ESL waxa wada fariista rag iyo dumar da' walba leh, heer waxbarasho kala duduwan leh, oo ka soo jeeda jinsiyado kala duduwan. Fasalka ESL ee heerka bilowga ah, ardaydu waxay inta badan ku bartaan Af-Ingiriisiga ay uga baahanyihiin inay wax kaga qabsadaan bulshada dhexdeeda iyo goobaha shaqada. Fasallada heerka sare, ardaydu waxay qaddarin dheeraad siyaan naxwaha Af-Ingiriisiga, akhriska iyo qorista.



Faadumo waxay bilowdey barashada Af-Ingiriisiga, laakiin weli waa ku dhib inay dadka shaqda la hadasho. Faadumo sidee bay ula xiriiri karta dadka kale iyadoo sii wadda barashada Af-Ingiriisiga?

WAX LA AKHRISO MACALLIN GAAR AH OOTABARRUCE AH. Tani waxa kalooy ku fiicantahay barashada dhaqanka iyo caadooyinka Maraykanka. Hay'addaada dib'udejinta weydii sidey kuugu xiri lahaayeen qof tabarruce ah.




DAAWO FILIMMO AF-INGIRIISI AH, bandhigyada telefshanka, ama ka dhageysa raadiyaha barnaamijyada Af-Ingiriisiga ah.

AF-INGIRIISI KULA HADAL DADKA KALE ee baranaya luqadda ama kuwa ku hadla Af-Ingiriisiga.



AKHRI QORAALLADA AF-INGIRIISIGA AH. Af-Ingiriisigu wuu kugu hareeraysanyahay: baakadaha cuntada korkooda, calaamadaha, xayaysiiska, basaska, iyo wargeysyada.

GOOBTA SHAQADA KU BARO AF-INGIRIISIGA. Markaad shaqo heshid, waxaad baran doontaa erayo iyo oraahyo Af-Ingiriisi ah oo kugu anfici doona shaqadaada. Waxaad la shqayn doontaa dad Af-Ingiriisi ku hadla, waxaana surtagal ah inaad yeelatid macaamiil ku hadla Af-Ingiriisi. Inaad iyaga la hadashid waxay kaa caawin doontaa inuu Af-Ingiriisigaagu fiicnaado.



**Dad ka kala yimi dacallada
adduunyada ayaa
Maraykanka kuwada dhigta
fasalada Af-Ingiriisiga.**


**Waxa dhici karta in ardayda ku
jirta fasalka Af-Ingiriisigu ay
khibrado kala duwan leeyihiin,
hase yeeshe waxay wada rabaan
hal shay: inay bartaan Af-Ingiriisi.**

KALA DUWANAANSHAHA DADKA KU JIRA FASALKA ESL

Fasalakaaga ESL-ka, waxaad ku arki doontaa rag iyo dumar ka kala yimid daafaha dunida oo kula baranaya Af-Ingiriisiga. Hiyikac ayay leedahay la kulanka dad cusub oo ku hadla luqado kala duduwan, dhaqankaaga qaar ka duwana leh.




Fiiri maabka adduunka ee hoos ku yaal. Goobaabi dalkaad ka soo jeeddid.





Haddana goobaabi meeshaad Maraykanka ka degi doontid.



Su'aalahan ka firso:

- Muhaajiriinta ku nool degaankaga cusub xaggee baad u malaynaysaa inay ka yimaaddeen?
- Maxaa ka mid ah waxyaabaha ad rabtid inaad wax ka ogaatid dadka kula dhigta fasalka?

Kala duwanaanshahani wuxuu caqabad ku noqon karaa macallimiinta iyo ardayda kale. Ardayda kala duduwan waxay lahaan karaan heer waxbarasho oo kala duduwan iyo yoolal kala duduwan oo ku aaddan barashada Af-Ingiriisiga. Ardayda qaar waxay noqon karaan dhallinyaro rabta inay Af-Ingiriisi ku filan bartaan si ay u aadaan jaamacad, qaar kalena waxay noqon karaan waayeel Af-Ingiriisiga u baranaya si ay keligood dukaanka ama dhakhtarka u aadaan. Ardayda qaar waxay noqon karaan dad waaweyn oo shaqo buuxda haysta oo ku jira fasallada si ay kor ugu qaadaan garashadooda Af-Ingiriisiga ama si ay ula hadlaan macallinka ilmahooda. Laakiin khibraddoodu waxay doonto ha ahaatee, ardayda oo dhan isku wax ayay rabaan: inay bartaan Af-Ingiriisiga.



Maalintii ugu horreeysey ee ay Briscilla u timid kalaaska Af-ingiriisiga, waxay aad ula yaabtey in ay aragto dad ka kala yimi meelo kala duwan. Weligeed ma ay arag dad sidaa u kala duduwan. Haddii aad Briscilla ahaan lahayd sidee baad dareemi lahayd? Kala duwanaansho kale oo u dhexeeya ardayda kalaaskeeda ee Briscilla ay arki doonto maxa ka mid ah? Haddaad ku jiri lahayd kalaaska Briscilla, maxaad samayn lahayd si aad ula qabsato isdhexgalka?



Ka fikir maalintii kugu horreysay fasallada Af-Ingiriisiga. Sideed isku bari lahayd dad sidan u kala duduwan? Waxaad dhihi kartaa:

- I come from _____ . **SOMALIA**
Waxaan ka imid _____ .
- I speak _____ . **SOMALI**
Waxaan ku hadlaa _____ .
- My family has _____ members. **8**
Qoyskaygu wuxuu ka koobanyahay _____ xubnood.
- I have been in the United States since _____ . **JUNE**
Maraykanka waxaan joogaa laga soo bilaabo bishii _____ .
- I would like to learn about _____ . **BUYING FOOD IN THE UNITED STATES AND TAKING THE BUS**
Waxaan rabaa inaan barto _____ .

ISTICMAALKA AF-INGIRIISIGA



Waxaad samaysataa shax ay ku dhigantahay markaad isticmaashay Af-Ingiriisiga, meesad ku isticmaashay Af-Ingiriisiga, waxaad tiri, iyo siday u shqaysay. Ma ku guulaysatay? Ma dhib baad kala kulantay? Labada ugu horreeya tusaale ahaan ayaa loo buuxiyay.

Taariikh; Saacadda	Meesha/ xaaladda	Waxaan iri	Natiijooyinka
Isniin, Maarj 19, 2012, 4:30 galabnimo	Waxan la hadlay macallinka wiilkayga	Haa, waan iman karaa iskuulka si an uga soo qaybgalo shirka maalinta Talaadada, Maarj 20keeda, saacaddu markay tahay 4:15 galabnimo.	Macallinku wuxuu u qaatay inaan iri 4:50 galabnimo. Waan sugay. Mushkilad ma ahayn.
Talaada, Maarj 20, 3:30 galabnimo	Waxan akhriyay jadwalka baska	Waxan arkay inuu jiro bas u baxaya iskuulka saacaddu markay tahay 3:05 galabnimo oo gaaraya iskuulka saacaddu markay tahay 3:59 galabnimo.	Waxan qaatay baska oo an iskuulka ku tagay waqtigii la rabay.

Af cusub barashadiisu waqti ayay qaadataa, qof kastaana wuxu ku bartaa muddo ka duwan qofka kale.

Isku carbi ku hadalka iyo dhageysiga Af-Ingiriisiga maalin walba wakhti cayiman.

BARASHADA LUQAD CUSUBI WAQTI AYAY QAADATAA

Inta hore, waxa dhici karta in barashada Af-Ingiriisigu kugu adkaado oo ad walbahaartid. Waa caadi inaad dareenkaa yeelatid. Qof kasta wuxuu wax ku bartaa waqti iyo hab ka duwan qofka kale. Dadka qaar waxay wax ku bartaan si dhaqsi

ah marka la barbar dhigo dad kale. Dadka qaar waxay wax bartaan markay ficil ahaan wixii u qabanayaan. Dadka qaarna waxay wax ku bartaan dhageysi ama akhris. Dadka qaar waxay jeclaan karaan inay waxoogaa sugaan intaanay hadlin. Dadka kalena waxay jecelyihiin inay ereyo cusub iyo oraahyada markiiba tijaabiyaan. Laakiin cid walba, barashada luqad cusubi waxay ku qaadataa waqti iyo dadaal.



Barashada Af-Ingiriisigu wuu adagyahay oo waqti ayuu qaadanayaa, laakin waa inaad layligiisa si waddaa!



Ka fikir siyaabaha qaar ee ad isku dayi lahayd inaad ku baratid Af-Ingiriisiga. Siyaabahan qof kale la wadaag.

Barashada luqad cusub waxa muhiim u ah in la joogteeyo ku hadalkiisa maalin walba. Xataa haddaad dhagaysatid raadiyaha ama daawatid telefishan ku hadla Af-Ingiriisi keliya toban daqiiqo maalintiiba way ku caawin kartaa. Waqtiga iyo joogtaynta ku hadalka waxaad ka heli kalsooni dheeraad ah si aad ugu hadashid Af-Ingiriisiga.

Isla markuu Resa yimid Maraykanka, wuxuu isku qorey kalaaska Af-Ingiriisiga. Ardaydu waxay kulmaan maalinta Talaadada iyo Khamiista fidnimo. kalaasku si fiican ayuu u socodey oo isaguna si wanaagsan ayuu wax u baranayey. Resa Shaqo ayaa la siiyey. Wuxuu shaqeyn doonaa Isniinta ilaa Sabtida laga bilaabo 4:00ta galabnimo ilaa habeen-barka. Waa maxay dhibaataada halkan taallaa? Maxay kula tahay Resa in uu sameeyo?



Waxaad dareemaysaa walbahaar ku aaddan barashada Af-Ingiriisiga, maxa ka mid ah waxyaabo miro dhal ah ood samayn kartid si ad u baratid luqaddan? Goobaabi waxyaabahaad samayn lahayd.

- Af-Ingiriisi kula hadal dadka kale ee ku hadla Af-Ingiriisiga.
- Daawo telifishanka ama dhageyso raadiyaha ku hadla Af-Ingiriisiga.
- Fasallo Af-Ingiriisi ah qaado.
- Af-Ingiriisi kula hadal dadka degaankaaga.
- Af-Ingiriisi kula hadal qof afkiisa hooyo yahay Af-Ingiriisi oo raba inuu barto afkaaga.
- Asbuuc kasta samayso yool ad ka soo bixi kartid.
- Erayada cusub ee ad baratid meel ku qoro.
- Iskuday inaad baratid Af-Ingiriisigaad hareerahaaga ku aragtid, calaamadaha waddada, guryaha korkooda, iyo dariishadaha dukaammada.



Maxay yihiin waxyaabaha kale ee kaa caawin kara inaad heshid kalsooni ad ku baratid Af-Ingiriisiga?



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Barashada Af-Ingiriisigu waa wax fudud oo dhaqsi ah.
 - a. Run.
 - b. Been.
2. Maxay muhiim u tahay in Af-Ingiriisiga la bartaa?
 - a. Si shaqo loo helo.
 - b. Si loogu najaxo imtixaanka qaadashada muwaaddininnimada Maraykanka.
 - c. Si loo madaxbannaanaado oo la isku-filnaado.
 - d. Si aad u fahamtid carruurtaada iyo kuwaad awoowga/ayeeyda u tahay markay Af-Ingiriisiga ku hadlayaan.
 - e. Dhammaan inta kor ku xusan.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaaqa A, bogga 224aad.

3. Waxa fure u ah barashada Af-Ingiriisiga, ku hadalkiisa oo la joogteeyo labo ama saddex jeer asbuuci.
 - a. Run.
 - b. Been.
4. Kuwee baa ka mid ah siyaabaha Af-Ingiriisiga loo barto?
 - a. Ka qaybgal kalaas Af-Ingiriisi ah.
 - b. Daawo filimmo iyo bandhigyada telefishinka oo Ingiriisi ah.
 - c. Joogtee Af-Ingiriisi kula hadalka qaxootiga kale ee iyaguna baranaya Af-Ingiriisiga.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan.
5. Waqtiga iyo joogteynta ku hadalka Af-Ingiriisigu waxay ku siin kalsooni dheeraad inaad Af-Ingiriisi kula hadashid dadka.
 - a. Haa.
 - b. Maya.



Cutubka Afar iyo Tobnaad WAXBARASHO

Maraykanka gudihiisa, waxbarashadu waxay u furantahay cid walba iyadoon loo eegin karti, dheddig/ labnimo, da', midab, diin, xagguu u janjeero hammiga ragga/dumarku (sexual orientation), ama mandaqad bulsho. Dadka Maraykanka badankoodu waxay aaminsanyihiin inay waxbarashadu tahay hab lagu helo shaqo fican, korna loogu qaado heerka nolosha.

Cutubkani wuxuu qeexi doonaa

- » Waxbarashada carruurta
- » Waxbarashada dadka waaweyn





ERAY BIXIN MUHIIM AH OO AF-INGIRIISI AH

Erayadan waxa la isticmaala marka laga hadlayo dib'udejinta Maraykanka. Erayadan inaad Af-Ingiriisi ku barataa way ku caawin doontaa.

Firi erayga Af-Soomaaliga ah, kuna dhawaaq tarjumaadda Af-Ingiriisiga. Ka dib sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal. Ka ugu horreeya tusaale ayuu kuu yahay.

Af-Soomaali	Af-Ingiriisi	Sawir erayga, qor micnihiisa, ama weedh u isticmaal.
<i>xaadirnimo</i>	attendance	<i>Xaadirnimadu waa sabab meel u joogid, sida iskuulka ama shir.</i>
	book	
	certificate	
	class	
	degree	
	diploma	
	education	
	math	
	reading	
	school	
	science	
	teacher	

Waxabarashada iskuullada dawliga ihi waa lacag la'aan. Dhammaan carruurta da'doodu tahay 6 illaa 16 jir waa inay aadaan iskuul.

Carruurtaada iskuul ku dar sida ugu dhaqsaha badan. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta iskuul ku daridda.



Ka fikir siday ku ahayd waxbarashada dadweyne (bulsho) dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Ma lacag bay ahayd?
- Intee buu iskuulku gurigaaga u jirey? Carruurtaadu siday ku aadi jireen?
- Ardaydu maxay iskuulka u qaadan jireen?
- Maxay ahaayeen maaddooyinka la bari jirey?
- Dugsi-maalmeedku meeqa saacadood ayuu ahaa?
- Dadka waaweyni iskuul ma tegi jireen?



Iskuulka dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo wax ka qor ama sawir.



Qof kale kala sheekeyso waxaad qortay amaba ad sawirtay. Waa leylis fiican oo ad u baahnaan doontid inaad qof Maraykanka jooga wax uga sheegtid iskuulka dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo!



WAXBARASHADA CARRUURTA

Waxabarashada dadweynuhu (bulsho) waa bilaash. Carruurta da'doodu u dhexayso 6 jir illaa 16 jir oo dhan waa qasab inay iskuul aadaan. Waxabarashada dadweyne waxay inta badan u furantahay carruurta da'doodu u dhexayso 5 jir illaa 18 jir. Waalindiintu waxay carruurtooda ku qori karaan iskuullo gaar ah, laakiin lacata lagu dhigtaa qaali ayay noqon kartaa.



Ka firso su'aalahan:

- Sannad-dugsiyeedku goormuu bilaabmi jirey oo u dhammaan jirey dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo?
- Ma qasab baa inay carruurtu iskuul aadaan?
- Waxabarashadu ma bilaash ayay u ahayd carruurtoo dhan?

Iskuullada Maraykanka waxa wada dhigta oo iskumeel kuwada ciyaara carruur leh midabbo, jinsiyado iyo luqado kala duduwan. Iskuullada badankooda, gabdhaha iyo wiilashu iskumeel ayay wax kuwada bartaan. Carruurta laxaadka la' iyo kuwa aanu dhammayn dhimirkoodu waxay leeyihiin xuquuq waxbarasho oo la mid ah kuwa carruurta kale.



Arale waxay lahayd labo gabdhood iyo wiil. Wiilkeedu wuxuu ku fadhiyaa kursiga curyaamiinta oo maskaxdiisu ma dhamma. Arale wadankeeda, ciyaalka curyaamiinta ihi iskuul ma tagaan, gabdhaha intooda badanina iskuul ma tagaan. Arale aad bay ula yaabtey markay ogaatey in ciyaalka oo dhammi ay iskuul tagaan. Haddii aad Arale ahaan lahayd, sideed dareemi lahayd? Yaad kala hadli lahayd dareenkaaga?

Waa muhiim inaad si degdeg ah carruurtaada iskuul ku dartid. Carruurtu badanaa waxay aadaan iskuul u dhow meeshay ku noolyihiin. Iskuullada badankoodu waxay u baahnaan doonaan inay arkaan diwaanka tallaalka iyo caafimaadka ilmahaaga. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta arrimahan. Haddi u ilmahaagu leeyahay diiwaan caafimaad ama iskuul, hore ugu soo qaad Maraykanka.

Ardaydu hadday ka baaqdaan iskuulka, waalidiintu waa inay farriin qoraal ah ku sharaxaan sababaha kallifay.

Maraykanka waxa ka jira afar heer oo waxbarashada carruurta ah:

DUGSIGA KA HOR

Heerakan waxa dhigata carruurta da'doodu u dhexayso 3 illa 5 jir. Sharciyan qasab maaha, badanaana bilaash maaha.



DUGSIGA HOOSE

Heerkani wuxuu ka bilaabmaa kindergaartanka (5 jir), waaxaanu socdaa illaa fasalka 5aad ama 6aad (12 jir).



DUGSIGA DHEXE

Heerkan waxa badanaa ku jira fasallada 6aad illaa 8aad (12 illaa 14 jir).



DUGSIGA SARE

Heerkan waxa badanaa ku jira fasallada 9aad illaa 12aad (14 illaa 18 jir). Ardayda dhammaysa heerkan waxa la siiyaa shahaado (diblooma) dugsi sare.



SANNAD-DUGSIYEEDKA

Sannad-dugsiyeedku wuxuu bilaabmaa bisha Ogosti ama Seteembar, waxaanu dhammaada bisha Meey ama Juun. Ardayda badankoodu waxay fasallada ku jiraan 6 saacadood maalintiiba, Isniinta illaa Jimcaha. Ardayda u baahan inay la qabsadaan fasalladooda waxay dhigan karaan iskuullada xilliyada xagaaga, bilaha Juun iyo Julaay.

XAADIRNIMO

Iskuul-iska-xaadirintu waa muhiim. Markay ardaydu ka baaqdaan iskuulka, waalidiintu waa inay qoraal ku sharaxaan sababaha, ardayduna waa inay gudaan shaqada iskuulka ee ay gafeen.

Gabadha Isabel iskuulka dhibaato ayaa ka haysata. Maalin maalmaha ka mid ah waxay Isabel gabadheeda ka reebtey iskuulka si ay guriga ugu nasato. Barqadii ayaa iskuulka laga soo wacay si ay Isabel ugu sheegaan in gabadheedu iskuulka aaney iman maalintaa. Isabel way jahawareertay. Iskuulka way u sheegtey in ay gabadheeda guriga ku reebtey maalintaa. Iskuulku muxuu u soo wacay? Waa maxay dhibaata ay keeni karto inay Isabel gabadheeda guriga ku reebto? Isabel maxay u baahneyd inay samayso si ay isaga ilaaliso arrintan?

KHARASHKA LA XIRIIRA ISKUULKA

Inkasoo waxbarashada dadweynuhu bilaash tahay, haddana waalidiintu kharash ayay galaan, sida agabka iskuulku u baahanyahay (qalmaan, buugaag, iwm) iyo lacagaha dhaqdhaqaaqyada gaarka ah (isboortiga oo kale). Carruurta waxay iskuulka u qaadan karaan qadadooda ama waxay kaafateeriyaha iskuulka ka iibsaa karaan qado jaban oo nafaqo leh.



Arjun gabadhuu dhalay, Sonam, oo 10 jir ah ma jecla qadada u Arjun u diyaariyo si ay iskuulka ugu qaadato, waayo cuntada ay qaadato way ka duwantahay cuntada Sonam asxaabteedu soo qaataan. Ciyaalka qaar ayaa ku qosla Sonam cuntadeeda. Sonam waxay rabtaa in ay gadato qadada kaafateeriyaha iskuulka. Haddii aad ahaan lahayd Arjun, maxaad dareemi lahayd? Arrintan maxaad ka qaban lahayd?



Maxay ahaayeen kharashyada qoysasku ka bixiyaan iskuullada dadweynaha ee dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo?

Carruurta qaar waxay deggenyihiin meel u dhow iskuulka oo ay uga lugayn karaan.

Badanaa iskuulladu waxay leeyihiin fasallo gaar ah oo luqadda Af-Ingiriisiga ay ku bartaan carruurta aan Af-Ingiriisi badan aqoon.

GAADIIDKA

Ardayda qaar waxay ku noolyihiin meel dhow oo ay iskuulka uga lugayn karaan. Haddii u iskuulku ka fogaahay gurigaaga oo aanu ilmahaagu u lugayn karin, basaska iskuulku waxay bilaash ku geyn karaan iskuulka. Iskuulka ayaa go'aamin doona masaafadda u baahan gaadiid lacag la'aan ah.



MANHAJKA

Manhaj qarameed kama jiro Maraykanka. Gobol kasta, iskuullada degmada, ama iskuulka laftiisa ayaa wixii la bari lahaa go'aanka iska leh. Ardaydu waxay badanaa bartaan Af-Ingiriisi, xisaab, aqoon-bulsho (social studies), iyo saynis. Maaddooyin dheeraad ah, sida farshaxanka, muusigga, jir dhiska, iyo luqadaha ajnabiga ayaa surtagal ah in iyagana la bixiyo.

HABKA WAXBARIDDA MARAYKANKA

Maraykanka gudhiisa, macallimiintu waxay carruurta ku dhiirigeliyaan inay wax ku bartaan fikir, falanqeyn, wax su'aalid, iyo ka qaybgelidda doodaha iyo hawlaha.



Hanan waxay dhageysatey gabadheeda iyo wiilkeeda oo ka hadlaya iskuulkooda cusub, wayna ku wareertay. Wax barasho nooc ah ayay carruurteedu baranayaan? Macallinku hadal badan ma oranyo, oo carruurta ayaa laga filayaa su'aalo badan inay warsadaan oo ay ra'yigoodana ka dhiibtaan. Waxay khilaafi karaan macallinka iyo buugga ay wax ka baranayaan! Meesha ay ka dhagaysan lahaayeen macallinkana, waxay waqti badan siiyaan inay hawl lawadaagaan asxaabtooda. Habkan waxbarasho sidee buu uga duwanyahay habka ay macallimiintu wax ugu baraan dalkaaga hooyo ama dalkaaga magangelyo? Halkee ayay iskaga mid yihiin? Maxaad u malaynaysaa oo ay macallimiinta Maraykanku habkan u isticmaalaan? Maxay Hanan samayn kartaa si ay u faham kororsato waxyaabaha ka dhacaya kalaasyada carruurteeda?

BARASHADA AF-INGIRIISIGA

Iskuullada badankoodu waxay leeyihiin fasallo Af-Ingiriisi gaar ah oo ay ugu talagaleen dadka cusub. Iskuullo kalena macallin gaar ah ayay ardayda ku caawiyaan.



Maalinbaa Fictoria laga soo wacay iskuulka si loogu sheego in wiilkeeda Josef marar badan iskuulka ka soo daahay. Josef markii uu iskuulka ka yimid, Fictoria waxay weydiisey iskuulku siduu u ciqaabey. Josef wuxuu u sheegey in uu u tagey maamulaha iskuulka una micneeeyey sababaha uu iskuulka uga soo daahay. Fictoria way wareertay. Waxay dareentey in aan wiilkeeda la ciqaabin haba yaratee. Ardayga sidee loo ciqaabaa wadankaaga ama dalkaaga magangelyo? Haddii aad Fictoria ahaan lahay, dareenkaaga xaaladdan ku aaddan sidee buu ahaan lahaa? Sidee baad u maareyn lahayd?

LA QABSASHO

Inta badan, ardayda cusub waqti ayay ku qaadataa inay la qabsadaan, gar ahaan sannadka ugu horreeya iskuulka. Inta hore carruurta waxay dareemi karaan kelinnimo, laakiin isla marka Af-Ingiriisigoodu sii ficnaado waxay yeeshaan saaxiibbo, oo waxay iskuulka ku dareemaan nafis.



Su'aalahan ka firso oo ku aaddi carruurtaada:

- Maxaad u malaynaysaa caqabadaha ay carruurtaadu kala kulmi karaan la qabsashada hannaanka iskuulka Maraykanka?
- Sideed carruurtaada uga caawin kartaa caqabadahan?

DABEECADAHA CAADIGA AH EE ARDAYDA MARAYKANKA

Arday badan oo cusub iyo waalidiintoodu waxay la yaabaan dabeecadda dabacsan iyo hab labbiska ardayda Maraykanka. Dugsiyada dadweynaha ee Maraykanku waxay siiyaan ardayda xormino go'aan, laakiin waxa laga rabaa inay u hoggaansanaadaan xeerka iskuulka. Haddi ay jabiyaan xeerka, waxa dhici karta in ardayda lagu ganaaxo inay iskuulka sii joogaan markuu dhammaado kadib ama in iskuulka laga eryo dhowr maalmood. Maraykanka lagama oggola ciqaab jirka ah.

Macallimiinta Maraykanku waxay aaminsanyihiin in loo baahanyahay waalidiintu inay la socdaan waxbarashada carruurtooda.



Ka fikir hab-dhaqanka carruurta ee iskuullada dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Ma direys bay xiran jireen?
- Su'aalo ma weydiin jireen, koox ahaan ma u wada shaqayn jireen, mise macallinka ayay maalinta badankeeda dhageysan jireen?
- Ardaydu ma dhadhaqaaqi (soc socon) jireen, mise badanaa maalintii oo dhan waxay ag fadhiyi jireen miisaskooda?

CAQABADAHA ISKUULKA

Iskuullada qaar, khaasatan kuwa waaweyn ee ku yaal magaalooyinka waaweyn, waxay qabaan dhibaatooyin la xiriira dhallinyarta gaang ku jirta iyo dagaallo dhexmara kooxo midabbo ama jinsiyado kala duduwan leh. Meelaha qaarkoodna waxa jira dhibaatooyin la xiriira ardayda isticmaasha daroogada, oo iskuulka keena hub. Ilmuhu haddii u dareemo inay khatari kaga soo socoto qof, waa inuu qofkaa ka fogaadaa oo waa inuu si degdeg ah ula hadlaa macallin ama talo-bixiyaha iskuulka.

Haddii ad u malaynaysid carruurtaadu inay u baahanyihiin caawimaad ku saabsan arrin iskuulka la xiriirta, kala hadal qof iskuulka ka shaqeeya!





Qof kale kala sheekeyso sawirka ku xusan bogga 206 oo ah fasal dugsi hoose oo caadi ka ah Maraykanka.

- Maxaa isku mid ah ee ad arkaysaa oo ka dhexeeya fasalka Maraykanka iyo kii dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo?
- Maxay ku kala duwanyihiin?
- Maxaad u malaynaysaa isku ekaanshaha iyo kala duwanaanshani inay ka fashirayaan carruurtaadu siday ula qabsan lahaayeen Maraykanka?

KU LUG-LAHAANSHAHA WAALIDKA EE WAXBARASHADA CARRUURTA

Barayaasha Maraykaynku waxay aaminsanyihiin inay waalidiintu ku lug-laahaadaan waxbarashada carruurtooda, waayo waxay ka caawin kartaa inay carruurta ku guulaystaan iskuulka. Iskuulladu waxay isku dayaan inay caawiyaan waalidiintu inay fahmaan waxbarashada carruurtooda, qaar badanina waxay macluumaad badan siiyaan waalidiinta aan ku hadlin Af-Ingiriisiga.



Ka fikir kaalinta waalidiinta ee dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo.

- Sidee bay waalidiintu ugu lug-laahaayeen?
- Waalidiintu ma booqan jireen iskuulka? Ma ka caawin jireen shaqada iskuulka ee guriga loo soo qaato?
- Ma caadi bay ahayd in lala hadlo macallimiinta ama maamulayaasha? Ama lala kulmo macallinka?

SHIRARKA WAALIDKA IYO MACALLINKA

Iskuulka ayaa qaban qaabin doona shirarka waalidka iyo macallinka si ad wada hadal ku saabsan horumarka carruurtaada ula yeelatid macallimiinta. Haseyeeshe, waad codsan kartaa inaad la kulantid macallimiinta carruurtaada markasta oo ad su'aalo ama werwer qabtid.



Ameerikaanka badankoodu waxay aaminsanyihiin waxbarashadu inay tahay geedisocod nololeed.



Goobaabi sawirradan hoose kuwa tusaya siyaabaha ad lug-ugulahaan kartid waxbarashada carruurtaada.



Carruurta u lugaysii baska ama iskuulka.



Carruurtaada kala shaqee shaqada iskuulka ee ay guriga u soo qaataan.



U raac safarka dibadbaxa ilmahaaga.



Ka qaybgal kulammada waalidka iyo macallinka ama habeenka waalidiinta ee iskuulka.



Carruurtaada dhageyso markay ka hadlayaan iskuulkooda oo su'aalo weydii.



Tabarruc wakhtigaaga si aad u caawisid galaasyada carruurtaada ama xilliga qadada ama bareegga.



La hadal macallinka ama maamulka iskuulka.



Ka caawi hawlaha ka baxsan galaaska ama kooxaha isboortiga ee iskuulka.



Hadal ka jeedi galaaska carruurtaada oo uga sheekee dalkaagii hooyo.



Ku biir ururka waalidiinta iyo macallimiinta ama ka qaybgal shirarka guddiga iskuulka.



Ka qaybqaado dhacdooyinka khaaska ah, hawalaha, ama lacag ururinta.

Waxyaabaha kor ku xusan oo dhammi waa siyaabo wanaagsan oo ad ugu lug-lahaan karaysid waxbarashada carruurtaada.

Macallimiinta carruurtaada kala hadal sidaad uga qayb qaadan lahayd waxabarshadooda!



Ka fiiro waxaad baratay ee ku saabsan iskuullada Maraykanka. Sawir ama qor kala duwananshaha ay leeyihiin iskuullada dalkaagii hooyo ama waddankaaga magangelyo iyo kuwa Maraykanka.

WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN

Dadka Maraykanka badankoodu waxay u arkaan waxbarashadu inay tahay wax dadku ku kifaaxi karaan noloshooda oo dhan, dad waaweyn oo badanina waxay marba isku qoraan fasallo. Waxay sii wataan shaqadooda buuxda, waxaanay isku qoraan fasallada habeenkii ama dhammaadka asbuuca.

Sidaas oo kale ayay qaxootiguna u sii wadan karaan waxbarashadooda iyagoo shaqeynaya. Hay'addaada dib'udejinta ayaa kaa caawin doonta helidda fursadaha waxbarasho ee degaankaaga, laga bilaabo fasallo Af-Ingiriisi ah iyo waxbarasho diblooma dugsi sare illaa tababarro xirfadeed iyo mid baroofishanaal ah. Way ficantahay in la haysto tababar dhaafsiisan dugsi sare, sida sertifiiked ama diblooma.

Farax waxay meel dhigatey lacag ay ku dhigato koolejka bulsho ee degaankeeda ku yaala. Laakiin kalaasyada ay rabto waxa la bixiyaa fiidkii markey ku maqantahay shaqada. Farax maxay sameyn kartaa?

Tacliinta sare waxay noqon kartaa waxaan la goyn karin.

Waa kuwan fursado waxbarsho dadka waaweyn oo ad ka heli kartid degaankaaga:

LUQADDA INGIRIISIGA IYO FASALLO WAX QORID IYO WAX AKHRIS AH.

Fasalladani waxay kaa caawin barashada Af-Ingiriisiga. (Eeg Cutubka 13 si ad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fasallada Af-Ingiriisiga uga heshid.)



FASALLO KALE OO LOOGU TALAGALAY DADKA WAAWEYN. Barnaamijyada waxbarashada dadka waaweynina waxay bixiyaan fasallo loogu talagalay bulshada guud ahaan. Maaddooyinka waxa ka mid ah xisaabxirka, xirfadaha xoghaynta, xirfadaha kambiyuutarrada, iyo luqadaha ajnabiga.

FASALLADA DIYAARINTA DIBLOOMAHA HORUMARINTA WAXBARASHADA GUUD (GENERAL EDUCATIONAL DEVELOPMENT [GED]). Fasalladani waxay dadka waaweyn ee aan dhammaystirin dugsiga sare fursad u siiyaan inay qaataan diblooma dugsi sare. Dadka waaweyn ee qaxootiga ah ee aan waxbarasho dugsi sare waddankooda ku helin, ama aan haysan shahaado dugsi sare, waxay geli karaan waxbarasho ay ku qaataan diblooma GED ah.

ISKUULLADA XIRFADDA IYO FARSAMADA. Iskuulladani waxay dadka u tababaraan shaqooyinka xirfadda u baahan, sida makaanigga baabuurta, qoridda barnaamijyada kambiyuutarrada, kalkaaliye caafimaad ama kalkaaliye dhakhtarka ilkaha. Iskuulladani waxay ardayda ka qalin jabisa siiyaan sertifiikeedyo (certificates) ee ma bixiyaan diblooma.

Moe Win wuxuu ahaa makaanig markii uu wadankiisa joogey. Maraykanka gudihisa wuxuu ku aqbalay shaqadii ugu horreysay ee u helo oo ahayd raseynta alaabada dukaanka. Moe Win wuxuu ogaadey inuu jiro barnaamij tababara makaanigga, laakiin waa in uu shaqeeyaa saacado aan buuxin inta uu wax baranayo. Haddii aad ahaan lahayd Moe Win, maxaa ka mid ah waxaaybahaad ka fakari lahayd si aad go'aan u gaadhid?

KULLEEJOOYINKA IYO JAAMACADAHA.

Maraykanka waxa ka jira laba nooc oo tacliinta sare ah: Kulleejooyinka Bulsho (community colleges) (oo bixiya barnaamijyo laba sannadood ah) iyo kulleejooyinka 4-sano iyo jaamacadaha. Galiddoodu waa wax dhib badan oo qaali noqon kara, waqtina qaadan kara.



Kulleejooyinka bulshadu lacag badan maaha, laakiin kulleejooyinka 4ta sano aad ayay qaali u noqon karaan. Inta badan kulleejooyinka iyo jaamacaduhu waxay leeyihiin xafiisyo gaar ah oo u qaabilsan macluumaadka deeqaha waxbarasho ee ardaydu u baahanyihiin. Ardayda badankoodu waa inay iska bixiyaan kharashka noloshooda.



Goobaabi fursadaha waxbarasho ee ku taxan boggi hore ee ad adiga ama qof qoyskaaga ka tirsani xiiso u hayn karo.



Sideebay fursadaha waxbarasho ee Maraykanku adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan faa'iido ugu leeyihiin?



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Waxbarashada iskuullada dadweynaha (bulsho) ee Maraykanku ma lacag la'aan baa?
 - a. Haa.
 - b. Maya.
2. Guud ahaan habkee ayaa ka mid ah hababka wax loo baro carruurta Maraykanka?
 - a. Su'aalo weydiin.
 - b. Wada hadal.
 - c. Qudbado dhaadheer.
 - d. a iyo b.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaafa A, bogga 224aad.

3. Dhammaan iskuullada dadweynaha ee Maraykanku waxay faraan ardayda inay xirtaan direys.
 - a. Run.
 - b. Been.
4. Saaxiibaddaadu waxay ka sheexdaa inay tagto iskuulka ilmaheeda oo ay ka qaybgasho shirarka waalidka iyo macallinka, waayo Af-Ingiriisi kuma hadasho. Iyadoo sidaa ay tahay, miyay iska aaddaa shirka?
 - a. Maya, waa inay horta Af-Ingiriisiga barataa inta aanay la kulmin macallimiinta ilmaheeda.
 - b. Haa, uma baahna inay ku hadasho Af-Ingiriisi badan si ay uga qaybgasho shirka, waayo iskuullada badankoodu waxay bixiyaan macluumaad loogu tala galay waalidiinta aan Af-Ingiriisiga ku hadal.
5. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin inaad wax baran kartid keliya markaad dhallinyartahay.
 - a. Run.
 - b. Been. Dadka Maraykanku waxay aaminsanyihiin inaanad abid ka weynaanayn barashada wax cusub.

15



Cutubka Shan iyo Tobnaad GEEDDIGA DHEER

Dib'udegiddu waxay qaxooti badan ku tahay hab muddo dheer qaata oo caqabado leh, laakiin haddii ad samir iyo niyadsami leedahay, degaankaaga cusub waxaad ku heli kartaa nolol fiican oo nafis ah. Qaxooti badan ayaa wax walba ka soo tagay si ay dib uga bilaabaan Maraykanka. Hadda waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, guryo ay iska leeyihiin ayay ku jiraan, oo way baayacmushtaraan. Laakiin xasuusnoow caqabado badan ayaa kaa horreeya, fursado badanina way ku sugayaan.





Cutubka 1aad, waxaad ku tilmaantay waxayaabaha ad maqashay ee ku saabsan Maraykanka. Maxaa run ahaa? Maxaa been ahaa? Hadda maxaad ka sheegi kartaa nolosha Maraykanka?



Ku noqo bogga 8aad oo dhammaystir layliga.

Sidaad aragtid hadda, waxa jira waxyaabo badan oo u baahan in laga fikiro, oo laga fiirsado: lashaqeynta hay'addaada dib'udejinta iyo isticmaalka adeegyada kale ee bulshada, barashada Af-Ingiriisiga, helidda shaqo dabooli karta baahidaada iyo ta qoyskaaga, maareynta dhaqan cusub, sii wadidda waxbarasho, fahamka iyo isticmaalka nidaamka daryeelka caafimaadka, meelo aadid adoo xor ah, ku noolaansho guri iyo degaan nabad ah oo nafis ah, barashada dalka Maraykanka iyo ku dhaqanka xuquuqhaaga iyo waajibaadkaaga ... waa taxane aan dhammaan.

Waxa ku sugaya waxyaabo badan oo cusub iyo mustaqballo yididdiilo leh!



Shaxda hoose, meesha dhexe buuxi adigoo sawir ahaan ama qoraal ahaan ra'yigaaga iyo jawaabaha su'aalahan ka dhiibanaya.

	Taariikhdu maxay tahay maanta? _____	6–12 bilood ka dib markaad shaxdan wax ku qortay, taariikhdu maanta maxay tahay? _____
1. Maxay yihiin yoolalkaaga iyo muhiimadahaaga kowaad bisha kuugu horreysa Maraykanka?		
2. Maxay yihiin yoolalkaaga iyo muhiimadahaaga kowaad lixda bilood ee kuugu horreeya Maraykanka?		
3. Maxay yihiin yoolalkaaga iyo muhiimadahaaga kowaad sannadka kuugu horreeya Maraykanka?		
4. Maxay yihiin yoolalkaaga iyo muhiimadahaaga kowaad labada sannadood ee kuugu horreeya Maraykanka?		
5. Maxay yihiin yoolalkaaga mustaqbalka fog?		



Lix bilood ama sannad marka laga joogo hadda, dib ugu soo noqo shaxda ku tall bogga 216. Fiiri heerka ad maraysid oo buuxii meesha midigta xigta. Ka fikir waxyaabahan:

- Yoolkaagu siduu isku beddelay?
- Markii ugu horreysay ee ad buuxisay shaxdan, dareenkaaga ku aaddan dib'udegiddu siduu ahaa?
- Dareenkaagu siduu yahay hadda?
- Maxaa isbeddel ah oo ku dhacay dareenkaaga dib'udegidda?

Inaad maskaxda ku haysid farrimahani waxay kaa caawin doontaa inaad yeelatid khibrad fiican oo ku aaddan dib'udejinta:

- ISKUFILNOOW.** Door firfircoon oo ad ku yeelatid dib'udejintaadu waxay kaa caawin doonta laqabsi fiican.
- BARO AF-INGIRIISIGA.** Ku hadalka Af-Ingiriisigu wuxu kaa caawin doonaa inaad si toos ah ula hadashid dadka kaa agdhow, fursadna kuu siin doonaa inaad codsatid adeegyadaad u baahantahay.
- AQBAL SHAQADA UGU HORREYSA EE LAGU SIIYO.** Lahaanshaha shaqo, xataa haddaanay ahayn middaad ku takhasustay, waxay kaa caawin doontaa inaad lacag heshid, meelna dhigatid si aad noloshada iyo ta qoyskaagaba si degdeg ah u dabbartid.
- LA SHAQEE HAY'ADDAADA DIB'UDEJINTA.** Shaqaalaha hay'adda dib'udejintu waxay caawiyeen qaxooti badan oo kaa horreeyay inay ku guulaystaan degaannadooda cusub. Waxay leeyihiin aqoon iyo khibrad ay kula shaqeeyaan qaxootiga, markaa waan inaad si fiican u dhageysataa waxay kuu sheegaan, oo waa inaad la wadaagtaa werwerkaaga iyo rajooyinkaagaba.



Dad badan oo kaa ag dhow ayaa raba inay arkaan adigoo guulaystay. Dadkan waxa ka mid ah qoyskaaga, dadka degaankaaga, iyo hay'addaada dib'udejinta.

Waxaad taagero ka haystaa dad badan. Waxay rabaan inaad guulaysatid!



Meesha hoose ku sawir geedisocodka dib'udejintaada.

<p>Markaan yaraa ee an joogay dalkaygii hooyo ...</p>	<p>Anigoo qof weyn ah oo jooga dalkaygii hooyo ...</p>
<p>Anigoo jooga waaddankayga magangelyo ...</p>	<p>Bisha iigu horreysay Maraykanka ...</p>
<p>Sannadka iigu horreeyay Maraykanka ...</p>	<p>Shanta sannadood ee iigu horreeyay Maraykanka ...</p>



GABAGGABO*

Dooro jawaabaha ugu habboon ee su'aalahaan hoose adigoo calaamadaynaya jawaabta saxda ah. Tusaale ahaan:

Afka ay dadka Maraykanka badankoodu ku hadlaan waa kee?

- a. Af-Shiin.
- b. Af-Ingiriisi.
- c. Af-Jarmal.

Dadka Maraykanka badankoodu waxay ku hadlaan Af-Ingiriisi, markaa jawaabtu waa b. Af-Ingiriisi

1. Sidee baad u noqon kartaa qof iskufilan?
 - a. Shaqo hel.
 - b. Su'aalo weydii marka aanad wax fahmin.
 - c. Meelaha kuu dhowdhow indha indhee, sida subbarmaarketka maxaliga ah ama maktabadda.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan ama mid ka mid ah.
2. Hoos waxa ku qoran siyaabaha ad u joogteyn kartid ku hadalka Af-Ingiriisiga. Kee baad u malaynaysaa inuu ugu dhib yarahay?
 - a. Dhigo fasallo Af-Ingiriisi ah.
 - b. Wax la akhriso qof tabarruce ah.
 - c. Daawo barnaamijyada telefishinka ama filimmo Af-Ingiriisi ah.
 - d. Joogtee ku hadalka, akhriska, ama dhageysiga Af-Ingiriisiga maalin walba 10 daqiiqo.

* Jawaabaha oo sax ah waxay ku yaallaan Lifaqa A, bogga 224aad.

3. Maxay muhiim u tahay inaad aqbashid shaqada ugu horreysa ee lagu siiyo?
 - a. Waxa dhici karta inaan shaqo kale lagu siin in muddo ah.
 - b. Si ad u caawiso qoyskaaga.
 - c. Si ad iskaga bixisid kharashkaaga.
 - d. Dhammaan inta kor ku xusan ama mid ka mid ah.
4. Hoos waxa ku qoran siyaabaha ad ula shaqeyn kartid hay'addaada dib'udejinta. Kee baad u malaynaysaa inuu ugu muhiimsanyahay?
 - a. Waqtiga ballanta ku imoow.
 - b. Su'aalo weydii.
 - c. Si fiican u dhageyso waxay ku sheegayaan shaqaalaha hay'adda dib'udejintu.
 - d. Shaqaalaha hay'adda dib'udejinta la wadaag werwerkaaga, cabsidaada, iyo rajooyinkaaga.

FURAHA JAWAABAHA

CUTUBKA 1

- » GABAGGABO—bogga 12: 1. Run 2. Run 3. Been 4. Run 5. Run
6. Been 7. Run 8. Been 9. Run 10. Run 11. Run 12. Run

CUTUBKA 2

- » GABAGGABO—bogga 24: 1. b 2. e 3. e 4. c 5. b

CUTUBKA 3

- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA—bogga 34: 1. a 2. c 3. b
- » GABAGGABO—bogga 41: 1. a 2. b 3. e 4. b 5. d 6. b

CUTUBKA 4

- » GABAGGABO—bogga 55: 1. Run 2. Been 3. Been 4. Run 5. Run
6. Been

CUTUBKA 5

- » LAYLIGA NOOCYADA GURYAHA—bogga 59: 1. b 2. d 3. a 4. c
- » LAYLIGA NABADGELYADA GURIGA—bogga 63: 1. d 2. c 3. a 4. e 5. b
- » GABAGGABO—bogga 66: 1. d 2. a 3. d 4. d 5. b

CUTUBKA 6

- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA ADEEGYADA GURMADKA DEGDEGGA—bogga 74:
1. c 2. a 3. b
- » LAYLIGA XAALADDA GURMADKA DEGDEGGA AH—bogga 74:
1. Haa, codso dabdemis. 2. Maya. Waxa ka habboon in la waco gabadha waalidkeeda ama gurigooda la tago oo arrinta lagala hadlo. 3. Haa, codso ambalaas. 4. Maya. Haddii aanad arkin dab ka dib markaad si fiican u hubisay, waxay u badantahay inaad beetariga ka beddeshid aaladda dabka sheegta. 5. Haa, codso booliiska. 6. Maya. Haddii ad adigu guriga si ammaan ah ugu maareyn kartid, sida tusaalahan oo kale, looma baahna in la waco 911.
- » GABAGGABO—bogga 78: 1. d 2. b 3. b 4. a 5. a

LIFAAQA A

CUTUBKA 7

- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA CALAAMADAHA TARAAFIKADA —bogga 85:
1.c 2.e 3.b 4.a 5.d
- » GABAGGABO—bogga 88: 1.e 2.a 3.d 4.a 5.e

CUTUBKA 8

- » LAYLIGA 1AAD EE ISWAAFAJINTA XAALADO CAAFIMAAD—bogga 95:
1.b 2.a 3.b 4.a 5.c 6.c
- » LAYLIGA 2AAD EE ISWAAFAJINTA XAALADO CAAFIMAAD—bogga 96:
1.b 2.c 3.a
- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA CALAAMADAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA—bogga 97:
1.f 2.a 3.d 4.b 5.c 6.e
- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA CAYMISKA—bogga 98: 1.b 2.a 3.a
- » LAYLIGA CUNTADA U ROON CAAFIMAADKA—bogga 102:
Cuntada u roon caafimaadka (goobaabi): b c e g j k
Cuntada aan u rooneyn caafimaadka (istallaab saar): a d f h i
- » GABAGGABO—bogga 106: 1.a 2.e 3.a 4.e 5.b

CUTUBKA 9

- » LAYLIGA BAAHIDA IYO RABITAANKA—bogga 114:
Waxyaabaha qoyskaagu u baahnaan karo (goobaabi):
a b d e g h k l
Waxyaabaha qoyskaagu aanu u baahnayn, laakiin rabi karo (istallaab saar):
c f i j
- » LAYLIGA CASHUURAHA—bogga 118:
Waxyaabaha ay cashuuruhu maalgeliyaan (goobaabi): a b e h
Waxyaabaha aanay cashuuruhu maalgelin (istallaab saar): c d f g
- » GABAGGABO—bogga 124: 1.d 2.b 3.e 4.b 5.a

CUTUBKA 10

- » GABAGGABO—bogga 142: 1.a 2.e 3.a 4.e 5.d

CUTUBKA 11

- » LAYLIGA XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA SHARCIGA SOCDAAL EE LAGU JOOGO—
bogga 157:
 - **XUQUUQDA:**
 - Dalbasho isku keenid qoyska:** Dhammaan (Qaxooti, sharci degganaansho rasmi ah, muwaaddin)
 - Dalbasho caawimo dadweyne (bulsho):** Dhammaan
 - Iskuul aadid iyo shaqo tegid:** Dhammaan
 - U safrid si xor ah Maraykanka gudahiisa:** Dhammaan
 - U safrid Maraykanka dibeddiisa fasax la'aan:** Sharci degganaansho rasmi ah, muwaaddin
 - Codeyn:** Muwaaddin
 - **WAAJIBAADKA:**
 - Ogsoonaan iyo u hoggaansanaan sharciga:** Dhammaan
 - Bixinta cashuuraha:** Dhammaan
 - Iska diiwaangelin adeegga ciidan haddii ninka muwaaddinka ay da'diisu u dhexeyso 18 illaa 25 jir:** Dhammaan
 - In la xaqdhawro xuquuqda dadka kale:** Dhammaan
 - Gudasho shaqo guddi ah garsoor (jury) maxkamadeed:** Muwaaddin
 - Daryeelidda iyo baahi-tirtka carruurtaada:** Dhammaan
- » GABAGGABO—bogga 159:
 - 1. Run 2. Run 3. Been 4. Run 5. Been 6. Run 7. Run 8. Been

CUTUBKA 12

- » LAYLIGA ISWAAFAJINTA NOOCA SHAQOYINKA—bogga 163: 1. b 2. c 3. a
- » GABAGGABO—bogga 182:
 - 1. Run 2. Been 3. Run 4. Run 5. Run 6. Run 7. Run 8. Been

CUTUBKA 13

- » GABAGGABO—bogga 196: 1. b 2. e 3. a 4. d 5. a

CUTUBKA 14

- » GABAGGABO—bogga 212: 1. a 2. d 3. b 4. b 5. b

CUTUBKA 15

- » GABAGGABO—bogga 219: 1. d 2. Mid kasta ama dhammaan 3. d 4. Mid kasta ama dhammaan

GLOSSARY-GA WEEDHAHA DIB'UDEJINTA LOO ISTICMAALO

Weedhahani waxay la xiriiraan dib'udejinta qaxootiga Maraykanka gudihisa.

CAYMISKA BAABUURTA (CAR INSURANCE): Heshiis maaliyadeed oo ka dhexeeya shirkadda caymiska iyo wade baabuur. Heshiisku wuxuu dhigayaa in waduhu oggolyahay bishiiba lacag cayiman inuu siiyo shirkadda caymiska, shirkadduna waxay oggoshahay inay bixiso wixii kharash ah ee la xiriira shil waduhu galo. Gobolada intooda badan, waa qasab inuu waduhu gato caymiska baabuurta.

MAAMULAHA KIISKA AMA SHAQAALAHA KIISKA (CASE MANAGER or CASE WORKER): Qof ka tirsan hay'adda adeegga bulshada oo ka caawiya qaxootiga inay heelaan adeegga ay u baahanyihiin.

HANUUNINTA DHAQANKA (CULTURAL ORIENTATION [CO]): Habka loo barto macluumaadka ku saabsan nolasha Maraykanka. Habkan waxa laga bilaabaa dibedda, waxaana lagu sii wadaa Maraykanka gudihisa.

WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO ADEEGGA BULSHADA (Department of Health and Human Services [HHS]): Hay'ad dawli ah oo maalgelisa caafimaadka iyo adeegga bulshada, gaar ahaan kuwa aan awood u lahayn inay iscaawiyaan.

WASAARADDA ARRIMAHA DIBEDDA (Department of State): Hay'ad dawli ah oo maamusha Barnaamijka Oggolaanshaha Qaxootiga ee Maraykanka (U.S. Refugee

Admissions Program), oo ay ka mid yihiin barnaamijka Qaabilaadda iyo Meeleyntu (Reception and Placement [R&P]).

BAABUUR WADID ADIGOO MAANDOORSAN/BAABUUR WADID ADIGOO SAKHRAANSAN (DRIVING UNDER THE INFLUENCE [DUI]/DRIVING WHILE INTOXICATED [DWI]): Baabuur ama gaadiid matoor leh wadid adigoo sakhraansan ama daroogaysan.

ADEEGYADA GURMADKA DEGDEGGA AH (EMERGENCY SERVICES): Adeegyada caawiya dadka ay xaalad degdeg ihi la soo daristo, sida dab, falal dembi, iyo xaalado cafimaad oo halis iyo lama-filaan ah. Saddexda nooc ee adeegyada gurmada degdegga ahi waa booliiska, waaxda dabdemiska, iyo adeegga ambalaaska.

KAARKA OGGOLAANSHAHA SHAQADA (EMPLOYMENT AUTHORIZATION DOCUMENT [EAD]): Kaar ay dawladdu bixiso oo qofka sita u oggolaanaya inuu ka shaqaysto Maraykanka gudihisa muddo cayiman illaa intuu ka helayo sharci immigrayshan oo khaas ah. Kaarka EAD waxa marmar loogu yeeraa kaarka oggolaanshaha shaqada (work permit).

FASALLADA LAGU BARTO AF-INGIRIISIGA AF LABAAD AHAAN (ENGLISH AS A SECOND LANGUAGE [ESL] CLASSES): Fasallada Af-Ingiriisiga lagu barto oo loogu talagalay dadka waaweyn

iyo carruurta afkooda hooyo aanu ahayn Af-Ingiriisigu.

URURRO KU SALAYSAN QOOMIYADAH BULSHO (ETHNIC COMMUNITY-BASED ORGANIZATIONS [ECBOs]): Ururro bulsheed ay asaaseen qaxootiyo hore iyo muhaajiriintu si ay adeegyo caawiya u siiyaan dadka ku cusub bulshadooda.

BARNAAMIJKA FUUD STAAMKA (FOOD STAMP PROGRAM): Barnaamij dawli ah oo ka caawiya qoysaska danyarta ah gadashada cuntada. Magaca sharciyaysan ee barnaamijkani waa Barnaamijka Taakulaynta Nafaqo Dheeri ah (Supplemental Nutrition Assistance Program [SNAP]).

DIBLOOMAHA HORUMARINTA WAXBARASHADA GUUD (GENERAL EDUCATIONAL DEVELOPMENT [GED] DIPLOMA): Shahaado la siiyo dadka waaweyn oo u dhiganta dibloomaha dugsiga sare ee kobcinta waxbarashada guud.

GIRIIN KAAR (GREEN CARD): Kaarkan oo isna loo yaqaan kaarka Deggenaanshaha Rasmiga ah (Permanent Resident card) waxay USCIS (eeg micnaha USCIS ee ku yaal bogga 228) siisaa dadka aan haysan dhalashada Maraykanka, wuxuu caddeeyaa in qofka sitaa yahay qof sharci rasmi ah ku jooga Maraykanka. Qofka sita kaarkan waxa loo yaqaanaa Deggane Rasmi ah oo Sharciyaysan (Lawful Permanent Resident [LPR]).

CAYMISKA CAAFIMAADKA (HEALTH INSURANCE): Heshiis bixiya kharashka la xiriira daryeel caafimaad oo jirro ama dhaawac sababay. Kharashka caymiska caafimaadka waxa bixiya shaqaaleeyaha, qofka, ama labaduba.

MUHAAJIR (IMMIGRANT): Qof u guura waddan kale si u ugu noolaado si rasmi ah.

URURK CAALAMIGA AH EE MUHAAJIRKA (INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION [IOM]): Urur caalami ah oo dhiirrigaliya in si bini-aadannimo iyo habsami leh dadka looga tallaabiyo xadadka.

MEDIKEYD (MEDICAID): Barnaamij dawli ah oo siiya caymiska caafimaadka dadka danyarta ah ee u qalma.

MEDIKEYR (MEDICARE): Barnaamij dawli ah oo siiya caymiska caafimaadka dadka da'doodu ka weyntahay 65, iyo dadka da'doodu ka yartahay 65 oo qaba laxaad li'i cayiman.

XAFIISKA DIB'UDEJINTA QAXOOTIGA (OFFICE OF REFUGEE RESETTLEMENT [ORR]): Xafiis dawli ah oo hoos yimaadda Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeega Bulshada oo caawimo siiya qaxootiga iyo kooxo kale oo gaar ah, adeegsadana barnaamijyadiisa iyo deeqaha.

GODADLEYN (POLYGAMY): Qabidda hal xaas/nin ka badan. Dhowr xaas/nin qabiddu waa sharci darro Maraykanka gudihisa.

GOOBTA SOO GALIDDA (PORT OF ENTRY): Goobta qofku sharci ahaan uga soo galo waddan.

QORAALKA BALLANQAADKA (PROMISSORY NOTE): Dukumenti gees ka mid ah saxeexayaasha u ballanqaadayo inuu siin doono lacag cayiman geeska kale. Inta badan qoraalka baalanqaadku wuxuu la xiriira bixinta deynta.

BARNAAMIJKA QAABILAADDA IYO MEELEYNTA (RECEPTION AND PLACEMENT PROGRAM): Barnaamij ay leedahay Wasaaradda Arrimaha Dibeddu oo siisa qaxootiga cusub adeegyo daruuri ah iyo taageerada ay u baahanyihiin si ay u bilaabaan noloshu dagaankooda cusub.

QAXOOTI (REFUGEE): Qof dalkiisa/dalkeeda qasab kaga baxay/baxday isagoo/iyadoo ka baxsanaya/baxsanaysa cadaadis. Micnaha buuxa ee qaxootigu sida ay Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootigu (UN Regugge Agency) u qeexday waa qof "isagoo cabsi la hubo ka qaba in la cadaadiyo sababo ku salaysan jinsiyad, diin, dhalasho waddan, ka mid ahaansho koox bulsho gaar ah ama fikir siyaasadeed, oo waddankuu u dhashay ka jooga bannaanka, isla markaana aan ku noqon karin, ama cabsidaa awgeed aan rabin inuu naftiisa ku aamino waddankaasi."

CAAWIMADA LACAGTA KAASHKA EE QAXOOTIGA (REFUGEE CASH ASSISTANCE [RCA]): Barnaamij dawli ah oo caawimo lacageed oo ku-melgaar ah siiya qaxootiga doobabka ah iyo qoysaska aan carruur lahayn.

DIB'UDEJIN (RESETTLEMENT): Habka si rasmi ah loo dego waddan.

HAY'ADDA DIB'UDEJINTA (RESETTLEMENT AGENCY): Hay'ad bixisa adeegyada aasaasiga ah ee qaabilaadda iyo meeleynta oo ay heelaan qaxootigu. Waa surtagal inay hay'addu bixiso adeegyo kale.

XARUUNTA TAAKULEYNTA DIB'UDEJINTA (RESETTLEMENT SUPPORT CENTER [RSC]): Xarun ka caawisa qaxootiga dalabka dib'udejinta Maraykanka. Xarumaha RSC waxa kale oo ay maamulaan hawlaha dhoofitaanka ka hor, sida hanuuninta dhaqanka.

ADEEGGA CIIDAN (SELECTIVE SERVICE): Hay'ad dawli ah oo awood u leh inay qof kasta ugu yeedho adeeg ciidan, qaasatan markuu dagaal jiro. Ragga da'doodu u dhaxayso 18 iyo 23 waa inay iska diwaan galiyaan Adeegga Ciidan (Selective Service).

BIXIYAHA ADEEGGA (SERVICE PROVIDER): Hay'ad ama urur siiya dadka adeeg ama adeegyo badan.

HANDADAAD SHUKAANSI (SEXUAL HARASSMENT): Dabeecad kasta oo aan la soo dhowaysan, kuna salaysan shukaansi oo qofku ka cabsado ama dhibsado.

KAARKA SOOSHAL SAKUURITIGA (SOCIAL SECURITY CARD): Kaar dawladdu bixiso oo u ku qoranyahay lambarka sooshal sakuuritiga qofku. Lambarka sooshal sakuuritigu waa muhiim waayo waxa looga baahanyahay helidda shaqada, munaafacaadka iyo adeegyada dawladeed.


CAAWIMADA KU-MEELGAARKA AH EE QOYSASKA DANYARTA AH (TEMPORARY ASSISTANCE TO NEEDY FAMILIES [TANF]): Barnaamij dawli ah oo caawimo lacageed oo ku-meelgaar ah siiya waalidiinta leh carruur.

HAY'ADDA QAXOOTIGA EE QARAMADA MIDOOBAY (THE UN REFUGEE AGENCY [UNHCR]): Hay'ad caalami ah oo kormeerta, maamushana qaxootiga, kana shaqaysa sidii xal loogu heli lahaa dibaatooyinka aafeeyay qaxootiga aduunka.


ADEEGYADA MUWAADDININIMADA MARAYKANKA IYO IMMIGRAYSHANKA (U.S. CITIZENSHIP AND IMMIGRATION SERVICES [USCIS]): Hay'ad dawli ah oo kormeerta sharci ku soo galidda Maraykanka. USCIS waxa kale oo ay dadka ku cusub waddanka siisaa macluumaadka iyo qalabka ay u baahanyihiin sidii ay u noqon lahaayeen Deggenayaal Rasmi ah ah oo Sharciyaysan (Lawful Permanent Residents [LPRs]) iyo muwaaddiniin.

WAJIYADA DAREENKA


Waxa marmar dhici karta inaad dareenkaaga sharixi kari weydid. Wajiyadan hoose waxay kaa caawin karaan inaad muujisid dareenkaad yeelanaysid qaarkood markaad ku gudajirtid amuuraha dib'udejinta.




Caraysan




Caajisan




Wareersan




Wax-ogaal jecel




Niyad-kacsan




Wanaagsan



Faraxsan




Bilaa samir ah




ceebeysan




Kurbaysan




Hanweyn




Murugaysan




Naxsan



Yaabban



Mahadiye



Werwersan

Ku soo Dhowow AMEERIKA

Ku soo dhowow Ameerika: Buugga Tilmaanta Qaxootiga waxa ku jira macluumaad qiimo leh oo loogu talagalay in qaxootiga loo diyaariyo noloshooda bilaha ugu horreeya ee Maraykanka. Wuxu qeexayaa waxyaabaha ay qaxootigu ka filan karaan degitaanka gurigooda cusub, shaqo raadin, la kulanka dadka ku nool Ameerika, iyo la qabsiga dhaqanka Maraykanka iyo bulshadeeda. Mawduucyada sharraxan waxa ka mid ah:

Geeddisocodka Dib'udejinta

Maareynta Lacagta

Ameerika iyo Dhaqanka Maraykanka

La Qabsiga Dhaqanka iyo Isbeddelka Doorarka

U Socdaalka Ameerika

Xuquuqda iyo Waajibaadka Sharciga araykanku Dhigayo

Hay'adda Dib'udejinta

Guryeynta

Shaqaaaleyn

Adeegyada Bulshada

Barashada Af-Ingiriisiga

Gaadiidka

Waxbarasho

Daryeelka Caafimaadka

Geeddiga Dheer

Buuggan tilmaanta ah waxa kale oo ku jira layliyo, isqiimayn qof ahaaneed, iyo ereyo iyo odhaahyo caadiyan Af-Ingiriisiga laga isticmaalo.

